NUQULKA 3.0

QORSHAHA BADQABKA SHAQADA MUDADA FOG

DUGSIYADA DPS EE DEGMADU MAAMUSHO

SHAXDA MAWDUUCYADA

Horudhac

Bayaanka Sinaanta

Sharciga: Federaalka iyo Gobalka

Xadidaadaha Fulinta iyo Xeerarka DPS

Xaaladaha Gaarka ah

Caafimaadka Dhimirka: Badqabka Ardayda:

- Guudmarka Kooxda Caafimaadka Dhimirka
- Farsamooyinka Fahansan Dhacdooyinka Uur kutaallada Reebay
- Taageerada Dareenka Bulshada
- Baaritaanka Guud
- Tababarka Kahortaga Masiibada aan Rabshada Ahayn
- Habraacyada Hanaanka Badqabka Ardayda
- Ka hortaga Xoogsheegashada

Caafimaadka Dhimirka: Badqabka Dadka Waawayn

- Tababarka ku aadan Gurmadka Masiibada
- Taageerooyinka Shaqaalaha

Xaaladaha Dugsiga

Qorsheyaasha Dhismaha Badqabka iyo Soo Dhawaynta leh

- Goobta Dugsiga oo Badqab iyo Soo Dhawayn Leh
- Qorsheyaasha Badqabka Shaqada
- Diiwaan Gelinta Ardayda
    - Alternative Placement Process
    - Ardayda Lagasoo Wareejiyo Degmooyinka Kale
- Kooxaha Xaaladaha Degdega ah ee Dugsiga (Kooxda Xaalada Degdega ah)

Badqabka Dugsiga/Dhismaha

- Qiimaynada Badqabka Dugsiga/Dhismaha
- Habraaca Gurmadka Caadiga ah
- Baaritaannada Ardayga

- Wada Shaqayn lala Yeesho Waaxaha Magaallada

Xaalada Nidaamka

Ay DPS Maamusho

Nidaamyada Badqabka

- Shaqaalaha Waaxda Cimilada iyo Badqabka
- SSaraakiisha Imkaaniyaadka Iskuulka
- Habraacyada iyo Jadwallada Isgaarsiinta
- Farsamooyinka iyo Xeerarka Anshaxa
- Kooxda Gurmadka Masiibada ee Degmada
- Incident Command
- Nidaamka Sheega Hubka

Kor U qaadista Adkaysiga Carruurta

- Kahortaga Rabshada Dhalinta ee Dugsiyada Hoose
- Jawaab celinta Dhaqanka Waxbarashada
- Fursadaha Barashada Shaqada
- Fursadaha Waxbarashada Heerka Sare ah
- Xarumaha Bulshada
- Wakhtiguu Dugsigu Xiran Yahay

Xaaladaha Nidaamka ee aysan Maamulayn DPS

- Badqabka Aasaasiga ah
- Daryeelka iyo Caafimaadka Dhimirka: La heli Karo oo Qiimo Jaban
- Isbadelka Xeerka
- Dib U eegista Gurmadka Masiibada

Lifaaqa

Falcelinta Bulshada iyo Xogta

- Guudmarka Xogta
- Fikradaha Aan Dhageysanay iyo Meesha Lagu Dabaqay Qorshaha
- FFikradaha Aan Dhageysanay iyo Meesha aan lagu Darin Qorshaha

Khayraadka

- Muhiimadaha 23-24
- Xadiga iyo Xadidaadaha Caafimaadka Dhimirka ee DPS
- Fursadaha Tababarka: Guudmarka, Jadwalka iyo Shuruudaha
- Imkaaniyaadka Abuurista Qorshaha
- Imkaaniyaadka Magaallada Denver

HORDHAC

Dugsiyada Dadweynaha ee Denver waxay u taagan yihiin siinta goobo waxbarasho uu badqab iyo soo dhawayn leh ardaydeena, qoysaska, iyo macalimiinta dhammaan degmada dugsiga. Badqabku waa muhiim. DPS waxay diirada saaraysaa joogtaynta goobaha waxbarashada oo diirada saaraaya ardaydeena, kor u qaadaaya khibrada shaqaalaheena, una badalaaya higsigeena ah in Arday Kasta uu Guulaysto mid xaqiiqo ah.

Waan ognahay in xal u helida badqabka io jawiga dugsiyadeena iyo dhismeyaasheena aysan ahayn wax Dugsiyada Dadweynaha ee Denver ay keligeed fulin karto - shaqadaas waxay u baahan tahay wada shaqayn adag oo aan la samayno Magaallada Denver iyo bulshadeena oo dhan.

Si degmada dugsigu u buuxiso yoolka joogtaynta goob waxbarasho oo badqab iyo soo dhawayn leh, DPS ayaa dhaqan gelinaysa xeerar adag, habraacyo, iyo nidaamyo diirada saaraaya arimaha la xiriira badqabka. Yoolka aasaasiga ah ee xeerarkaan badqabka degmada oo dhan ee gaarka u ah dugsiga waa in la dhiso, kor loo qaado, lana joogteeyo badqabka jireed iyo kan maskaxeed ee ardaydeena, shaqaalaha, qoysaska iyo xubnaha kale ee bulshada Denver ee soo booqda dugsiyadeena iyo xarumaheena.

Waxaan ognahay in xal u helida badqabka dugsigu aysan lahayn meelo cad oo ay ku dhammaato - waa shaqo joogto ah oo u baahan wada shaqayn lala sameeyo bulshadeena. Si hadafkaas loo fuliyo, shaqadaan lagu dhisay farsamooyinka ugu haboon ee hawsha badqabka anagoo kaashanayna xirfadleyaasha ganacsiga, iyo fikrado aan ka uruurino ardayda, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada. Waxaa loogu talagalay inay tusmo iyo imkaaniyaad bixiso si looga hortago rabshada iyo dhibaatooyinka sidoo kalena ay tilmaan ka bixiso xaaladaha kaladuwan ee degdega ah. Qorshaha waxaa ku jira mid kasta oo kamid ah dugsiyada degmadeenu maamusho, iyo dhismeyaasha Xafiiskeena Dhexe. Sida aad ku arki doontaba qorshaha, badqabka ayaa ah hanaan diirada la saaray kaasoo ka kooban dhinacyo badan ayna ku jiraan taageerada Caafimaadka Maskaxda, tababarka gudaha maalinta shaqada, tignooloojiyada, dhismeyaasha iyo nidaamyada.

BAYAANKA SINAANTA

Sinaanta Isirka iyo Waxbarashada ayaa ah masuuliyad wadareed na wada saaran. Waxaan gaari doonaan sinaan marka aan baabi'ino nidaamyada qotoda dheer ee ku dhisan gumaysiga kuwaasoo horay u abuuray sinaan la'aan ka jirta helitaanka iyo qoondada fursadaha iyo khayraadka dadka matalaaya bulshooyinka la duudsiyo, ayna ku jiraan isirka, qoomiyada, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, luuqada iyo awooda.

Waxaan abuuri doonaa xaalado aan dhammaanteen qayb ka nahay, ka tirsan nahay, aan ku leenahay ujeedo cad (sabab) aana xoriyad (ikhtiyaar) u haysano inaan hogaamino meelaha na quseeya. Marka aan abuurno xaaladahaan, waxaan baabi'inaynaa qiyaasta guusha ama fashilka ee ardayda iyo shaqaalaha.

SHARCIGA: FEDERAALKA IYO GOBALKA

Xaalada Hadda: Xeerka gobalka ee la xiriira Badqabka Dugsiyada iyo Qorsheyaasha Badqabka Dugsiga waa C.R.S. § 22-32-109.1. Shuruudahaan sharciga ayaa lagu dhafaa Xeerarka Badan ee Maamulka DPS, ayadoo ADD uu noqonaayo xeerka camimaaya Badqabka Dugsiyada. Waxaa jira qodobo badan oo sharciga kamid ah oo la xiriira badqabka dugsiga.

Dookha dugsiga waxaa maamusha C.R.S. § 22-36-101, kaasoo saameeya diiwaan gelinta ardayda lana xiriira xaaladaha ay degmadu ku diidi karto ama ku aqbali karto diiwaan gelinta. Isla sidaas, xeerarka ugu waawayn ee anshaxu waa § 22-33-105 iyo § 22-33-106, kuwaasoo ayagoo ay la jiraan mawduucyo kale, ka hadla ceyrinta iyo diidmada diiwaan gelinta, kuwaasoo ku kooban muddooyinka halka sano ee talaabada gaarka ah ee la xaqiijiyay. Qaybta 22-33-106.1 ayaa la xiriirta isticmaalka talaabooyinka anshaxa ee ka dhanka ah ardaydeena yaryar.

Sharciga Badqabka Dugsiga ee Claire Davis, oo ku jira § 24-10-106.3, ayaa ka doonaaya degmooyinka inay qaadaan talaabo macquul ah si ay uga hortagaan falalka beegsiga ah ee rabshada ka dhacda gudaha dugsiyada. DPS ayaa joogtaynaysa xiriir dhow oo ay la samayso Xarunta Imkaaniyaadka Badqabka Dugsiga ee Colorado, taasoo ku bixisa xog ku saabsan Claire Davis.

Heer federaal, sharciyada muhiimka ah ee la xiriira badqabka waxaa ku jira Sharciga Dugsiyada Ka Caagan Hubka, iyo marka la bixinaayo taageerada loo baahan yahay iyo xal u helida walaacyada dhanka habdhaqanka iyo badqabka ardayda qaba naafada la hubo iyo tan looga shakiyay, IDEA iyo Qaybta 504 ayaa la fulin karaa. Sharciyada xuquuqda madaniga ah ee heer gobal iyo heer federaal, kuwaasoo mamnuucaaya dhibaataynta iyo takoorka ku saleysan sifooyinka sharcigu difaacaayo, ayaa sidoo kale la xiriira badqabka dugsiga.

Degmadu waxay tixgelisaa dhammaan xadidaadaha sharci ee jiri kara, waxayna tixgelisaa farsamooyinka ugu wanaagsan ee xal u helida walaacyada habdhaqanka iyo badqabka, iyo sidoo kale mabaadii'da degmada, marka ay gaarayso go'aannada la xiriira adeegsiga edbinta ku saleysan dugsi ka cayrin iyo hawlaha la xiriira.

Sharci cusub oo kasoo baxayKulankii Guud ee 2023:

- Lifaaqa laga helaayo Warbixinta Buuxda ee Dhammaadka Kulanka

XADIDAADAHA LA XIRIIRA EE FULINTA IYO XEERARKA DPS

Muuhimada ay Dugsiyada Dowladda ee Denver sinayso badqabka ardaydeena, shaqaalaha iyo bulshada ayaa lagu sheegay xeerarka soo socda ee Gudiga: Xeerka Gaarka ah ee 1.3 - Badqabka Ardayda iyo Shaqaalaha, Xeer 1.4 - Caafimaadka iyo Badqabkaeerka Gaarka ah, Xadidaada Fulinta 10 - Anshaxa, Eedaabt iyo xaadirista Ardayda, iyo iyo Xadidaada Fulinta 11- Badqabka Dugsiga. Degmadu waxay sidoo kale dhaqan gelisay xeerarka maamulka ADD iyo J xeerarka quseeya anshaxa ardayda. Xeerarkaan waxay waafaqsan yihiin shuruudaha sharciga federaalka iyo gobalka.

Febraayo 23, 2023, Gudiga Waxbarashada ayaa ansixiyay Xeerkeeda Gaarka ah ee la cusbooneysiiyay kaasoo gebi ahaanba u gaar ah badqabka. Xeerkaan cusub ee badqabka ayaa ka jawaabaaya rabashada joogtada ah ee ka dhacda dugsiyada wadanka oo dhan. Xeerka 1.4 ayaa sheegaaya in Gudigu uu muhiimadiisa saaraayo xeerka rasmiga ah, kaasoo Kormeeraha guud uu ku dabiqi doono talaabada fulinta. Tani waxay sii xaqiijin doontaa hormar la taaban karo oo muuqda oo laga gaaro badqabka kaasoo qayb ka noqda qiimaynta Kormeeraha Guud, saamayna ku leh miisaaniyada degmada.

Bishii Maarso 23, 2023, Gudiga Waxbarashada ayaa ku amray Kormeeraha Guud inuu boobsiiyo abuurista qorshaha badqabka ee mudada dheer uuna u soo gudbiyo Gudiga ugu danbayn Juun 30, 2023.

Markay ahayd Juun 15-keeda, 2023, Guddoonka Waxbarashada ayaa u codeeyay in la badelo Xadidaada Fulinta 10.10 si loogu ogolaado Saraakiisha Imkaaniyaadka Iskuulka inay ku soo laabtaan xarumaha dugsiyada. Xadidaada cusub ee Fulinta ayaa sheegaysa:

Sidaas awgeed, Kormeeraha guud waa inuusan ku fashilmin:

EL-10.10 – Inuu abuuro xeerarka maamulka iyo Heshiiska Is-afgaradka oo lala sameeyo Waaxda Booliiska Denver si looga heshiiyo marka joogista rasmiga ah ee Saraakiisha Imkaaniyaadka Iskuulka (SRO) ee dhismaha dugsiga ay muhiim u tahay dugsiyada degmadu maamusho iyo kuwa charter-ka. Qaado talaabooyin macquul si loo xaqiijiyo:

- Saraakiisha SRO ee aan raacin xeerka gudiga, xeerka maamulka, iyo cabirka guud ee anshaxa degmada, ama farsamooyinka ugu fiican ee NASRO si degdeg ah looga saaro meesha marka uu go'aansho Kormeeraha Guud;
- Ganaaxyada iyo xabsi dhigista ayaa la kormeeri doonaa. Waa inuu baxshaa warbixinta afarta jeer sanadkii ee ganaaxyada iyo xabsi dhigista asagoo adeegsanaaya ajandaha ogolaanshaha ee kulannada Guddoonka Waxbarashada ilaa dhammaadka sanad dugsiyeedka 25-26. Waa inuu siiyaa warbixinnada sanadlaha ah Guddoonka Waxbarashada sanadaha soo socda. Xogta waa in lagu daraa sababta ganaaxa iyo xabsi dhigista waana in la isku dhafaa da' ahaan iyo dadka laga tirada badan yahay sida ku qoran Qodobada 1.0 (Sinaanta) ee dugsiyada degmadu maamusho iyo kuwa charter-ka. Waa inuu si degdeg ah u qaadaa talaabo sixid ah uuna u sheegaa Gudiga haddii

degmadu ay ka warqabto tiro ganaaxyo iyo xiris khaldan oo loo gaystay dadka la duudsiyo heer degmo iyo heer dugsiba.

XAALADAHA GAARKA AH

Xaaladaha Gaarka ah ayaa ka hadlaaya qaababka DPS ay muhiimada u siinayso maaha keliya badqabka jireed ee ardayda iyo shaqaalaha, laakiin sidoo kale badqabka dhimirka. DPS ayaa aqoonsan in xalinta rabshada dhalinta iyo badqabka ardaydu u baahan tahay qaab wacyi gelin iyo kahortag ku dhisan si looga taageero ardaydeena caafimaadkooda dhimirka, bulshanimada iyo caafimaadka shucuurta, caafimaadkooda jirka dhimirka, iyo caafimaadkooda habdhaqanka. Qaybtaan waxay ka hadlaysaa qaababka kaladuwan ee degmadu uga caawinayso ardaydeena iyo shaqaalaha inay dareemaan maskax ahaan, shucuur ahaan iyo jir ahaanba badqab.

CAAFIMAADKA DHIMIRKA: BADQABKA ARDAYDA

GUUDMARKA KOOXDA CAAFIMAADKA DHIMIRKA

Caafimaadka Dhimirka waxaa ku jira caafimaadka dhimirka, faya qabka shucuurta iyo habdhaqanka carruurta. Waxay saamaysaa sida carruurtu u fakaraan, dareemaan ayna una shaqeeyaan waxayna door ka qaadataa sida ilmuhu u maareeyaan istareeska, ula xiriiraan dadka kale ayna ku gaaraan dookhyo caafimaad qaba. Qaar kamid ah xanuunnada Caafimaadka Dhimirka ee ugu badan ee laga helay carruurta waa Cilada Dareenka Xanuunka Xanaaqa badan (ADHD), Xanuunka werwerka, Uur Kutaallada iyo Xanuunada La Xiriira Walaaca, iyo Xanuunnada Niyad Jabka. Ilaa aalafa caalamiga ah bilaabatay, waxaa aragnay koror ku yimid carruurta iyo dhalinta soo sheegaaya heerarka sare ee walwalka iyo xanuunka niyad jabka. (CDC, Caafimaadka Dhimirka Carruurta)

FARSAMOOYINKA FAHANSAN DHACDOOYINKA UUR KUTAALLADA REEBAY

Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa dhaqan gelisay Qaraarka Gudiga si ay u noqoto Degmo Dugsiyeed Fahansan Waxyeelada Xasuusaha Xun bishii Oktoobar 2017 taasoo ahayd hanaan lagu xalinaayo saamaynada xasuusaha xunxun ee bulshada, shucuurta iyo kobaca tacliinta ee ardayda DPS.

Kooxda Farsamooyinka Fahansan Dhacdooyinka Uur kutaallada Reebay ayaa u taagan bixinta fursadaha hormarinta xirfada kuwaasoo wax ku bara aasaasyada iyo saamaynada uur kutaallada xun iyo khibradaha xunxun ee carruurnimada hore ee la xiriira kobaca maskaxda iyo habdhaqanka. Kooxdaan waxay diirada saartaa kor u qaadista Farsamooyinka Fahansan Dhacdooyinka Uur kutaallada Reebay oo ah farsamooyin ku haboon cid kasta.

Farsamooyinkaan waxaa ku jira xeeladaha la qabsiga iyo farsamooyinka ka caawiya ardayda iyo shaqaalaha maareynta habdhaqankooda iyo inay dejiyaan caradooda. Ka macalimiin ahaan, waa muhiim inaan fahanno heerka maskaxeed ee ardaygu ku jiro si loo fududeeyo waxbarasho heer sare ah. Anagoo siineyna aqoontaan dhammaan macalimiinta, kooxda Farsamooyinka Fahansan Dhacdooyinka Uur kutaallada Reebay waxay rajaynaysaa inay farsamooyinka waxbarashada ka badelaan qaabka ciqaabta ah ayna ku badelaan qaab naxariis leh.

Kooxdu waxay si gaar ah diirada u saaraysaa siinta taageerooyin faa'iido u leh qof kasta, halkii ay diirada saari lahayd shaqsiyaadka ku jira uur ku taallada xun ama balaaran. Kooxdu ma baarayso ama ma daawayso ardayda waajahaysa xasuusta xun, kiisaska balaaran ayaana loo gudbiyaa kooxda caafimaadka dhimirka ee dugsiga.

Xaalada Hadda: Farsamooyinka Fahansan Dhacdooyinka Uur kutaallada Reebay ayaa ka caawiya dugsiyada inay si sax ah u taageeraan dhammaan ardayda si ay u dareemaan badqab - jir ahaan, bulsho ahaan, shucuur ahaan iyo tacliin ahaanba - ayagoo xalinaaya baahiyaha ardayda qaabab ruuxi ah, ayagoo tixgelinaaya xiriiradooda, maaraynta naftooda, kartida waxbarasho, iyo faya qabka jireed iyo shucuureed. Shaqadaan ayaa taageeraysa awooda shaqaalaha si ay ugu wada shaqeeyaan ka koox ahaan qaab ku dhisan masuuliyad wadareed ka saaran arday kasta. Dugsiyada Dadweynaha ee Denver ayaa hogaanka u haysa degmooyinka dugsiyada magaallada ee baxsha taageerooyinka fahansan uur kutaalooyinka iyo kuwa gaarka u ah ardayda dhacdooyinka xunxun soo maray. Kooxda Farsamooyinka Fahansan Dhacdooyinka Uur kutaallada Reebay ee DPS ayaa siisa fursadaha hormarinta xirfada oo joogto ah iyo talo bixin kooxaha guud ee dugsiyada ayagoo bara aqoonsiga iyo dhaqan gelinta farsamooyinka Fahansan Dhacdooyinka Uur kutaallada Reebay ee dugsiga.

Waaxda Caafimaadka Dhimirku waxay ka kooban tahay Waaxda Shaqada Bulshada iyo Adeegyada Dhimirka. Waxaan haysanaa in ka badan 400 oo shaqaalaha bulshada dugsiga ah iyo khubarada caafimaadka dhimirka dugsiga (SW/SP) kuwaasoo ah xubno aqoon leh oo kamid ah shaqaalaha dugsiga kuwaasoo baxsha adeegyada bulshada, shucuurta, habdhaqanka, iyo caafimaadka dhimirka oo toos ah iyo kuwa dadban oo la siiyo carruurta iyo dhalinta. Xirfadleyaashaan ayaa sidoo kale la shaqeeya qoysaska, maamuleyaasha dugsiga, macalimiinta, iyo xirfadleyaasha kale si loo abuuro goobo waxbarasho iyo bulsho oo taageero siinaaya dhammaan ardayda. Filashada ugu yar ee laga doonaayo bixiyaasha adeegga caafimaadka dhimirka ee dugsiga waa 1.0 shaqaale oo waqti buuxa shaqeeya (FTE) calaa dugsi. Anagoo leh 205 dugsi oo badinay filashadaas, taasoo waafaqsan muhiimada aan ku siinay caafimaadka dhimirka tubteena istaraatiijiga ah.

Xirfadleyaasha caafimaadka dhimirka ee dugsigeena iyo shaqaalaha bulshada ee dugsiga ayaa qaata doorarka soo socda:

- Inay la tashtaan macalimiinta iyo waalidiinta si ay uga helaan talooyin ku aadan adeegyada iyo istaraatiijiyadaha kobac ahaan ku haboon si looga caawiyo hormarinta guusha ardayda.

- Inay kala tashtaan waalidiinta iyo macalimiinta abuurista higsiyada/caawimaadaha habdhaqanka ee haboon.
- Inay ka qaybgalaan maaraynta dhibaatada iyo badqabka dugsiga ayagoo qiimaynaaya khatarta, siinaaya caawimaado, samaynaayana isku xirka bulshada.
- Inay qorsheeyaan ayna fududeeyaan caawimaada bulshanimada iyo shucuurta ee ardayda (ayagoo kooxo ah iyo ayagoo keli-keli ah).
- Inay qiimeeyaan baahida taageerada bulshada iyo shucuurta sida ku cad Qaybta 504 ee Sharciga Baxnaaninta iyoSharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA). Inay fasiraan xogta qiimaynta ayna abuuraan higsiyada si loo buuxsho baahiyaha gaarka ah ee ardayga.
- Inay taageeraan mashruucyada degmada ee ku aadan waxbarashada bulshanimada iyo shucuurta.
- Inay noqdaan isku xireyaasha ardayda, waalidiinta/masuuliyiinta, adeegyada qoyska, taageerooyinka baxnaaninta banaanka iyo gudaha dugsiga, maxkamadaha, adeegyada difaaca, dhakhaatiirta, iyo dhinacyada kale, si loo caawiyo carruurta iyo qoysaska waajahaaya dhibaatooyinka sida naafada, xadgudubka, ama fakhriga.
- Xirfadleyaasha Dhimirka ee Dugsiga KELIYA: Inay qiimeeyaan baahida dib u dhacyada/walaacyada dhanka garaadka sida ku cad Qaybta 504 iyo IDEA. Inay fasiraan xogta qiimaynta garaadka ayna abuuraan higsiyada si loo buuxsho baahiyaha gaarka ah ee ardayga.
- Tusmada Dugsiga ku aadan doorarka muhiimada ay Saarayso Waaxdu iyo Shaqada Shaqaalaha Bulshada Dugsiga iyo Xirfadleyaasha Caafimaadka Dhimirka ee Dugsiga ee 22-23. Qabyo qoraalka la xiriira doorarka muhiimada ay Saarayso Waaxdu iyo Shaqada Shaqaalaha Bulshada Dugsiga iyo Xirfadleyaasha Caafimaadka Dhimirka ee Dugsiga ee 23-24.

Marka lagasoo tago masuuliyadaha maalinlaha ah ee dugsiyada, waaxda caafimaadka dhimirka ayaa sidoo kale hogaamisa shaqada badqabka Iskuwaha ardayda ee degmada ee badqabka caafimaadka dhimirka iyo maskaxda, kahortaga iyo caawimaada isticmaalka maandooriyaha, adeegyada baxnaaninta ah iyo caawimaadaha. Kuwaan waxaa ku jira caawimaadaha gaarka u ah xasuusaha xun ee ardayda, shucuurta bulshanimada iyo baaritaanka caafimaadka dhimirka, iyo taageerada kiiska maxkamada ee daahida iyo googoysnimada.

Waxaan dejinay shaqo gaar ah oo katirsan Waaxda Shaqada Bulshada iyo Adeegyada Dhimirka, oo la yiraahdo Khubarada Kahortaga iyo Baxnaaninta (PTS). Shaqadaan ayaa loo sameeyay inay xal u raadiso baahiyaha caafimaadka Dhimirka ee dhalinta iyo carruurta inat badan hawlaha ka baxsan waxyaabaha uu daboolaayo Qaybta 504 iyo IDEA kuwaasoo xaqiijinaaya in dhammaan ardaydu ay helaan daryeelka caafimaadka dhimirka oo tayo sare leh iyo adeegyada lagu baxsho dugsiga oo ay ku jiraan kahortaga iyo caawimaada maandooriyaasha, iyo sidoo kale adeegyada baxnaaninta ah kuwaasoo xalinaaya astaamaha werwerka, niyad jabka, iyo saamaynada kale kuwaasoo ka dhashay u ban bixida xaalad xasuus xun ku reebtay ama qaybaha balaaran ee ka

dhasha xasuusta xun. Labo xubnood oo kamid ah Waaxda Shaqada Bulshada iyo Adeegyada Dhimirka ayaa ah tababareyaasha gudaha ee Caawimaada Habdhaqanka Garaadka ee Uur kutaalada gudaha Dugsiyada (CBITS) iyo Barnaamijka Soo Kabashada, oo ah barnaamijka dhakhaatiir ka shaqeysa dugsiga kuwaasoo la shaqeeya carruurta fasallada birimada ilaa fasalka shanaad. Barnaamijku wuxuu taageeraa ardayda dhacdooyinka xun soo maray haddana leh astaamaha walaaca xasuusta xun ka dhashay. Kuwaani waa koox yar, oo ku saleysan cadayn lana siiyo ardayda dhammaan da'aha ee qaba calaamadaha walaaca uur kutaallada xun ee sareeya. Ilaa hadda, shaqsiyaadkaan ayaa tababaray in ka badan 150 khubarada dhimirka ee DPS ah iyo shaqaalaha Bulshada.

Kooxda kubarada Kahortaga iyo Baxnaaninta ee DPS ayaa sidoo kale ah koox caawimaad oo ka shaqeeya baxnaanintii ugu horeysay abid ee Qiimaynta Balaaran ee Baxnaaninta Habdhaqanka oo diirada Lagu saaro Fahanka Naxdinta Ku dhisan (TF-CBT) oo laga abuuro xarumaha dugsiga. Shaqadaan waxay siisaa ardayda helitaanka cadaalada ah ee waxtarka leh ee daryeelka gaarka ah oo loo sameeyay yareynta astaamaha walaaca kadib naxdinta.

Marka lagasoo tago kooxda caafimaadka dhimirka, waxaa jira shaqooyin kale oo kaladuwan oo ay ka qabtaan dhismaha dugsiga kuwaasoo taageera fayqabka iyo sidoo kale caafimaadka dhimirka ee ardayda:

- La taliyaha Dugsiga: Wuxuu baxshaa taageero sadex qaybood ah: tacliinta, shucuurta bulshanimada, iyo xirfada. Waxaa loo tababaray ka jawaabida habraaca badqabka ardayda (dib u eegista khatarta isdilka iyo habraaca dhaaca nafta ee aan ahayn isdilka). Wuxuu u baahan yahay shahaado sare oo ku qaato la talinta dugsiga iyo sidoo kale ruqsadaWaaxda Waxbarashada Colorado (CDE) SSP. Mid kasta wuxuu ku shaqeeyaa si waafaqsan xeerarka Ururka La Taliyaha Dugsiga ee Maraykanka (ASCA).
- Taqasuslaha Kahortaga iyo Baxnaaninta (PTS): Qayb kamid ah barnaamijkeena gudaha ee ee Kahortaga Isticmaalka Maandooriyaha iyo caafimaadka dhimirka, PTS ayaa ka shaqeeya walaacyada isticmaalka maandooriyaha ee ardayda si gaar ah asagoo adeegsanaaya hanaanka SBIRT, kaasoo ah talaabo badel u ah ganaaxa dugsi ka cayrinta. Caawimaadaha dugsiga oo dhan, fasalka oo dhan, iyo kooxaha yaryar ayaa sidoo kale la baxshaa si looga hortago isticmaalka maandooriyaasha loona taageero xal u helida ciladaha caafimaadka dhimirka ee sii kordhaaya. Haddii la sheego, PTS ayaa sidoo kale bixin kara taageerada baxnaaninta gaarka ah ee la siiyo ardayda qaba baahiyaha badan ee caafimaadka dhimirka ama calaamadaha walaaca maskaxda. Wuxuu u baahan yahay inuu haysto shahaadada CDE si uu u nqodo Taqasuslaha Dhimirka ee Dugsiga, Shaqaalaha Bulshada, ama La Taliyaha Dugsiga.
- Kalkaalisada Dugsiga: Waxay isku dubaridaa daryeelka ardayda ayadoo kaashanaysa dhammaan saamileeyda ayna ku jiraan kooxda caafimaadka dhimirka. Waxay xalisaa helitaanka daryeelka, kartida dhaqanka, waxbarashada caafimaadka, sinaanta caafimaadka, isku xirka, yareynta khatarta, go'aamiyaasha bulshada ee caafimaadka iyo muraaqabada. Shaqsiyaadkaan waa qofka koobaad ee arka ardayda qaba ciladaha aan wali la xaqiijin ee caafimaadka dhimirka ee yimaada xafiiska caafimaadka sabab la

xiriirta inaan la dareemin baahiyahooda. Ruqsada CDE SSP ayaa laga waa doonayaa.

- Madaxa Waxbarashada: wuxuu taageeraa dhaqanka dugsiga wuxuuna korjoogteeyaa shaqada anshaxa, ayna ku jirto cadaalada dhaqan celinta ah. Lagama doonaayo wax shahaado ah.
- Taqasuslaha Xaadirinta/Ardayda Cusub: Wuxuu kala shaqeeyaa ardayda iyo qoysaska ardayda aan sida joogtada ah u imaan dugsiga aqoonsiga caqabadaha iyo xal u helida caqabadaha. Lagama doonaayo wax shahaado ah.
- Iskuduweyaasha Farsamooyinka Dhaqan Celinta Dugsiga Ka Shaqeeya: Waxay taageerada caawimaada habdhaqanka siiyaan dhismaha oo dhan ayagoo adeegsanaaya maareynta joogtada ah ee barnaamijka Maamulka Dugsiga. Waxay kala shaqeeyaan madaxa Tacliinta helista qaabab kale oo lagu ganaaxo ardayda u baahan talaabo edbin ah iyo fududeynta caawimaadaha cadaalada Dhaqan celinta. Waxay ka jawaabaan walaacyada habdhaqanka ardayda, waxay abuuraan warbixinno, waxayna kormeeraan ardayda. Lagama doonaayo wax shahaado ah.
- Macalinka: Marka lagasoo tago wax u barista ilmaha qaab fahansan dhacdooyinka uur kutaallada reebay, macalimiintu waxay masuul ka yihiin bixinta casharada SEL iyo aqoonsiga ardayda ka faa'iideysanaaya taageerada dheeriga ah ee caafimaadka dhimirka.

Degmadu waxay sidoo kale kaashataa barnaamijyada caafimaadka dhimirka ee bulshada, gaar ahaanna taageerada shaqsiga ah ama kooxda yar iyo daawaynta qoyska. Iskaashatada waawayn ee caafimaadka dhimirka waxaa kamid ah WellPower, Adeegga Qoyska Yuhuuda ah ee Colorado, Xarunta Talo Bixinta ee Maria Droste, iyo Xarunta U Qareemida Carruurta ee Denver. 80+ dugsi ayaa heli kara adeeg bixiyasha bulshada oo laga heli karo xaruntooda - oo intooda badan ay bilaash ku helayaan ardayda ama qoysasku. Waxaa intaas dheer, waxaan leenahay 19 Rugaha Caafimaadka Oo dugsiyada Ku yaala oo katirsan Denver Health kuwaasoo daryeel siiya ku dhawaad 12,000 oo arday sanad kasta.

Xaalada Mustaqbalka: Sida kor lagu sheegay, Waaxda Shaqada Bulshada iyo Adeegyada Dhimirka ayaa leh in ka badan 400 oo adeeg bixiye oo u adeegga ardaydeena. Sida lagu cadeeyay xogta qaran ee kasoo baxday Koxda Kooban ee *ee Muraaqabada Habdhaqanka Dhalinta iyo Warbixinta Dhacdooyinka: 2011-2021,* carruurta iyo Dhalinta ayaa waajahaaya caafimaadka dhamirka oo liita oo heer xun ah kaasoo u baahan in la kordhiyo bixiyaasha caafimaadka dhimirka. Waxaa intaas dheer, Gudiga Gaarka ah ee Wada Shaqeynta Ardayda, oo ka kooban Bixiyaasha Adeegyada Gaarka ah, ayaa abuuraaya Buug Tusmeedka Adeegyada Gaarka ah ee Ardayda kaasoo qeexaaya tixgelinnada xajmiga shaqada macalimiinta waxbarashada gaarka ah iyo anshaxa bixiye kasta oo Waxbarashada gaarka ah, uuna ku jiro hanaanka isla xisaabtan iyo qiimaynada shaqada macalimiinta. Cabiradaan shaqada ayaa loo adeegsan doonaa in looga warbixiyo khayraadka lagu qoondeeyay nidaamyada miisaaniyada dugsiga si loo buuxsho baahiyaha ardayda. Kooxda Hogaanka Waaxda Shaqada Bulshada iyo Waaxda Adeegyada Dhimirka ayaa ku qeexay ardayda qaba baahiyaha aadka u badan inay yihiin "arday qaba naafo ama loo arko inay qabi karaan naafo, ardayda leh qorsheyaasha

taageerada ardayda, ardayda loo aqoonsado inay khatar ugu jiraan inay caadaystaan googoysnimo, ardayda loo aqoonsan karo inay qabaan dhimaato dhanka dhimirka ah, iyo sifooyin kale oo dhib badan oo u baahan kara taageerooyinka caafimaadka dhimirka ee heerka labaad ama sadexaad."

Bixiyaasheena caafimaadka dhimirka ee ka shaqeeya dugsiga ayaa badanaa ogaada duleello ka jira adeEgyada bulshada ee qoysasku ka faa'iideysan karaan ama u baahan yihiin si ay u u gaaraan guulaha caqabadaha dhanka tacliinta iyo shucuurta bulshanimada. Duleeladaan waxaa ku jira khayraadka caafimaadka dhimirka ee ardayda, waalidiinta iyo xubnaha kale ee qoyska, guriyaynta, cuntada iyo dharka, gaadiidka, iwm. Badanaa shaqaalaheena caafimaadka dhimirka ee dugsiga ma haystaan awood ay ku baxshaan adeegyada Iskudubaridka Daryeelka adag ama taageerooyinka maareynka kiiska kuwaasoo qoysasku u baahan yihiin si ay si guul leh ugu adeegsadaan nidaamka balaaran oo u diyaarsan helitaanka khayraadka daryeelka jirka, dhimirka iyo adeegyada kale ee bulshada. Ayadoo ay jirto baahi dheeri ah oo loo qabo caafimaadka dhimirka iyo taageerada caafimaadka habdhaqanka ee ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha dhammaan wadanka iyo sidoo kale Colorado, waxaa lagu talinayaa in iskaashatada Dugsiyada Dowladda ee Denver ee leh adeegga isku dubaridka daryeelka inay baxshaan daryeel iskuxir ah. Iskaashigaan ayaa xal u noqonaaya caqabadaha ku gudban xaadirista dugsiga iyo helitaanka baahiyaha baahiyaha daryeelka jirka iyo dhmirka ee muhiimka ah.

TAAGEerADA SHUCUURTA BULSHANIMADA

Xaalada Hadda: DPS waxay bixisaa Waxbarashada Tacliinta Ku dhisan Hormarinta Shucuurta Bulshanimada (TSEAL), taasoo ah nidaam dhalinta iyo dadka waawayn ay ku dhisaan xiriiro adag, qadarin leh oo waara. Iskaashiyadaan waxay sahlayaan wax isla barashada iyo in si adag loo qiimeeyo sababaha keenaaya sinaan la'aanta, loona hormariyo xalalka wada shaqaynta leh ee keenaaya faya dhaqrka shaqsiga ah, kuwa bulshada, iyo kuwa dadwaynaha ayadoo la adeegsanaayo cashar toos ah, isku dhafida mawduucyada iyo abuurista goobo badqab iyo soo dhawayn leh.

TSEAL waxaa loogu talagalay in dib loo qaabeeyo awooda si loo hormariyo cadaalada bulshada ayadoo la adeegsanaayo iskaashi dheeri ah oo u dhexeeya dugsiga iyo nolosha bulshada. Waxay xoojinaysaa abuurista aqoonsiga, wakaalada, kamid ahaanshaha, hamiga iyo xal u helida caqabada wada shaqaynta ku dhisan.

Dhaqan gelinta dugsiga oo dhan ee TSEAL waxa ay si qasdi leh u kobcinayso bii'o macalimiintu ay karti bulsho iyo mid shucuureed ka helayaan ayagoo baanaaya, la shaqaynaaya, oo qaabaynaaya xirfadahooda bulshada iyo shucuurta. Ayadoo la socoto xirfadahaan bulshada iyo shucuurta, dugsiyadu waa inay sidoo kale abuuraan wada sheekaysiyo la xiriira isirka, qoomiyada, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, luuqada iyo awooda si wada sheekaysiga ku saabsan TSEAL loogu daro aqoonsiyada buuxa ee ardayda. Waxaa lagu talinayaa in dugsiyadu ay si qoto dheer u eegaan fahanka sida macalimiinta, ardayda, iyo bulshadu u adeegsan karaan

wada sheekaysiyada ku saabsan isirka, jinsiga, jinsiyada, awooda iyo aqoonsiyada kale ee bulshada si loo abuuro nidaamyo iyo taageerooyin xoojinaaya Waxbarashada Tacliinta Shucuurta Bulshanimada ee dadka waawayn iyo Ardayda Labadaba.

Qaybaha Barnaamijyada Hadda ee SEL (TSEAL-ka DPS):

- **Dhaqanka iyo Jawiga**: Waa inaan haysanaa goob badqab leh oo soo dhawayn leh, taageero leh, oo dhaqanka iyo luuqada ilaalinaysa taasoo kobcinaysa waxbarasho iyo kobac lagu bixinaayo goob waxbarasho oo sinaan leh, fahansan dhacdooyinka xunxun ee lasoo maray oo bogsiin leh.
- **Farsamooyinka Dadka Waawayn**: Si looga faa'iideysto xirfadaha dareenka bulshanimada ardayda, dadka waawayn ayaa u baahan inay dareemaan taageero iyo qadarin. Hormarinta Waxbarashada Shucuurta Bulshanimada (SEL) ayaa ku bilaabata dadka waawayn.
- **Cashar Qeexan**: Waa inaan si qeexan u barnaa kartiyada TSEAL ee DPS iyo Aaga Diirada Sinaanta (Wacyiga Nafta / Aqoonsiga, Maaraynta Nafta / Wakaalada, Waciga Bulshada/ Kamid ahaanshaha, Xirfadaha Xiriirka/Xal raadinta Iskaashiga ku dhisan, iyo Go'aan gaarista/hamiga lagu baxsho casharada qasdiga ah ee heerka guud ee casharada. Waxbarista waa in lagu dhisaa adeegsiga xirfada farsamo (ka shaqaysiinta xirfadaha waxbarista ee hore ilaa ku dhaqanka waxa la baro)
- **Isku dhafka Tacliinta**: Waa inaan ku dhafnaa xirfadaha iyo kartida TSEAL bixinta casharada adag iyo shaqooyinka guud ee casharka. Tani waxay fikir iyo baritaar siinaysaa casharada la barto inta lagu jiro casharka qeexan waxayna sharxaysaa xirfad barashada.

Dhammaan dugsiyada ayaa aqoonsaday manhajka SEL iyo khayraadka taageerada casharada tooska ah ee waxbarashada shucuurta bulshanimada inta lagu jiro maalintooda dugsiga. Khubarada Casharada ee lagu maalgasho deeqda ESSER ayaa ka taageera dugsiyada dhaqan gelinta manhajka iyo khayraadka. Tan waxaa lagu sameeyaa qorsheyn, tababar, iyo bixinta fikrado laga baxsho macalimiinta iyo maamuleyaasha dugsiyada si looga fikir dhiibto tayada dhaqan gelinta iyo isku dhafida meelaha diirada lagu saaraayo sinaanta ee TSEAL (Wacyig nafta, Aqoonsiga, Maareynta Nafta/wakaalada, Wacyiga Bulshada/Kamid ahaanshaha, Xirfadaha Xiriirka/Xalinta Iskaashiga ku dhisan ee Caqabadaha, iyo Go'aan gaarista/ Hamiga) oo lagu dabaqaayo manhajka waxbarashada iyo doodaha macnaha leh. Sabab la xiriirta in qaybo badan oo shaqada kamid ah ay ku tiirsan tahay dadka waawayn inay si fiican u fahmaan faya qabkooda shaqsiga ah ee bulshada iyo shucuurta, kooxda TSEAL ee khubarada casharada ayaa bixisa waxvarashada xirfada leh ee la siiyo kooxaha dugsiyada si loo adkeeyo xirfadahaan.

Xaalada Mustaqbalka: DPS waxay u taagan tahay inay Taageerooyinka Shucuurta Bulshanimada siiyo dugsiyada buuxsha baahiyaha ardayda iyo qoysaska. Hagaha aasaasiga ah ee shaqada ayaa noqonaaya dugsiyada, iyo iskaashiga ay la sameeyaan qoysaska iyo bulshooyinka si kor loogu qaado fahanka dhaqan gelinta TSEAl iyo sida ay noqonayso gudaha dhismaha dugsiga una turjumaaya bulshada. Waxaa intaas dheer, DPS ayaa ka shaqeyn doonta

kordhinta tirada iskaashiyada awooda badan (tusaale, Hazel Health) bixiyaasha ka baxsan dugsiga si loo xaqiijiyo luuqad iyo farsamooyin joogto ah kuwaasoo xoojinaaya faya qabka bulshada iyo shucuurta ee ardayda.

BAARITAANKA GUUD

Xaalada Hadda: Farsamada BASC-3 Nidaamka Baarista Habdhaqanka iyo Shucuurta (BASC-3 BESS) ayaa u sahlaysa DPS inay si degdeg ah u aqoonsato ciladaha habdhaqanka iyo shucuurta ee jiri kara *khatarta caafimaadka dhimirka) ee shaqsiyaadka ama tirada badan ee ardayda ama kurayda. Marka ay hesho xogtaan, DPS ayaa balaarin karta waxbarashada oo siinaysa caawimaadaha balaaran ee gaarka ah ee shucuurta bulshanimada iyo caafimaadka dhimirka si loo taageero baahiyaha ardaydeena.

Xaalada Mustaqbalka: Si loo xaqiijiyo waxtarka baaritaanka guud iyo taageerooyinka guud ee SEL ee dhammaan dugsiyada DPS, waxaan siinay tilmaan soo socota hogaamiyaasha dhismaha:

- Dhammaan ardayda u qalma* ayaa la baari doonaa ayadoo la adeegsanaayo labada qaab ee BESS (Warbixinta Shaqsiga ah ee Ardayda, Warbixinta Macalinka, iyo/ama Warbixinta Waalidka) sadex jeer inta lagu jiro sanad Dugsiyeedka 23-24 (biloowga, bartamaha, iyo dhammaadka sanadka).
  **Waalidiinta ayaa ka saari kara ardaygooda buuxinta Foomamka Warbixinta Shaqsiga ah ee Ardayga.*
- Cabirkaan waxaa loo sameeyay si loo taageero kooxaha dugsiga, maamuleyaasha dhismaha, iyo taageereyaashooda/hogaanka heer degmado si ay u fahmaan una dhaqan gashaan himilooyinka dhamaystirka BESS inta lagu jiro sanad Dugsiyeedka 23-24.
- Yoolka kama danbaysta ah ee waa u adeegsiga xogta BESS si loogu dooro ardayda heerka ugu haboon iyo nooca caawimaada caafimaadka dhimirka ama shucuurta bulshada - ayadoo la adeegsanaayo qaabka saxda ah/manhajka, waqtiga saxda ah, mudada saxda ah, ayna baxshaan kooxda shaqaalaha dugsiga oo tababar sare u haysta.

TABABARKA KAHORTAGA MASIIBADA AAN RABSHADA AHAYN

Tababarka Caawimaada Dhibaatada Aan Rabshada Ahayn (NCI) ee aqoonsiga buuxda haysta ayaa la siiyaan dhammaan shaqaalaha DPS ee maalintaas shada ku jira. NCI ayaa ka taageera shaqaalaha kahortaga, aqoonsiga iyo ka jawaabida xaalada dhibaatada ah ayagoo la siinaayo fahan ku aadan sida loo dejiyo loona faragasho xaalada qaab badqab iyo taageero leh. Shaqaalaha ayaa baranaaya xirfadaha go'aan gaarista kuwaasoo waafaqsan heerka jawaabta ku haboon khatarta dhibaatada, ayagoo diirada saaraaya jawaabaha ugu fudud ee xaqiijinaaya *Daryeelka, Faya dhawrka, Badqabka iyo Amaanka*. Tababarkaan wuxuu leeyahay natiijooyin adag oo ku aadan yareynta habdhaqannada ardayda inay kasii daraan. Xubnaha shaqaalaha

ayaa dareemaaya in lagu taageeraayo tababarkaan maadaama ay helayaan farsamo ay ku aqoonsadaan xaaladaha biloowga ah ee kasii dari doona ayna faro gelin samayn karaan qaab kahortag iyo gurmad leh. Hadda, DPS ayaa diirada saaraysa tababar diirada saaraaya shaqaalaha iyo sidoo kale kaaliyaasha qof iyo halka ah.

Xaalada Mustaqbalka: Tababarka NCI ayaa muhiim u ah siinta shaqaalaha agabka muhiimka ah si ay u aqoonsadaan una faro gashaan xaaladaha ardayda muujinaaya habdhaqannada ay u badan tahay inay noqdaan xaalad dhibaato oo keenaysa khataro dhanka badqabka ah oo ku dhaca ardayda iyo shaqaalaha. Waxaan ka shaqeyn doonaa kordhinta tirada xiisadaha tababarka ee asbuuca caadiga ah ee shaqada si aan u fududeyno in shaqaale badan oo toos ula shaqeeya ardayda dugsiyadeena ay tababar iyo xirfad u yeeshaan agabkaan gaarka ah.

HANAANKA HABRAACA BADQABKA ARDAYDA

Xaalada Hadda: Marka ay suuragal tahay, waxaan aqoonsanaa barnaamijyada kahortaga ah ee aan bixin karno iyo sidoo kale liiska talaabooyinka suuragalka ah iyo caawimaadaha sida oto-maatiga ah loo siin karo arday. Qaar kamid ah habdhaqannada ardayda ayaa gaaray heer khatar oo keenaaya in talaabo toos ah ay qaadaan kooxdeena caafimaadka dhimirka. Habdhaqanadaan walaaca badan waxaa lagu xaliyaa sadex nooc oo kaladuwan oo hanaanka habraaca badqabka ardayda ah:

- **Habraaca Waxyeelada Nafeed ee aan ahayn Isdilka:** Waxaa la adeesadaa marka shaqaaluhu ogaadaan in *arday uu naftooda waxyeelo u gaysanaayo.*
- **Dib u eegista Halista Isdilista:** Waxaa la sameeyaa isla markaba markasta oo *arday uu ka hadlo waxyeelo uu la doonaayo naftiisa/nafteeda, ama uu jiro walaac ah in arday uu qabo fikrado la xiriira inuu waxyeelo u gaysanaayo naftiisa/nafteeda* sida uu go'aansho Baaraha Khatarta Isdilka ee Horudhaca ah.
- **Gurmadka Khatarta:** Kooxda Qiimeynta Hanjabaada ee Dhismaha ayaa adeegsada Foomka Xog Uruurinta Hordhaca ah markasta oo *uu ardayda abuuro hanjabaad, uu sameeyo hanjabaad, ama uu jiro walaac ah in arday laga yaabo inuu doonaayo inuu fuliyo fal dagaal ah.* Haddii habraacaas koobaad uu ku taliyo, markaas Qiimaynta Khatar oo buuxda ayaa la sameeyaa.

Ardayda ayaa caadiyan lagu aqoonsadaa warbixinnada ay soo gudbiyaan ilmaha kale, warbixinnada waalidka, kormeerada macalimiinta, warbixinada booliiska iyo warbixinnada qarsoodiga ah ee lagusoo gudbiso Lightspeed iyo Safe2Tell Colorado.

Lightspeed waa xakameeyaha badqabka oo lagu adeegsado ciwaannada Chromebooks iyo Google ee ardayda. Dhammaan ciwaannada Google ee ardayda DPS iyo aaladaha waxaa lagu ilaaliyaa erayo gaar ah oo la xiriira xoog sheegashada, dhibaataynta, rabshada, waxyeelada nafta, niyad jabka, iwm. Haddii iimeel, dukumiinti, ama erayada wax raadinta la calaamadeeyo, Lightspeed ayaa ku wargelinaaya Waaxda Jawiga iyo Badqabka taasoo baaraysa. Lightspeed ayaa shaqeeya 24/7/365 haddii ay waax noqotana khatar ka dhan ah badqabka midkood

ardayga ama bulshada dugsiga, waaxda gurmadka ayaa lala xiriirayaa. Shaqaalaha gurmadka ayaa amraaya in midkood dugsiga ama sarkaalka roondadu uu sameeyo baaritaanka faya qabka ardayga.

Safe2Tell waa dookha warbixinta oo badqab iyo qarsoodi leh kaasoo ardayda, shaqaalaha, waalidiinta, iyo xubnaha bulshadu ay kusoo diri karaan xogta la xiriirta arimo kasta oo la xiriira badqabkooda ama badqabka dadka kale. Warbixinnada ayaa lasoo gudbin karaa xili kasta oo maalinta kamid ah ayadoo la wacaayo 1-877-542-SAFE (7233), adoo adeegsanaaya lifaaqa webseedka, ama galaaya abka moobilka. Safe2Tell ayaa u diri doona warbixinta shaqaalaha ay qusayso ee dugsiga, Waaxda Cimilada iyo Badqabka, iyo/ama saraakiisha booliiska kadibna xaqiijinaaya warbixinta la helay kadibna jawaab bixinaaya. Hawsha habraaca badqabka ardayda iyo/ama warbixinta sharciga ah ayaa dhici kara.

Marka habraaca la bilaabo, waxaa lagu qoraa diiwaanka ardayga ee nidaamkeena xogta ardayda, Xarunta Infinite. Xili kasta dugsiga ayaa abuuri kara warbixin si loo go'aansho ardayda horey u maray habraacyada badqabka ardayda. Sidaas awgeed, shaqaalaha dugsiga ayaa xaqiijin kara sii wadista taageerada ardayda inta lagu jiro xiliyada kala guurka, sida marka laga diiwaan gasho dugsi kale ama ku laabtaan dugsiga kadib fasaxyada ama xiliyada kale ee ay maqnaayeen.

Marka habraaca la bilaabo, fududeeye tababaran ayaa hogaaminaaya shaqada wuxuuna xaqiijinayaa in la abuuro Qorshaha Talaabada iyo Dhaqan gelinta. Dhammaan hanaannada habraaca badqabka ardayda waa hanaanno lagu baxsho dugsiga waxaana maamula shaqaalaha dugsiga. Haddii ardayda uu kormeeraayo Gudiga Dib U eegista Badqabka ee Degmadu, shaqaalaha dugsiga ayaa ka warbixin doona hormarka la gaaray ama hormar la'aanta, iyo guulo kasta oo la gaaro ama walaacyo la xiriira ku dhaqanka qorshaha dugsiga u gudbin doona gudiga.

Xaalada qaar ee la xiriira hanaanka Jawaab bixinta Khatarta, anshaxa dugsiga ayaa sidoo kale la tixgelin karaa lana fulin karaa. Marka ay sidaan dhacdo, dugsiyada ayaa laga dooni karaa inay abuuraan qorsheyaasha Talaabada iyo Dhaqan gelinta ayadoo lagu saleynaayo baahiyaha ardayga, haddii uu ogolaado Sharciga JK-R. Haddii ardayga la cayriyo ama uu galo dugsi cusub, qorshaha ayaa markaas loo gudbinayaa dugsiga cusub si uu u eego waxna uga badelo si uu waafajiyo nidaamyada gurmadka ee dugsiga cusub. Sida lagu sheegay hanaanka habraaca, taageerooyinka waxaa ku jiri kara taageerooyinka/barnaamijyada caafimaadka dhimirka iyo shucuurta bulshanimada, Imaatinka/Ka bixida dugsiga, hanaannada dhaqan celinta, u gudbinta adeegyada bulshada, habraacyada imaatinka/ka ka tagista dugsiga, iyo taageerooyinka kale ee caawimaada leh ee ku saleysan baahiyaha gaarka ah ee badqabka iyo taageerada ardayga gaarka ah.

Maaha in dhammaan walaacyadu u baahan yihiin dhamaystirka habraaca badqabka ardayga. Marka ay sidaan dhacdo, Qorshaha Taageerada Ardayga ayaa la abuuri karaa. Qorshahaan

waxaa loogu talagalay inuu xaliyo walaacyada ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn, dhibaatooyinka dhanka xaduudaha jireed, xalinta rabshada, gardarada, si joogta ah uga tagista fasalka asagoo aan la fasixin, iyo gardarada jireed iyo tan hadalka ah ee yaryar. Taageerooyinka iyo caawimaadaha ayaa waafaqsan baahiyaha shaqsiga ah ee gaarka ah ee ardayga, fasalka, iyo dugsiga si loo xaqiijiyo badqabka iyo guusha ardayga. Talaabooyinka gaarka ah iyo caawimaadaha ayaa lagu dabaqaa Qorshaha Taageerada Ardayga ee arday kasta. Qorsheyaashaan waxaa abuura, dhaqan gasha, oo ilaaliya kooxda dugsiga. Dukumiintiyada tilmaanta habraaca ayaa taageeraaya abuurista iyo dhaqan gelinta farsamooyinka ayadoo la kaashanaayo ardayda iyo qoysaska.

Hadda, Waaxda Cimilada iyo Badqabka ayaa samaysa booqashooyinka guriga ayadoo kaashanaysa booliiska Denver si loo eego dhammaan khataraha la xiriira rabshada iyo wicitaannada hubka ee aan la xalin karin inta lagu jiro maalinta dugsiga ee caadiga ah. Saraakiisha ayaa iskudaya inay xaqiijiyaan inuusan ardaygu hub ka heli karin dugsiga.

Xaalada Mustaqbalka:

<table>
<tr><th>TABABARKA</th><th>DHAAYSTAHA</th><th>UJEEDADA</th><th>GOORTA</th></tr>
<tr><td>Habraaca Dib u eegista Halista Isdilista</td><td rowspan="2">Khubarada dhimirka dugsiga, shaqaalaha bulshada ee dugsiga, kalkaalisooyinka dugsiga, la taliyaasha dugsiga, iyo maamuleyaasha dugsiga</td><td rowspan="3">Ilaalinta kasoonida iyo sharafta hanaanka habraaca</td><td rowspan="3">Tababarka isku xiran oo isku dhafan oo la baxsho sanad dugsiyeedka oo dhan laguna shaqeeyo jadwalka shaqada sanadka</td></tr>
<tr><td>Habraaca Dhaawaca Nafta ee aan ahayn Isdilka</td></tr>
<tr><td>Habraaca Hanaanka Gurmadka Khatarta</td><td>Khubarada dhimirka dugsiga, shaqaalaha bulshada ee dugsiga, kalkaalisooyinka dugsiga, la taliyaasha dugsiga Dugsiga, madaxda tacliinta dugsiga, iyo maamuleyaasha dugsiga</td></tr>
</table>

DPS waxay dhisaysaa bog oonlayn ah si looga taageero dugsiyada aqoonsiga habraacyada ay raacayaan kooxaha shaqaalaha, waxayna kordhinaysaa kormeerka Qorsheyaasha Talaabada iyo Dhaqan Gelinta. Degmada ayaa ka shaqeyn doonta 3 sano ee soo socota bixinta helitaanka iyo adeegsiga farsamadaan oo ay adeegsanayaan dhammaan dugsiyadu.

Kooxda Iskuduwaha Badqabka Ardayda ayaa abuuri doonta sheeko la xiriirta hanaanka habraacyada Badqabka Arday kasta ee dugsiyada si ay ugu dabaqaan buug gacmeedyadooda waalidka iyo ardayga. Curinta ayaa la siin doonaa dhammaan hogaamiyaasha dugsiyada si ay sanadka u adeegsadaan.

Kooxda Iskuduwaha Badqabka Ardayda ayaa abuuri doonta tababarka isdilka, khatarta, iyo dhaawaca nafta ee aan isdilka ahayn inta lagu jiro Dayrta 2023 si degmadu u dhaqan geliso Gu'ga 2024. Dhamaytirka qasabka ah ee tababarkaan ayaa bilaabanaysa Dayrta 2024. Dhammaan shaqaalaha ayaa dhamaysan doona tababarkaan sanad kasta ayagoo adeegsanaaya nidaamka Maaraynta Waxbarashada ee Infor iyo jadwalka shaqada ee sanadkaas. Si lamid ah, dhammaan waalidiinta ayaa lagu boorin doonaa inay maraan tababarka sanadlaha ah isla marka ay dugsiga ka diiwaan gelinayaan ardayda.

Degmadu waxay diirada saaraysaa baarista nidaamyada oonlaynka ah ee la socon kara dhaqan gelinta, kormeerka, iyo talaabooyinka joojinta oo qayb ka ah hanaanka Badqabka Arday kasta.

Kahortaga iyo caawimaada Dhaawaca Nafeed ee aan Ahayn Isdilka (NSSI)

Barnaamijka TSEAL ee kor lagu sharxay ayaa loo sameeyay inuu siiyo ardayda xeelado gaar ah oo ay ku maareeyaan caqabadaha iyo shucuurta kuwaas oo aan qusayn waxyeelo nafeed. Haddii qorshaha talaabada iyo caawimaada loo baahan yahay in loo sameeyo arday xaaladaan ku jira tusaaleyaasha barnaamijka ardayga ee ka hortaga dhaawaca nafeed ayay arki karaan shaqaale kasta DPS kamid ah asagoo adeegsanaaya koorsada tababarka oonlaynka ah. Fududeeyaasha tababaran ee heer dugsi ee maamula habraacaan ayaa sidoo kale geli kara talooyinka uu baxsho Iskuduwaha Badqabka Ardayga.

Kahortaga iyo Xakamynta Isdilka

Xaalada Hadda: DPS waxay leedhay taariikhda mudada dheer ee dhaqan gelinta barnaamijka kahortaga isdilka ee dugsiyada kaasoo diirada saaraaya fasallada 5aad, 6aad, 9aad, iyo 12aad. Dhaqan gelinta ayaa waafaqsan farsamooyinka ugu fiican ee lagu qeexay cimi baarista iyo tilmaanta ay daabaceen wakaaladaha xirfadleyaasha. Barnaamijka ardayda ayaa diirada saara barista calaamadaha lagu garto walaaca, walwalka, jabka, muujinta daryeel si looga jawaabo qof ku jira khatar, taageerista qof u baahan helitaanka qof wayn oo uu ku kalsoon yahay.

Anagoo kaashanayna Xafiiska Caafimaadka Habdhaqanka ee Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee Denver, “Waan Xalin Karnaa Arintaan” oo diirada saaraaya dhisida adkaysi iyo kahortaga isdilka ayaa laga dhaqan gashay dugsiyo gaar ah ilaa sanad dugsiyeedkii 21-22. Barnaamijyada waxaa ku jira iskaashiyo badan oo aan la samaynayno ururada caafimaadka dhimirka ee bulshada oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn, Robbie’s Hope, Iskaashatada Caafimaadka Dhimirka Carruurta, Judi’s House iyo Soul Stories.

Shaqaalaha caafimaadka dhimirka ee dugsiga ayaa baxsha tababarka sanadlaha ah ee waalidka iyo shaqaalaha oo la xiriira kahortaga isdilka kaasoo diirada saaraaya calaamadaha digniinta ah, sida looga jawaabo, iyo cida uu ka helaayo taageero haddii arday uu ku jiro dhibaato. Sanadkii 2019, dhaqaale badan ayaa lagu baxshay helitaanka tababarayaasha la sheegay.Waani, oo Ku xir. Qaabka (QPR) oo ah tababarka guud, ee dadka waawayn ee waardiyaasha ah oo la siiyo mid kasta oo kamid ah shaqaalaha DPS iyo bulshada dugsiga.

Kadib geeri ka dhalatay isdil, DPS ayaa raacda tilmaanta ku qoran Kadib Isdilka: Galka Tilmaamaha Dugsiyada iyo farsamooyinka kale ee ugu fiican ee lagu sheegay Bayaankeena xirfadeed. Tan waxaa ku jira xaqiijinta waxa sababay geerida, xaqiijinta dookhyada waalidka ee xog baahinta, iyo qiimaynta suuragalnimada inay ku faaftay carruurta dhexdooda.

Dedaallada wada shaqaynta si loola socdo khatarta isdilka iyo dhacdooyinka saamaynaaya dhalinta DPS iyo helitaanka adeegyada caafimaadka dhimirka ee bulshada ayaa lagu taageerayaa iskaashi aan la samaynayno Degmooyinka Kale ee Bartamaha Denver iyo wakaaladaha caafimaadka dhimirka sida Adeegyada Dhibaatada ee Colorado, Maal gelinta Second Wind, Children's Hospital, Waaxda Caafimaadka Bulshada iyo Bii'ada ee Denver (DDPHE), iyo Xarunta Khayraadka Badqabka Dugsiyada ee Colorado. Warbaahinta bulshada ayaa lagu taageerayaa fursadaha iskaashiga sida kulanno ay qabanayso DPS EDUCA.

Xaalada Mustaqbalka: DPS ayaa hadda bixin doonta barnaamijka kahortaga isdilka oo la siinaayo fasallada 5aad, 6aad, 9aad iyo 12aad. Si lamid ah, dhammaan dugsiyada ayaa lagu taageeri doonaa kula wadaagista xogta aalada Safe2Tell Colorado ardayda fasaladaas. Dhamaystirka iyo natiijooyinka barnaamijka ayaa lala socon doonaa ayadoo la adeegsanaayo la socdaha xogta ee degmada.

DPS ayaa sii wadi doonta iskaashiga ay la samayso Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee Denver ayadoo u fududeynaysa ardayda dugsiga ee DPS inay ka qaybgalaan Shirka Sanadlaha ah ee *We Got This* oo lagu qabto Denver. Waxaa intaas dheer, DPS ayaa bixin doonta ugu yaraan hal xiisad oo loogu baroordiiqo laguna xasuusto geerida dadka lana siinaayo dhammaan shaqaalaha iyo waalidiinta u baahan adeegyadaan inta lagu jiro jadwalka sanadka ee markaas. Fursadaha dheeriga ah ee deeqda si loo taageero sii wadista barnaamijyada dugsiga ayaa laga codsaday Centura Health iyo Xafiiska Kahortaga Isdilka.

Hanaanka Kahortaga Rabshada iyo Hanjabaada

Xaalada Hadda: Dugsiyada Dowladda ee Denver waxay taariikh fog u leedahay ka dhaqan gelinta barnaamijyada kahortaga rabshada gudaha dugsiyada. Rabshada dhalinta waxaa ku jira habdhaqannada joogtada ah ee khatarta gelinaaya fayaqabka ardayda waxaana ku jiri kara, laakiin kuma koobna:

- Dagaalka
- Rabshada qoyska
- Hanjabaadaha hubaysan

- Xoog sheegashada
- Xadgudub galmo
- Burcada hubaysan

Barnaamijka kahortaga waxaa ku jira dhisida dugsiyo amaan ah oo soo dhawayn leh, taageerista abuurista xirfadaha la qabsiga, iyo dhaqan gelinta nidaamyada looga jawaabaayo rabshada dhalinta.

Walaacyada ayaa caadiyan lagu aqoonsadaa warbixinnada ay soo gudbiyaan ilmaha kale, warbixinnada waalidka, warbixinnada booliiska, Ogeysiisyada Qareenka Degmada, iyo warbixinnada ah ee lagusoo gudbiyo Lightspeed iyo tilmaamaha qarsoodiga ee lagusoo gudbiyo Safe2Tell Colorado. Kooxaha dugsiga ayaa baxsha tababarka sanadlaha ah iyo/ama xog lagu baxsho Safe2Tell Colorado lana siiyo ardayda, shaqaalaha, iyo waalidiinta si loo xaqiijiyo in si siman loo helo warbixinta qarsoodiga ah si looga jawaabo rabshada dhalinta, ayna ku jiraan walaacyada ah in arday kale ay keeni karaa khatar.

Hanaanka gurmadka Khatarta ee DPS ayaa gacan ka gaysanaaya xog siinta gurmadyada degmadu ka bixiso khataraha rabshada. Marka la amro, fududeeye u tababaran oo kamid ah kooxda kahortaga khatarta ee dugsiga ayaa furaaya Foomka Uruurinta Khortaga Hordhaca ah (PIGF) si uu u go'aansho in Qiimaynta Buuxda ee Khatarta (TA) loo baahan yahay. Go'aanka ayaa lagu gaaraa la tashi lala sameeyo xubin kamid ah kooxda gurmadka khatarta ee dugsiga. Qiimaynta Buuxda ee Khatarta ayaa u baahan inay ka qaybgalaan:

(1) maamulaha dugsiga/wakiilkiisa;
(2) ugu yaraan hal kamid ah macaliminta waxbarashada Guud;
(3) bixiyaha caafimaadka dhimirka dugsiga;
(4) maareeyaha kiiska ee qorshaha shaqaynaaya ee Qaybta 504 ama Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (haddii ay haboon tahay)

Tixgelinadaas ayaa lagu dhaqan gashaa ayadoo kale ee fasalka ujeedadu tahay in la waafajiyo baahiyaha kobaca ee ardaydeena da'yarta ah iyo kuwa waxyeeladu kasoo gaartay naafooyinka si loo xaliyo dhacdooyinka khaldan.

Waxaa jiri kara marar Qiimaynta Khatarta ee Heerka II la sameeyo. Gurmadka Khatarta ee Heerka II waa kulan ay maamusho degmadu waxaana ku jira wakiilo ka socda Waaxda Jawiga iyo Badqabka ee DPS iyo Xubin kamid ah Booliiska Rabshada Dugsiga ee DPD. Qiimaynta Khatarta Heerka II ayaa badanaa la sameeyaa marka la xaqiijiyo in qof uu hub ku haysto gudaha dugsiga. Shuruudaha kale ee la go'aansho ayaa abuuri kara hanaanka Heerka II.

Kormeerka ayaa lagu sameeyaa wada shaqayn lala sameeyo kooxda kahortaga ee dugsiga markaas ardaygu ka diiwaan gashan yahay. Dukumiintiyada kormeerka degmada ayaa badanaa la sameeyaa si looga jawaabo shuruudaha sida qalin jebinta, ka bixida diiwaan gelinta DPS ama dhamaystirka buuxa ee shuruudaha joojinta.

Marka lagasoo tago gudiyada shaqada ee degmada kuwaasoo loo abuuray inay taageeraan dib u eegisyada iyo wax ka badelka hanaanka habraaca badqabka ee socda, Gudiga Dib U eegista Badqabka Degmada (DSRC) ayaa bil kasta kulma si loola socdo kiisaska soo kordha ee gaara

shuruudaha loo dejiyay ayna ku jiraan danbiyada rabshada ee lagu sheegay Sharciga Claire Davis ayadoo la tixgelinaayo shuruudaha kale ee la go'aanshay. Xubnaha joogtada ah ee gudiga waxaa kamid ah:

- Iskuduweyaasha Badqabka Ardayda
- Khubarada Googoysnimada iyo U Ganbinta Dugsiga
- Maamulaha Sare ee Caafimaadka Dhimirka
- Maamulaha Sare ee Waxbarashada Gaarka ah/Wakiilkiisa
- Agaasimaha Waaxda Cimilada iyo Badqabka (ama wakiilkiisa)
- DPS Operational Services (or designee) Adeegyada Hawlgallada DPS (ama wakiil)
- Maareyaasha Anshaxa.

Inta badan kulannada bilaha ah ee lala sameeyo Waaxaha Caafimaadka Dhimirka iyo Waaxaha Jawiga iyo Badqabka ayaa sii wadi doona taageerada dib u eegista dhacdooyinka la xiriira badqabka (tusaale, wicitaannada ilmo dhibaato ku jira, dhacdooyinka habraaca, iwm.).

Hanaannada degmooyinka kale kaasoo sidoo kale ka hadla jawaabta laga baxsho rabshada dhalinta waxaa kamid ah, laakiin kuma koobna, Habraacyada Warbixinta Qasabka ah, , Hanaanka DPS Title IX/Kahortaga iyo Gurmadka Takoorka iyo habraaca gaarka u ah falka khaladka ah oo loo adeegsado xalinta kiisas gaar ah oo la xiriira falalka galmada e anshax xumada ah. Dedaallada wada shaqaynta si loola socdo dhacdooyinka rabshada qoyska ayaa lagu taageeraa iskaashiyo lala samaynaayo Xarunta Khayraadka Badqabka Dugsiga ee Colorado iyo xiriirada Metro-Denver.

Xaalada Mustaqbalka: Haddii degmadu soo celiso Saraakiisha Imkaaniyaadka Iskuulka (SRO) oo lagusoo cesho dugsiyada degmada, Kooxda Iskuduwaha Badqabka Ardayda oo kaashanaysa Booliiska Denver ayaa tababari doona SRO yada DPS si loo baro habraacyada hanaanka badqabka ardayda iyo nidamaka Handle with Care (Si taxadar leh U maaree).

DPS ayaa balaarin doonta iskaashiga ay la samaynayso booliiska si loo qabto kulannada rabshada dhalinta ee xaafad kasta oo kamid ah degmada. Tan ayaa la filayaa inay taageerto wada shaqayn lala sameeyo booliiska maxaliga ah si loola socdo dhacdooyinka rabshada ee saamaynaada bulshooyinka dugsiga loona xoojiyo iskaashiyada si loo baabi'iyo caqabadaha saamaynaaya helitaanka barnaamijyada dhalinta.

KAHORTAGA GARDARADA

Kahortaga Gardarada waxaa haga Xeerka maamulaha JICDE. DPS ayaa aaminsan in ardayda dhammaan aqoonsiyada iyo awoodaha ay dareemaan dareenka kamid ahaanshaha, ay taageero shucuureed ka helaan dugsiga ayna awood u leeyihiin inay u doodaan naftooda iyo cadaalada.

Gardaradu waa ka mamnuuc arday kasta sabab kasta, oo ay ku jiraan laakiin kuma koobna fal kasta oo lagu beegsanaayo arday ayadoo loo cuskanaayo dedaalkiisa waxbarasho ama loo cuskanaayo sifo kasta uu difaacaayo sharciga federaalka ama gobalka ama xeerka degmadu, ayna ku jiraan isirka, midabka, qoomiyada, jinsiga, dookha galmada, aqoonsiga jinsiga, aqoonsiga nimoow-naagnimo, diinta, wadankiisa hooyo, asalka, da'da, xaalada dhimirka, xaalada hawlgabnimada, ama naafada, haddii sifooyinka noocaas ah ay yihiin kuwo dhab ah ama kuwa lagu tuhmaayo labadaba. Gardarada ayaa mamnuuc ka ah dhismaha degmada, xarunta nashaadaadka iyo munaasabadaha ay maamusho Degmada ama dugsiga, marka ardayda lagu qaadaayo gaadiidka Degmada ama mid kamid ah kuwa dugsiyadeda, ama ay joogaan banaanka dugsiga marka la fulinaayo hawl dugsiga qusaysa ama shaqo ama munaasabad la xiriirta degmada oo ku jirta Manhajka ama ka baxsan manhajka.

Ardayga sameeya fal kasta oo gardaro ah, ama ardayga qaada talaabo aargoosi ah oo ka dhan ah arday si daacadnimo ah u soo sheega dhacdada gardarada, ayaa la marsiin doonaa talaabada anshaxa ee ku haboon ayna ku jirto laakiin kuma koobna in dugsiga laga hakiyo, laga cayriyo iyo/ama in loo gudbiyo booliiska. Darnaanta iyo inta jeer ee ay dhacdo, haddii ay jiraan, falka gardarada ah ayaa la tixgelin doonaa marka go'aannada edbinta ah la qaadanaayo. Falka gardarada ah ee abuuraaya takoorka ama dhibaataynta sharci darada ah ayaa lagu samayn doonaa baaritaan waxaana lagu edbin doonaa xeerarka iyo habraacyada Gudiga u degsan. Ardayda lagu beegsado gardarada marka falka gardarada noocaas ah uu keenaayo takoor ama dhibaatayn sharci daro ah ayadoo sidoo kale leh xuquuq dheeraad ah iyo difaacyo sida ku cad xeerarka iyo habraacyada Gudiga ee la xiriira takoorka iyo dhibaataynta sharci darada ah.

Waxaa jira sadex ilood oo aasaasi ah oo aan u adeegsano helista heerka xoog sheegashada ka jirta Dugsiyada Dowladda ee Denver. Ilahaan waxaa ku jira Xog uruurinta Codka Ardayga/Tu Voz, Safe2Tell, iyo talaabooyinka anshaxa ee la diiwaan gashay. Xog uruurinta Codka Ardayga/Tu Voz ayaa waydiisa ardayda labo su'aalood oo la xiriirta xoog sheegashada.

- "30 kii maalmood ee lasoo dhaafay, ma laguu xoog sheegtay (Haa/Maya)?"
- "30 kii maalmood ee lasoo dhaafay, goob joog ma u ahayd fal xoog sheegasho ah (Haa/Maya)?"

Talaabooyinka anshaxa waxaa uruuriya shaqaalaha dugsiga ee aqoonsaday, ka jawaabay xaalada xoog sheegashada, raacayna hanaanka jawaab bixinta xoog sheegashada. Safe2Tell waa nidaam qarsoodi ah oo warbixin lagu gudbiyo kaasoo qof kasta u adeegsan karo soo sheegida dhacdooyinka xoog sheegashada.

Xaalada Hadda: Waxaa jira farsamooyin kaladuwan oo ka dhex jira DPS kuwaasoo buuxsha shuruudaha kahortaga xoog sheegashada. Dedaalladaan waxaa ku jira:

- TSEAL
- Nidaamyada Caawimaada Habdhaqanka Wanaagsan (PBIS)
- Farsamooyinka Fahansan Dhacdooyinka Uur kutaallada Reebay
- Farsamooyinka Dhaqan celinta ah.

Mid kasta oo kamid ah kuwaan wuxuu taageeraa dugsi badqab iyo soo dhawayn leh asagoo abuuraaya dhaqan lagu yareynaayo suuragalnimada isku xoog sheegashada. Kahortaga xoog sheegashada waxaa sidoo kale ku jira bixinta casharada gaarka ah ee barashada bulshada/shucuurta ee gaarka u ah ka soocida xoog sheegashada habdhaqannada kale, barista iyo dhiiri gelinta naxariista, iyo adeegsiga caafimaadka qaba ee baraha bulshada. Dedaallada kahortaga waxaa sidoo kale ku jira xog waalidiinta laga siiyo sida looga hortago xoog sheegashada.

Dedaallada Caawimaada
Farsamooyinka caawimaada waxaa ku jira aqoonsiga iyo ka jawaabida xoog sheegashada. Tani waxay u baahan tahay ogaanshaha astaamaha xoog sheeegashada iyo habraacyada jawaabta diirada, baarista, u sheegista waalidka, taageerada caafimaadka dhimirka, anshaxa iyo gurmadka badqabka. Caawimaada waxaa sidoo kale ku jira siinta waalidiinta qaabab lagu taageero cunugooda haddii loo xoog sheegtay, xoog sheegasho lagu wado, ama uu goob joog u ahaa xoog sheegasho.

Xaalada Mustaqbalka: Dedaallada kahortaga xoog sheegashada ee Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa sii socon doona si loo xaqiijiyo in arday kasta dareemo dhimir ahaan iyo jir ahaanba amaan, marka lagu daro xaqiijinta in arday kasta uu guul gaaro. Heerka dhaqan gelinta ayaa la kala soocay horey dugsiyada, sidaas awgeed, waxaan sii wadi doonaa inaan kala shaqeyno dugsiyada dhaqan gelinta xeeladaha kahortaga oo kalsooni ku dhisan. Hanaankeena balaaran ee kahortaga/caawimaada ku aadan xoog sheegashada:

1. Wuxuu abuurayaa kooxda xirfadaha kaladuwan leh ee dugsi kasta si ay u hagaan dedaallada hoos lagu qeexay (ayna ku jiraan ugu yaraan 1 maamule, 1 xirfadlaha caafimaadka dhimirka iyo 1 macalin).
2. Wuxuu aqoonsadaa uuna dhaqan gashaa farsamooyinka ugu haboon dhammaan ardayda ayadoo lagu saleynaayo baahiyahooda gaarka ah, si kor loogu qaado amaanka iyo soo dhawaynta goobta dugsiga (oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn dedaallada la xiriira dhisida shaqsiyada, manhajka shucuurta bulshanimada, iyo nidaamka caawimaada habdhaqanka wanaagsan).
3. Wuxuu baxshaa uun dib u eegaa qiimaynta iyo baaritaanka balaaran ee khibrada ardayga ee dugsiga (tusaale: Xog Uruurinta Codka Ardayga/ Tu Voz) ugu yaraan halmar sanadkii.
4. Wuxuu diraa fariin cad ardayda, shaqaalaha, waalidiinta iyo xubnaha bulshada taasoo sheegaysa in gardarada iyo aargoosiga ka dhanka ah ardayda soo sheegaaya falka gardarada la marsiin doono talaabada anshaxa ee ku haboon.
5. Wuxuu dhaqan gashaa habraacyada baaritaanka degdega ah iyo ka jawaabida warbixinnada falka gardarada ah.
6. Wuxuu dhaqan gashaa habraacyo si loo fahmo sababta keenaysa falka gardarada ah ee danbiilaha uuna dhaqan gashaa qorshe lagu xalinaayo falka gardarada ah.

7. Wuxuu dhaqan gashaa habraacyada si loo qiimeeyo heerka saamaynta loona baxsho taageero dheeri ah marka loo baahdo, lana siiyo qofka lagu beegsaday iyo dadka goobjooga u ahaa falka gardarada ah (tusaale: kalsoonida nafta, kartida shaqsiga ah, kalsoonida, difaaca nafta).
8. Wuxuu siiyaa agab qoysaska si ay u fahmaan saamaynta gardarada, talaabooyinka dugsigu qaadaayo si looga hortago loona farageliyo gardarada iyo waxa waalidiintu samayn karaan si looga hortago loona farageliyo falka gardarada ah.

Hogaamiyaasha dugsiga ayaa heli doona tusmada iyo taageerada si loo dhaqan gasho dedaaladooda xoog sheegashada iyo caawimaada oo kalsooni leh.

CAAFIMAADKA DHIMIRKA: BADQABKA DADKA WAAWAYN

TABABAR KU AADAN KA JAWAABIDA DHIBAATADA

Xaalada Hadda: Degmada ayaa bixisa tababar ku aadan waxa la samaynaayo marka ay jirto dhibaato si loo xaqiijiyo talaabo wax ku ool ah loona hormariyo badqabka maskaxdeed ee dadka waawayn ee ka shaqaynaaya nidaamkeena labadaba. Waaxda Caafimaadka Dhimirka ayaa taageeraysa tababarka dhisida maamuleyaasha/wakiillada qaybta ka ah Kooxda E ee Dugsiga ayadoo la loo fududeynaayo helitaanka Aqoon Kororsiga 1 ee PREPaRE ee Taqasusleyaasha Dhimirka (NASP).

Marka ay dhibaato jirto, kooxaheena dugsiga ayaan keligood ku ahayn. Shaqaalaha caafimaadka dhimirka dugsiga ayaa bixin doona tababarka tooska ah iyo adeegyada si loo taageero soo kabashada dhimirka ee ardayda. Kooxda Gurmadka Soo Kabashada Dhibaatada ee Degmada (DCRT) ayaa taageero dheeri ah siiya gurmadyadaan marka heerka gurmadku uu gaaro degmada ama gurmadka heer gobal. Adeegyada dhalinta ayaa ka kooban sadex qaybood oo caawimaadaha caafimaadka dhimirka ah: (1) Taageerada Bulshada; (2) Waxbarashada Dhimirka; iyo, (3) Caawimaada Dhimirka. Tusaaleyaasha adeegyada waxaa ku jira kulannada fasalka, kulannada waalidka, abuurista qoraallada (fasalka, xafiiska guud), waraaqaha bulshada, iyo tusmo ku aadan qaab dhismeedka dedaallada kooxda gurmadka iyo soo kabashada dugsiga.

Waxaa intaas dheer, Iskuduweyaasha Badqabka Ardayda ayaa isku dubarida helitaanka adeegyada shaqaalaha ee tooska loo tago ama oonlaynka ah ee talo bixinta oo lagu baxsho Barnaamijkeena Caawimaada Shaqaalaha DPS kadib marka dhibaato dhacdo. Wada shaqaynta socota ayaa lagu sameeyaa Waaxda Jawiga iyo Badqabka ee DPS iyo Waaxda Isgaarsiinta ee DPS ee dhammaan gurmadka masiibada iyo dedaallada soo kabashada.

Waaxda Caafimaadka Dhimirka ayaa sidoo kale taageerta Shaqaalaha Gurmadka ee DCRT iyo kooxaha caafimaadka dhimirka ee dhismaha ayadoo siisa gelitaanka Aqoon Kororsiga 2 ee PREPaRE ee Taqasusleyaasha Dhimirka.

Waxaa intaas dheer, DPS ayaa dhaqan gelinaysa naqshada Handle with Care oo ay dhaqan gelisay Waaxda Booliiska Denver. Dhalinta waajaha walaaca gaarka ah ee ka dhasha u baxbixida dhacdooyinka rabshada ah ayay u badan tahay inay yeeshaan natiijooyinka liita ee caafimaadka iyo fashil dhanka waxbarashada iyo bulshada ah. Warbixinnada ay soo gudbiyaan booliiska ayaa gacan ka gaysta xaqiijinta in kooxaha caafimaadka dhimirka dugsigu ay ku jawaabaan hanaanka fahansan dhacdooyinka uur kutaallada reebay oo u sahlaaya inay adeegsadaan gurmadka ku salaysan maamulida si taxadar leh. Iskuduweyaasha Badqabka Ardayda ayaa badanaa warbixinadaan ka hela Saraakiisha Rabshada Dugsiga ee DPD kuwaasoo la wadaaga xog keenaysa in la adeegsano nidaamka Handle with Care (marka ilmo uu rabshad kala kulmo bulshada dhexdeeda). Warbixinta waxaa ku jira xog la xiriirta meelaha laga wacaayo waaxda booliiska Denver waxaana ku jira xogta xiriirka ee wakaaladaha kale ee booliiska. DPD ma maamusho hanaankeena gurmadka khatarta awood go'aan gaarisna kuma lahan hanaankeena kahortaga khatarta. Taas badelkeed DPD waxay la shaqeysaa Waaxda DPS ee Cimilada iyo Badqabka. Taageerooyinkaan dheeriga ah ayaa loo sameeyay inay siiyaan shaqaalaheena dhismaha kalsooni ah inay haystaan taageero banaanka ah oo ay u baahan yihiin si ay xal ugu helaan dhacdooyinka rabshada ah ee ka balaaran shaqooyinka maalinlaha ah ee dugsiga.

Xaalada Mustaqbalka: Waaxda Caafimaadka Dhimirka ayaa balaarin doonta tababarka si loo gaarsiiyo HR iyo hogaamiyaasha dhexe. Waa barnaamijka tababarka waardiyaasha ee kahortaga isdilka. Tababarkaan waa barnaamij waxbarasho oo loo sameeyay in lagu barto calaamadaha digniinta ah ee dhibaatada isdilka iyo sida looga hortago. Hanaanku wuxuu raacaa sadex talaabo:

(1) *Su'aal* ku aadan doonista qofka ama damaciisa la xiriira isdilka
(2) *Ku dhiirinta* qofka inuu raadsado uuna aqbalo caawimaad
(3) In qofka *lagu xiro* khayraadka ku haboon

Tababarka QPR ayaa la siin doonaa dhammaan hogaamiyaasha dugsiga, hogaamiyaasha xafiiska dhexe iyo iskaashatada khayraadka aadanaha dugsiga si loo xaqiijiyo in shaqaaluhu ay diyaar u yihiin ayna ku kalsoon yihiin ka jawaabida xaaladaha dadka waawayn ay qabi karaan fikiradaha isdilka ama ay khatar degdeg ah ugu jiraan isdilka. Marka lagasoo tago tababarka QRP, Dps ayaa dejinaysa habraaca jawaab bixinta ee hogaamiyaasha dugsiyada iyo maamuleyaasha ay raacayaan marka ay ka warhelaan shaqaale damacsan inuu isdilo ama laga yaabo inuu khatar degdeg ah ugu jiro inuu isdilo.

DPS ayaa lahaan doonta Kooxda Kasoo Kabashada Aafada ee Degmada (DCRT) iyo kuwa loo xushay inay noqdaan shaqaalaha Gurmadka DCRT ayaa la siin doonaa waqtiga sanadkiiba mar si ay uga qaybgalaan:

(1) Aqoon kororsiga NASP PREPaRE 2 sadexdii sanaba mar.
(2) tababarka sanadkiiba mar ee baroordiiqda/geerida halmar sanadkii
(3) kulanka 30 daqiiqo ah ee bishii la qabto ee Gurmadaha DCRT

(4) labo tabarada xirfad dhisida ah ee sanadlaha ah oo ay qabato Waaxda Caafimaadka Dhimirka ee DPS.

Marka ay suuragal tahay, tababarka ayaa waafiqi doona maalmaha loo asteeyay hormarinta xirfada ee DPS.

DPS ayaa sii wadi doonta inay bixiso Aqoon Kororsiga NASP PREPaRE kaasoo waafaqsan qorista iyo joogtaynta Kooxaha E ee Dugsiga kuwaasoo aqoon u leh gurmadka aafada iyo habraacyada soo kabashada ee waafaqsan Maaraynta Xaalada degdega ah ee DPS.

TAAGEEROOYINKA SHAQAALAHA

Xaalada Hadda:

Kooxaha Kamid Ahaanshaha (Oo sidoo kale loo yaqaano kooxaha xiriirka)
Kooxaha kamid ahaanshaha waa goobo loogu talagalay dadka leh asallada iskumidka ah, caqiidooyinka iyo khibradaha si ay ugu kulmaan, ugu dabaaldegaan ayna u abuuraan bulsho. Goobahaan dabiiciga ah ayaa loo sameeyay inay kor u qaadaan fikirkeena ah inaan dhammaan muujin karno shaqsiyadeena dhabta ah aana ognahay in aa qayb ka nahay nalakana qayb gasho DPS, taasoo oo keenaysa taageerida faya qabkeena shucuurta bulshanimada.

EBarnaamijka Caawimaada Shaqaalaha (EAP)
DPS waxay hadda bixisaa adeeg qarsoodi ah, oo bilaash ah oo ay heli karaan dhammaan shaqaalaha DPS iyo dadka ku tiirsan. EAP waxaa ku jira talo bixin qarsoodi ah, oo muddo kooban ah (5 kulan calaa dhacdo sanad kasta) oo loo sameeyo shaqaalaha iyo/ama ehaladooda. Adeegyada kale ee EAP waxaa ku jira talo bixin dhaqaale, taageero sharci, xalalka shaqada iyo nolosha, iyo barta balaaran ee oonlaynka ah, ee adeegga shaqsiga ah.

TherapyDirect
Talo bixinta isla maalinta ah, ee oonlaynka ah, waa adeeg ay heli karaan dadka waawayn ee da'aha 18+ ee aaga Bartamaha Denver Isniin-Jimce, 9 a.m. - 5:30 p.m. TherapyDirect ayaa baxsha helitaanka fudud ee la taliyaha si aad ula qaadato xiisada 55 daqiiqo ah ee oonlaynka ah ayadoo shaqaalaha taageeradu kaa caawinayaan isku xirka maxaliga ah. Shaqsiyaadka ayaa heli kara ilaa sadex kulan sanadkii si bilaash ah iyo adeegyada caawimaad oo la heli karo marka la codsado.

Gurmadka Degdega ah ee Caafimaadka Dhimirka (MHFA) ee Hogaamiyaasha:
Ayadoo ay fududeeyaan Ururka Qaran ee Faya Dhawrka Caafimaadka Dhimirka, MHFA waa barnaamij tababar saamayn badan, oo ku dhisan xirfad kaasoo bara macalimiinta sida loo aqoonsado, loo fahmo loogana falceliyo calaamadaha iyo astaamaha caafimaadka dhimirka iyo dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaasha goobta shaqada. Kani waa tababar afar saacadood socda, oo oonlayn ah looguna talagalay tiro yar oo hogaamiyaasha isla shirkada ka socda.

Nashaadaadka Hormarinta Caafimaadka

Kooxda Faya qabka Shaqaalaha ayaa bixisa khayraadka kaladuwan ee hormarinta caafimaadka iyo barnaamijyo si taageero adag loo siiyo shaqaalaha, ayna ku jiraan taageeradooda jireed, dhaqaale, iyo caafimaadka shucuurta - dhammaan qaybaha jiritaanka qofka ee saamaynaaya caafimaadkiisa dhimirka. Khayraadkaan ayaa lagu siiyaa shaqaalaha Shabakada Horyaalka Faya Dhawrka, Kooxda DPS iyo Hogaamiyaha ee Asbuuclaha ah, iyo Wargayska Bilaha ah ee Faya Dhawrka Shaqaalaha. Si gaar ah, khayraadka caafimaadka dhimirka waxaa kamid ah:

- Kulannada maskax dejinta ee lagu qabto Soo Dhawaynta Macalinka Cusub iyo maalmaha xirfad barashada ee Degmadu bixiso; taxaneyaasha asbuucyada badan ee maskax dejinta ayaa ku xiga
- Casharada maskax dejinta goobta
- Casharada niyad dejinta iyo yoogada ee oonlaynka ah
- Shaqada Farshaxanka: Tartanka 4 Asbuuc ee Caafimaadka Dhimirka
- Ababka Calm, Headspace, iyo MyStrength

Tababarka Reach One

Reach One Mentoring ayaa bixiya goob qarsoodi ah oo macalimiinta cusub ee aan cadaanka ahayn ku dhisaan xiriirada miro dhalka ah ee shaqada, kuwaasoo u sahlaaya inay muujiyaan shaqsiyadooda dhabta ah. Ayadoo la adeegsanaayo fursadaan, dadka tababarka ka qaybgala ayaa dhisi doona kalsooni heer sare ah, dareenka kamid ahaanshaha iyo taageero ku aadan hormar iyo guul ay ku gaaraan DPS.

Hormarinta Hogaaminta Ku Dhisan Qiyamka

Kooxda Dhaqanka, Waxbarashada iyo Hormarinta ayaa bixisa khibradaha waxBarashada hogaaminta ku salaysan qiyamka si loo siiyo shaqaalaha DPS fursad ay wax ku bartaan, ku kobcaan ayna saamayn wanaagsan ku yeeshaan. Waan ognahay in shaqaalaheenu doonayaa inay helaan fursado ay kobac iyo hormar ugu sameeyaan qaabab ilaalinaaya awoodahooda iyo hibooyinkooda gaarka ah.

Barnaamijka Horyaalka Faya Dhawrka

Horyaallada Faya Dhawrka waa wakiillada ku sugan goobta ee Waaxda Faya Dhawrka Shaqaalaha. Waxay masuul ka yihiin taageerida baahiyaha caafimaadka iyo faya-dhawrka iyo masaalixda shaqaalaha la shaqeeya, ayagoo hormarinaaya khyaraadka iyo barnaamijyada ay heli karaan shaqaaluhu, lana fududeynaaya shaqaalaha hawlaha. Horyaallada Faya Qabka ayaa heli kara maal gelin si ay u taageeraan mashruucyada faya dhaqrka ee shaqaalahooda goobta, uuna ku jiro Barnaamijka Deeqda Yar kaasoo maal gelin siiya tiro kooban oo xarumo ah si loo dhaqan gasho hormarinnada la joogtayn karo, ee waawayn oo lagu sameeyo goobta shaqada. Mashruucyada Deeqda Yar ayaa lagu daray abuurista qolalka naas-nuujinta goobta shaqada oo loo samaynaayo hooyooyinka cusub, dayactirada qoladaha shaqaalaha, iyo kuraasta fadhiga wanaagsan ee shaqaalaha.

Xafiiska Isku Xiraha

Xafiiska Isku Xiraha ayaa ka caawiya kana taageera dhammaan shaqaalaha DPS xaqiijinta in loola dhaqmo si cadaalad iyo sinaan leh. Xafiiska Isku xiraha ayaa ah khayraadka shaqaalaha raadinaaya xog iyo tilmaan kasoo baxday hage ay ku kalsoon yihiin kaasoo ilaalinaaya sirta, madax banaan, dhexdhexaad ah oo dadban. Dhammaan booqashooyinka loogu tago Isku xiraha waa ikhtiyaari.

Xaalada Mustaqbalka:

- Waxaan ka shaqeynaynaa inaan ku darno:
    - Servicios de la Raza
    - Fududeynta Daryeelka ardayda, shaqaalaha, iyo xubnaha qoyska

XAALADAHA DUGSIGA

Xaalada dugsigu waxay adeegsadaan jawi badqab iyo soo dhawayn leh iyo dhaqan dhammaan dugsiga waxaana ku jira maaha keliya badqabka jireed, laakiin sidoo kale badqabka dhimirka, isku xirnaanta, iyo dareenka kamid ahaanshaha. Marka ay abuurayso xaaladahaan dugsiga, DPS ayaa doonaysa inay abuurto xiriiro daryeel leh, oo joogto ah oo u dhexeeya shaqsiyaadka iyo kooxaha, ayna ku jiraan ardayda, macalimiinta iyo qoysaska. Xiriirada sida kuwaan ayaa kor u qaadaaya adkaysiga, ka difaaca dadka oo yareeya saamaynta walaaca daran ama dabo dheeraada, ayagoo aakhirka danbe abuura dhismeyaasha dugsiga ee dhammaan dadka iyo bulshadu ay hormar gaari karaan.

QORSHEYAASHA DHISMAHA BADQABKA IYO SOO DHAWAYNTA LEH

GOOBTA DUGSIGA EE BADQABKA IYO SOO DHAWAYNTA LEH

Dugsiyada Dowladda ee Denver waxay u taagan tahay xaqiijinta in khibrada waxbarashada ee arday kasta ay adkayso waxbarashadiisa, tusto fikradaha iyo aaraa'da kaladuwan, ayna u sahasho inuu si curin leh uga fakaro xaalada iyo hanaanka bulshada aduunka ee ku xeeran. Anagoo diirada saarayna khibradaha waxbarashada tayada sare leh ee bud-dhiga looga dhigaayo la shaqaynta sare ee ardayda, degmada ayaa si buuxda u filaysa in arintaan ay aad u yareyn doonto falalka amaan darada ee xunxun ee ardaydu sameeyaan, ayna si wanagsan uga taageeri doonto inay si fiican u helaan fursadaha ku xeeran, ayadoo sidoo kale u sahlaysa inay gaaraan hamiyadooda shaqsiga ah iyo ujeedada.

Xaalada Hadda: Muhiimadaha Degmada Dugsiyada Dadweynaha Denver ee sanad dugsiyeedka 2023-24 ayaa ka kooban labo qaybood: (1) Abuurista Goobaha Badqabka iyo soo dhawaynta leh ayadoo la taageeraayo macalin kasta si uu xiriir hufan oo tayo leh ula sameeyo arday kasta, ayadoo si adag looga shaqeynaayo qiimaynta iyo abuurista nidaamyada fasalka kuwaasoo kor u qaada wada shaqaynta tayada sare ee ardayda iyo badqabka jirka iyo dhimirka,

iyo sii wadista taageerada hogaamiyaasha dugsiga si loo aqoonsado waxa ay ardaydoodu u baahan yihiin si ay guul uga gaaraan dugsiga maalin kasta; (2) xaqiijinta in ardaydu si firfircoon ula falgalaan buugaagta akhriska iyo shaqooyinka heerka fasalka, ama ka badan.

Xaafadaha danbiyada badan ka dhacaan ayaa ilmaha u banbixin kara rabshad, taasoo keenaysa waxyeelo dabo dheeraata oo ku dhacda jirka, maskaxda, iyo shucuurta ilmaha. DPS waxay doonaysaa inay ka hortagto xaaladahaan ayadoo kordhinaysa badqabka dhimirka ee carruurta iyo dadka waawayn ayadoo adeegsanaysa abuurista goobaha fasalka oo soo dhawayn leh loona dhan yahay. Anagoo tan xasuusan, DPS ayaa aqoonsatay sadex farsamo oo muhiim ah:

Talaabada #1: Dhammaan ardayda ayaa hela goobta amaanka iyo soo dhawaynta leh taasoo qadarinaysa dhaqanadooda kaladuwan, luuqadaha iyo aqoonsiyada (ayna ku jiraan dookhyada galmada iyo aqoonsiga jirka). Qodobada muhiimka ah "ee laga eegaayo" aagaan waxaa kamid ah:

- Ardayda oo muujiya hami si saliim ahna uga fakara fikradaha kaladuwan iyo nidaamyada taariikhiga ah ee baarista iyo ilaalinta isbadellada fikirka.
- Ardayda ayaa fikradaha iyo mabaadii'da u wadaagaaya qaab furan.
- Ardayda ayaa adeegsanaaya luuqad qaangaarnimo leh, iskuna muujinaaya dhimrin iyo naxariis dhexdooda.
- Ardayda ayaa ku dhiiri gelinaaya ilmaha kale inay khaataan khataraha waxbarashada, ay wadaagaan fikradaha ayna joogteeyaan hangalka wax soo saarka leh.
- Shaqada iyo farshaxanka ardayda oo muujinaaya khibradaha nolosha iyo aqoonsiyada.
- Ardaydu waxay fursado u haystaan inay bareegyada maskax dejinta inta ay ku jiraan kala guurka iyo dhaqdhaqaaqa kaladuwan ee lagu dhafay shaqooyinka casharka.

Talaabada #2: Dhammaan ardayda ayaa hela casharada Isbadelka tayada sare leh ee Shucuurta iyo Waxbarashada (TSEAL) iyo/ama ku dhafida TSEAL dhammaan maadooyinka. Qodobada muhiimka ah "ee laga eegaayo" aagaan waxaa kamid ah:

- Ardayda ayaa adeegsada cod iyo wakaalad marka ay muujinayaan xirfadaha hogaaminta, ay hogaaminayaan nashaadaadka iyo doodaha kooxaha.
- Ardayda ayaa dejiya higsiyada gaarka ah iyo kuwa guud waxayna magacaabi karaan waxa ay u baahan yihiin inay ka guul gaaraan.
- Ardayda ayaa sameeya iskaashi kooxeed si waxtar leh waxayna adeegsadaan xirfadaha iskaashiga ee xalinta caqabadaha.
- Ardayda ayaa qiimeeya fikradaha khiyaaliga ah iyo eexaha, dhagaysta fikradaha kaladuwan oo muujiya hami iyo isku xirnaan ku aadan caqabad xalna u raadiya sinaan la'aanta.
- Ardayda ayaa ku xira dareenada, mabaadii'da, iyo fikradaha barashada maadada.
- Ardayda ayaa cod iyo dookh ku leh casharada iyo nashaadaadka.

Talaabada #3: Dhammaan ardayda ayaa hela goobta amaanka iyo soo dhawaynta leh ee dugsiga oo dhan taasoo qadarinaysa dhaqanadooda kaladuwan, luuqadaha iyo aqoonsiyada

(ayna ku jiraan dookhyada galmada iyo aqoonsiga jirka). Qodobada muhiimka ah "ee laga eegaayo" aagaan waxaa kamid ah:

- Farshaxannada dugsiga oo dhan ayaa muujinaaya fursadaha balaaran ee hogaaminta ardayda.
- Fursadaha ka baxsan manhajka iyo kuwa hormarinta ee jira kuwaasoo waafaqsan dhaqannada iyo aqoonsiyada kaladuwan ee dugsiga.
- Goobaha saaxiibtinimada ayay helayaan ardaydu.
- Ardayda ayaa u adeegsada goobaha guud si ay iskugu xirmaan ayna u wada shaqeeyaan.
- Ardayda ayaa iskula xisaabtama filashooyinka sareeya ee habdhaqanka dhammaan dugsiga.
- Ardayda ayaa isa salaama, salaamaha shaqaalaha iyo martida ayagoo aan loo sheegin.

Kormeeraha fasalka iyo dugsiga ayaa qayb joogto ah ka ah shaqada maamulka dugsiga, marka "qaybahaan la doonaayo" ayaa dejinaaya yoolalka qeexan ee hogaamiyaasheena dugsiga iyo shaqaalahooda, kuwaasoo ay ku helayaan fikir dhiibasho joogto ah oo la isku halayn karo dhammaan sanad dugsiyeedka. Si looga taageero dugsiyada dhaqan gelinta goobaha amaanka iyo soo dhawayn leh, waxaan bixinaa taageerooyin kaladuwan oo ku aadan hormarka barashada tacliinta iyo shucuurta bulshanimada (TSEAL) iyo waxbarasho ilaalinaysa dhaqanka oo waxtar leh (CRE).

Xaalada Mustaqbalka: Waxaan kasii shaqeyn doonaa dhaqan gelinta farsamooyinkaan dhammaan shabakadeena dugsiyada, hase yeeshee waxaa hadda la waafajin doonaa Tubta Istaraatiijiyada Dugsiyada Dowladda ee Denver.

QORSHEYAASHA BADQABKA HAWLGALKA

Xaalada Hadda: Qorsheynta sare ee xaaladaha degdega ah iyo masiibooyinka ayaa muhiim ah si loo helo badqabka ardayda, shaqaalaha, iyo martida dugsiyada, haddii khatar amaan soo baxdo. Waxay sidoo kale arkaysaa mooraalka dhammaan dhinacyada ay qusayso si ay u ogaadaan in qorsheyaasha diyaar garoowgu ay jiraan iyo in ardayda iyo shaqaalaha loo tababaray fulinta qorsheyaasha. Yareynta, diyaar garoowga, jawaabta, iyo soo kabashada ayaa ah wajiyada maaraynta xaalada degdega ah ee looga hadlay Qorshaha Hawlgalada Xaalada Degdega ah ee DPS (EOP). Foomkaan waxaa loo adeegsadaa in lagu uruuriyo xogta dugsiga si loo abuuro qorshaha hawlgalada xaalada degdega ah. Sanad kasta, dugsiyada ayaa laga codsadaa inay buuxshaan foomka qorshaha hawgalada xaalada degdega ah ee DPS. Xog dheeri ah ayaa laga heli karaa Xeerka Maamulka DPS KDE.

Xaalada Mustaqbalka: Si xisaabta loogu daro shaqaalaha cusub, badelida shaqooyinka iyo isbadellada isla markaas ee lagu sameeyo masuuliyadaha qorshaha hawlgalada xaalada degdega ah ee kamid ah qorshaha hawgalallada xaalada degdega ah, Waaxda Cimilada iyo Badqabka ayaa u wareejinaysa xogta qorshaha hawlgallada xaaladaha degdega ah nidaam

kumbuyuutareed si qaab wanaagsan oo hufan loola socdo. Nidaamka ayaa awood u lahaan doona qabashada isbadello u sahlaaya Waaxda Cimilada iyo Badqabka iyo dugsiga inay la socdaan ayna qoraan isbadellada isla marka ay dhacayaan. Nidaamkaan ayaa la dhaqan gelin doonaa biloowga sanad dugsiyeedka 23-24.

DIIWAAN GELINTA ARDAYDA

Xaalada Hadda: Ayagoo adeegsanaaya xulashada dugsiga qoysaska ayaa ikhtiyaar u helaaya inay ka doortaan dugsiyada kaladuwan ee dookhyada kaladuwan ee barnaamijka ayadoo laga eegaayo waxa ay aaminsan yihiin inuu ugu haboon yahay ilmahooda. Nidaamyadeena dugsiyada ayaa kaladuwan waxaana ku jira dugsiyada dhaqaneedka, dugsiyada casriga ah, naqshadaha waxbarashada oonlaynka iyo isku dhafka, dugsiyada charter ka, iyo dugsiyada pathways. Ujeedada dookhu waa in la xaqiijiyo in ardaydu helaan goob buuxinaysa baahiyahooda waxbarashada, kana caawinaysa inay hormar gaaraan ka arday ahaan, iyo xubnaha bulsho badqabta. Ka degmo ahaan, waxaan si wayn u aaminsan nahay in waxbarashada Tooska loo Tagaayo ay tahay qaabka ugu haboon ardayda, waayo waxay noo sahlaysaa inaan ka taageerno ardayda yeelashada adkaysi, higsiyo ku aadan mustaqbalkooda, iyo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay ku gaaraan riyooyinkooda. Kuwaani dhammaan waa qaybo muhiim u ah dedaallada kahortaga rabshada dhalinta. Ayadoo lagu saleynaayo xogta dookha ee dib loo eego sanad kasta, waxaan ka shaqeynaa fahanka baahida barnaamijyada dheeriga ah ee waxbarashada ama kuraasta dheeriga ah. Dhawaan waxaan aqoonsanay xog sheegaysa doonista dheeraadka ah ee la xiriirta kordhinta dookhyada oonlaynka ee heerka dugsiga sare, waxaana kala shaqeynaynaa hogaanka dugsiga ee Dugsigeena Oonlaynka ah ee Denver si aan u kordhino boosas dheer ah si loo daboolo baahida liiska sii kordhaaya.

Marka lagasoo tago dookhyada ay bixiso Dugsiyada Dadweynaha ee Denver, magaallada ayaa leh Barnaamijka "Ka Caawinta Dhalinta Gaarista Guu;" (HYPE) kaasoo siiya taageerada tacliinta, tababarka shaqada iyo dhiiri gelin dhaqaale dhalinta ku jira dhaqan gelinta, maxkamad sugaha ah, ama muraaqabadu ku socoto.

HANAANKA MEELAYNTA GAARKA AH
Hanaanka go'aaminta dookhyada meelaynka badelka ah ee ardayda naafada ah waxaa maamula sharciga federalka, gaar ahaana buuxinta Qaybta 504 iyo hanaannada ku cad Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA). Ka degmo ahaan, waxaan si wayn u aaminsan nahay in waxbarashada Tooska loo Tagaayo ay tahay qaabka ugu haboon ardayda, waayo waxay noo sahlaysaa inaan ka taageerno ardayda yeelashada adkaysi, higsiyo ku aadan mustaqbalkooda, iyo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay ku gaaraan riyooyinkooda. Kuwaani dhammaan waa qaybo muhiim u ah dedaallada kahortaga rabshada dhalinta.

Marka lagasoo tago dookhyada ay bixiso Dugsiyada Dadweynaha ee Denver, magaallada ayaa leh Barnaamijka "Ka Caawinta Dhalinta Gaarista Guu;" (HYPE) kaasoo siiya taageerada tacliinta, tababarka shaqada iyo dhiiri gelin dhaqaale dhalinta ku jira dhaqan gelinta, maxkamad sugaha ah, ama muraaqabadu ku socoto.

ARDAYDA KASOO WAREEGA DEGMOOYINKA KALE
Marka arday kasoo wareego dugsi ka baxsan degmada, kooxda dugsiga DPS ayaa codsata diiwaannada dugsigii hore taasoo qayb ka aH hawsha diiwaan gelinta, ayna ku jiraan habraacyada horey loo marsiiyay ee badqabka, hadday jiraan. Kooxaha dugsiga ayaa la xiriiri kara Iskuduwaha Badqabka Ardayda kaasoo sidoo kale ka codsan kara habraacyada badqabka ee hore degmooyinkii hore ee ardaygu dugsiga kasoo dhigtay. Haddii kooxda dugsigu ogaato walaacyo hore oo badqabka la xiriira, kooxda degmada ayaa la xiriiri doonta dugsigii hore ama degmada si loo helo xog dheeri ah oo ku saabsan ardayga iyo xaalada.

Xaalada Mustaqbalka: Ayadoo lagu saleynaayo xogta dookha ee dib loo eego sanad kasta, waxaan ka shaqeynaa fahanka baahida barnaamijyada dheeriga ah ee waxbarashada ama kuraasta dheeriga ah. Inkastoo aan aaminsan nahay in waxbarashada tooska ah ay tahay dookha ugu haboon ardayda, waxaan aqoonsan nahay in ardayda qaar ay u baahan karaan dookhyo buuxinaaya baahiyahooda waxbarashada xiliyada kaladuwan ee noloshooda. Sidaas awgeed, waxaan baaraynaa fursado aan ku balaarino boosaska waxbarashada isku dhafan ee oonlayn gudaha degmada. Dhawaan waxaan aqoonsanay xog sheegaysa doonista dheeraadka ah ee la xiriirta kordhinta dookhyada oonlaynka ee heerka dugsiga sare, waxaana kala shaqeynaynaa hogaanka dugsiga ee Dugsigeena Oonlaynka ah ee Denver si aan u kordhino boosas dheer ah si loo daboolo baahida liiska sii kordhaaya.

Si loo taageero go'aannada diiwaan gelinta marka ay jirto tixgelinta badqabka ee lagu sheegay Xeerka Maamulka Jc iyo JC-R, waxaan dhaqan gelinaynaa hanaan lagu taageeraayo sugnaanta go'aan gaarista, farsamooyinka sinaanta leh, iyo badqabka ardayda iyo bulshada dugsiga.

KOOXAHA XAALADA DEGDEGA AH EE DUGSIGA (KOOXDA XAALADA DEGDEGA AH)

Xaalada Hadda: Sida lagu cadeeyay Sharciga Aqalka Sare ee Colorado oo Lambarkiisu yahay 08-181 iyo Xeerka Gudiga DPS KDE, dugsi kasta ayaa masuul ka ah aqoonsiga Kooxda Xaalada Degdega ah ee Dugsiga (Kooxda Xaalada Degdega ah) si uu qaab waxtar leh uga jawaabo ugana soo kabto dhacdooyinka ka dhici kara gudaha ama meelaha u dhow dhismaha DPS. Shaqaalahaas loo doorto inay xubin ka noqdaan Kooxda Xaalada degdega ah ayaa laga doonayaa inay ka qaybgalaan tababar sanadle ah oo ay bixiso Waaxda Jawiga iyo Badqabka. Si loo xaqiijiyo in dugsiyadu u diyaar garoobaan ka jawaabida dhacdooyinka badqabka nolosha, waaxda jawiga iyo badqabka ayaa sidoo kale ku samaysa labo tijaabo (dabka iyo SRP) dhismaha dugsi kasta sanad kasta oo dheeraad ah ku ah tababarka Kooxda Xaalada degdega ah.

- Tijaabada koobaad waxaa la sameeyaa inta lagu jiro teeramka koobaad ee sanad dugsiyeed kasta
- Tijaabada labaad la sameeyo inta lagu jiro Janaayo sanad kasta

Tijaabo kasta waxaa ka qaybgale shaqaale ka socda Waaxda Cimilada iyo Badqabka waxaana la wareystaa shaqaalaha dhammaadkiisa.

Tababarka Kooxda E waxaa kamid ah:

- Xog ku saabsan dhacdooyinka badqabka nolosha ee ka dhaca gudah ama aaga dhismaha dugsiga
- Nidaamka Maareynta Dhacdada ee Qaran (NIMS)
- Nidaamka HMaamulka Dhacdada (ICS)
- Kahortaga xoog sheegashada iyo isdilka
- Wacyiga xaalada
- Qorshaha Hawlgalka Degdega ah (EOP)
- Qariiradaha daadgureynta
- Tignooloojiyada amaanka
- Soo kabashada
- Xeerka dabka
- Safe2Tell
- Tijaabooyinka xaalada degdega ah
- Habraaca Gurmadka Caadiga ah (SRP)
- Xakamaynta maamulka
- Dib u mideynta

Dugsiga ayaa sidoo kale codsan kara tababar dheeri ah codsiyadaana waxaa loo mareeyaa kiisba markiisa.

DPS waxay si feejigan uga shaqeysaa xaqiijinta soo kabashada jir ahaan iyo maskax ahaan ee ardayda iyo dadka waawayn ee saamayntu kasoo gaartay dhacdo dhibaato ah. Soo kabashadu natiijada laga filaayo shaqsiyaadka kadib dhacdo xanuun leh. Soo kabashada waxaa sida ugu fiican lagu taageeraa si loo waafajiyo baahiyaha soo kabashada bixinta adeegga kaasoo taageeraaya xasilinta iyo ku laabashada waxbarashada ugu yaraan qaab saamayn leh.

Kadib marka xaalada dhacdada la dejiyo, shaqaalaha dugsiga ayaa hubiya baahiyaha ardayga ayagoo tixgelinaaya xaaldaha dhibaatada oo ay ku jiraan qiyaasta, mudada, darnaanta, iyo cawaaqibka ka dhalan kara dhacdada dhibaatada ah. Waxaa jira marar gurmadka dhibaatadu u baahan tahay uu ka badan yahay awooda shaqaalaha dhismaha si ay u taageeraan soo kabashada uuna u baahan yahay wada shaqaynta Kooxda Soo Kabashada Dhibaatada Degmada ee DPS (DCRT), Waaxda Jawiga iyo Badqabka DPS, waaxda Isgaarsiinta DPS, iyo Waaxaha Kale ee DPS. Inta lagu jiro dhacdooyinka balaaran, wada shaqaynta ayaa gaari karta bulshada iyo wakaaladaha gobalka una baahan taageerada dhibaatada oo ka timaada iskaashatada kale ee degmada (tusaale, kooxaha gurmadka dhibaatada ee bartmaha iyo gobalka).

Xaalada Mustaqbalka: La taliye banaanka ah ayaa siiyay tababar DPS bishii Maajo 2023 si loo xaqiijiyo inaan heerkii ugu sareeyay ka gaarno Habraaca Gurmadka Caadiga ah (SRP). Xog

kasta oo la xiriirta ayaa lagu cusbooneysiiyay tababarka Kooxda E ee Cimilada iyo Badqabka waxaana loo adeegsan doonaa kan iyo dhammaan tababarka SRP hadda kadib. Tababarka ayaa la heli doonaa inta lagu jiro sanad shaqeedka socda

Sanadka 2023, waxaa awood badan la sii saari doonaa tababarka qasabka ah ee maaraynta xaaladaha degdega ah ee dhammaan shaqaalaha degmada sanad shaqeedka hadda socda. Tababarka aasaasiga ah ee maaraynta Xaalada degdega ah ayaa qasab ku ah dhammaan shaqaalaha degmada sanadkiiba mar. Tababarka kale ee dheeriga ah ee mawduucyada la xiriira dhibaatada ayaa hadda shaqeeya ama abuuris lagu wadaa.

Degmada ayaa sidoo kale dhaqan gelin doonta tababarka casriga ah ee cusub ee shaqo barida shaqaalaha kaasoo lagu baraayo maaraynta Xaalada degdega ah iyo kasoo kabashada dhibaatada sanad shaqeedka lagu jiro. Tababarkaan wuxuu badelayaa tababarka cusub ee hadda jira ee shaqaalaha waxaana lagu dabiqi doonaa dhammaan shaqaalaha cusub ee degmadu qorato Dayrta 2023.

BADQABKA DUGSIGA/DHISMAHA

QIIMAYNADA BADQABKA

Xaalada Hadda: Wakaaladaha waxbarashada iyo xarumaha ayaa waajaha khataro taxane ah oo ay ku jiraan duufaanno, gardarada loo gaysto ardayda, daroogooyinka, rabshada burcada, iyo kuwo kale oo badan. Saraakiisha dugsiga ayaa sameeya qiimayno si ay qaab sax ah ugu diyaar garoobaan ayna u yareeyaan khatarahaan si joogto ah. Khatarta rabshadaha hubaysan ee ka dhaca dugsiga ayaa muhiim ka dhigaysa in diirada la saaryo dhinacyada shaqada maamulka xaaladaha degdega ah; kahortaga, difaaca, yareynta, gurmadka, iyo soo kabashada. DPS ayaa samaysa qiimaynada badqabka dhismaha 3 sanaba mar ayadoo raacaysa barnaamijka Kahortaga Danbiyada ee ee Naqshada Goobta (CPTED). Nidaamyada iyo naqshadaha dhismaha waxaa qiimeeya shaqaale tababaran. Nidaamyada badqabka qaar ee hadda lagu isticmaalo dhismeyaasha DPS waxaa kamid ah nidaamka xakamaynta gelitaanka ee albaabada gaarka ah iyo sidoo kale nidaamka kaamirooyinka ku xiran dhammaan albaabada si loo go'aansho haddii albaabada la furo.

Xaalada Mustaqbalka: DPS waxay u taagaN tahay la shaqaynta Kooxda Taageerada Qof xaaladaada oo kale soo maray ee DPS ee Bartamaha Denver oo dhawaan la aasaasay, Waaxda Jawiga iyo Badqabka, iyo Amaanka Oonlaynka iyo Wakaalada Kaabeyaasha Amaanka (CISA) ayaa sameeyay oo qiimeeyay kaabeyaasha degmo dugsiyeedkeena. Degmadu waxay muuhiimada siinaysaa sii wadista qiimaynta dhismeyaasheena dugsiga oo ku dhisan qaab sadex sano ah.

Sanadka 2023, DPS ayaa iskaashi la samaysay la taliye madax banaan kaasoo leh khibrada balaaran ee dugsiga iyo heer degmo si loogu xiro hogaamiyaasha dugsiyada sare si ay dib u eegis iyo la xisaabtan ugu sameeyaan nidaamyada badqabka ayna si fiican u aqoonsadaan su'aalaha iyo baahiyaha heer dhisme. La taliyaha iyo DPS ayaa wada shaqada samaynta qiimaynada dhismaha ee degmada oo dhan si loo qiimeeyo xaaladaha dhismaha. Qiimaynadaan ayaa lagu fulin doonaa si waafaqsan farsamooyinka ugu haboon waxaana u jira talooyinka ku aadan kaabeyaasha dhismaha sida qoladaha amaankoodu sugan yahay, ku xirista kaamiro, nalalka, iwm.

HABRAACA GURMADKA CAADIGA AH

Xaalada Hadda: DPS ayaa wada shaqada joogtaynta shaqaalaha, ardayda iyo hogaanka ayadoo raacaysa Habraaca Gurmadka Caadiga ah (SRP). Ayadoo loo adeegsaday in ka badan 40,000 oo dugsi oo aduunka ku kala yaala, SRP waa gurmad midaysan, qorshaysan, oo lagu shaqeeyo loogana jawaabo dhacdo kasta. SRP waa mid ku saleysan talaabo, isbadel kara, oo ay fududahay in la barto. Wuxuu si nidaamsan abaabulaa taatikooyinka gurmadka haddii laga jawaabaayo dhacdooyin, dab, shilal, weerar ama khataro kale oo ku dhacaaya badqabka shaqsiga ah. Ayadoo la baahinaayo eray bixinta, dhammaan saamileeyda ayaa fahmi kara jawaabta iyo heerka dhacdada.

Abuurista SRP waa mid joogto ah, laguna abuuro iskaashi adag oo u dhexeeya khubarada sida shaqaalaha gurmadka, badqabka dadwaynaha, dugsiga, degmooyinka, iyo bulshooyinka. Xeeladaheedu waa kuwo ku dhisan xog, cilmi baaris laguna abuuray khibrad iyo farsamooyinka casriga ah. Waxaa intaas dheer, habraacaan ayaa sahlaaya jawaab degdeg ah oo la go'aansho marka dhacdooyin lama filaan ah dhacaan.

Ardayda, farsamadaan ayaa siinaysa sii wadista filashooyinka iyo talaabooyinka dhammaan inta ay wax baranayaan. Macalimiinta, farsamadaan ayaa u noqonaysa hanaan fudud oo ay tababar iyo tijaabo ku sameeyaan. Bulshooyinka, tani waxay sahlaysaa abuurista dhaqan gelinta habraacyada hogaamiyaasha heer qaran. Shaqaalaha gurmadka degdega ah, eray bixinta iyo habraacyada guud ayaa dhisaaya qiyaas wayn oo la raacaayo dhammaan inta lagu jiro dhacdada.

Xaalada Mustaqbalka: DPS waxay ku dedaalaysaa xaqiijinta in Habraaca Gurmadka Caadiga ah la baxsho lagana doonaayo dhammaan shaqaalaha Degmada ee sanad shaqeedka hadda.

BAARITAANNADA ARDAYDA

Xaalada Hadda: Xeerka Maamulka JIH ayaa maamulaaya "Wareysiyada Ardayda, Isku dhafka, Raadinta iyo Xabsi dhigista." Marka lagasoo tago baaritaannada lagu saleeyay shakiga macquulka ah, kaasoo si lama filaan ah ku imaan kara, ardayda qaar ayaa baaritaan lagu samayn karaa ayadoo qayb ka ah talaabooyinka badqabka iyo taageerada ee ku qoran

Qorshaha Talaabada iyo Caawimaada (kaasoo ka danbeeyay dhamaystirka Foomka Horudhaca ah ee Xog Uruurinta ama Qiimeynta Hanjabaada). Sabab la xiriirta Qorsheyaasha Talaabada iyo Caawimaada ay si gaar ah ula xiriiraan xaalada gaarka ah ee ardayga, farsamooyinka ayaa kala duwanaan kara inta jeer iyo heerka baaritaanka, waxyaabaha loo ogol yahay ardayda inuu sito inuu joogo xarunta, iyo nooca jawaabta laga bixinaayo xeer jebin kasta. Degmada ayaa dhawaan ka hadashay hanaannada raadinta intii lagu jiray Wada sheekaysi lala sameeyay Madaxda Tacliinta iyo hogaamiyaasha kale maalintii Jimcada, Abrii 7, 2023. Jawaabaha su'aalaha la xiriira baarista ayaa laga hadlay intii kulanka lagu jiray.

Xaalada Mustaqbalka: Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa sii wadi doonta joogtaynta jawiga iyo dhaqanka dugsiyada oo ku haboon waxbarashada oo ilaalinaaya badqabka iyo faya qabka shaqaalaha iyo ardayda. Ayadoo ku dhisaysa fikradaha ay baxsheen Madaxda tacliinta iyo hogaamiyaasha kale, Waaxda Cimilada iyo Badqabka ayaa bixin doonta taageero dheeri ah oo ku aadan samaynta baaritaannada, gaar ahaana marka hub uu jiro, sida kor lagu qeexay. Tababarka iyo tusmada mustaqbalka ayay heli karaan shaqaalaha dugsiga, sanad kastana waa la muraajaceyn doonaa.

Degmada ayaa adeegsan doonta oo balaarin doonta khayraadka ay heli karto Waaxda Cimilada iyo Badqabka si looga taageero kooxaha dugsiga dhaqan gelinta Qorsheyaasha Talaabada Caawimaada kuwaasoo codsanaaya raadinta ardayda laga yaabo inay hub sitaan. Tan waxaa ku jira qorshe ay gobalka dhan ku daboolayaan saraakiisha roondada ee jira (hubaysan) iyo CSO yada (aan hubaysnayn, dugsiga jooga) si loo baxsho taageero u gaar ah kiiska, ayadoo ku xiran baahiyaha dugsiyada gaarka ah iyo ardaydooda. Tusaale, haddii dugsi uu dhamaystiro Qorshaha Talaabada Caawimaada ee ardayda la ogaaday inuu ku hubaysan yahay hub bulshada dhexdeeda, waxayna qorsheysaa inay sii wado baarista maalin kasta marka ardaygu dugsiga yimaado, sarkaal kamid ah ciidanka roondada Badqabka DPS ayaa loo xil saari doonaa taageerista waqti gaar ah taasoo sahlaysa baarista amaanka ah, ee la kormeeraayo iyo gelitaanka dhismaha. Markaas, CSO yada loo xilsaaray ayaa kala shaqeyn kara kooxda dugsiga lana xiriiraaya ciidanka roondada haddii/marka loo baahdo dabagal. Tani waxay u sahlaysaa degmada inay si waxtar leh u adeegsato shaqaalaha hadda, si ay u noqdaan kuwo tababar iyo aqoon u leh habraacyada dugsiga iyo la qabsiga himilooyinka Degmada, si ay gacan uga gaystaan xaqiijinta badqabka xarumaha dugsiyada, badelkii loo dhiibi lahaa shaqada saraakiisha booliiska oo aan u shaqeyn degmada.

ISKAASHIGA WAAXAHA MAGAALLADA

Xaalada Hadda: Gurmadkeena masiibada ayaa sidoo kale ka faa'iideysanaaya barnaamijka Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha iyo Bii'ada ee Gurmadka ay Bari taarayso Kooxda Gurmadka (STAR), kaasoo kooxaha gurmadka xaalada degdega ah hawlgelinaaya kuwaasoo ay ku jiraan Farsamo yaqaannada Caafimaadka Degdega ah iyo Shaqaalaha Caafimaadka Dhimirka si loola shaqeeyo shaqsiyaadka waajahaaya dhibaatada la xiriira caafimaadka dhimirka, fakhriga, hooy la'aanta, iyo isticmaalka maandooriyaha.

Xaalada Mustaqbalka: DPS ayaa la shaqaynaysa Waaxda Cimilada Badqabka ee Magaallada (DOS) si loo abuuro badel lagu badelaayo barnaamijka dacwada kaasoo abuuraaya hanaan joogto ah oo lagu helaayo khayraadka barnaamijka dhaqan toosinta dhalinyarada ee ikhtiyaariga ah ee magaallada, kaasoo kashaqeeya inuu dhalinta ka ilaaliyo nidaamka cadaallada carruurta.

XAALADAHA NIDAAMKA

Ilaa iyo hadda, waxaan kasoo hadelnay sida aan u taageeri dona badqabka maskaxeed ee dhalinteena iyo shaqaalaha dugsiga iyo sidoo kale sida aan kor ugu qaadeyno xaaladaha adkaysiga iyo badqabka ee dhismeyaasha iyo bulshooyinka dugsigeena. Qaybtaan waxay ka hadlaysaa nidaamyada iyo hab-dhismeedyada taageeri doona dedaaladaas, kuwaasoo ka hadlaaya qaababka kaladuwan ee DPS ay diirada u saarayso kor u qaadista labadaba adkaysiga badqabka iyo dhalinta, labadaba gudaha nidaamka dugsiga, iyo anagoo adeegsanayna iskaashi aan la samayno magaallada iyo iskaashatada bulshada si xal loogu helo ciladaha ka baxsan saamaynta tooska ah ee degmada.

DPS waxay nasiib u heshay inay hesho dugsiyo leh bulshooyin kaladuwan gudaha degmadeena. Ardaydeena iyo shaqaalaha ayaa ka kooban qaybaha ugu wanaagsan Denver ee dhammaan xaafadaha. Ciladaha ka jira xaafadaha oo dhan ayaa mar kasta saameeya dugsiyada dhammaan degmada. DPS waxay door muuqda ka qaadataa inay la kaashato Magaallada Denver, waalidiinta, ardayda iyo xubnaha bulshada si ay gacan uga gaysato xalinta ciladaha faraha badan; Hase yeeshee DPS waxay si joogto ah u qiimeynaysaa qaababka kaladuwan ee aan u taageeri karno maaha keliya goobta waxbarashada ardaydeena, laakiin sidoo kale nidaamyada taageerada gaarka ah ee ardaydeena.

XAALADAHA UU ABUURAY NIDAAMKA DPS

SHAQAALAHA WAAXDA CIMILADA IYO BADQABKA

Xaalada Hadda: Waaxda Jawiga iyo Badqabka waxaa ka shaqeeya shaqaalaha badqabka si ay u ilaaliyaan badqabka dugsiyadeena.

Saraakiisha Badqabka Xarunta (CSOs)	Waxay ka shaqeeyaan dugsiyada waawayn ee sare iyo dugsiyada dhexe
Saraakiisha Roondada	Waxay roondo ku maraan dhammaan Degmada si ay u gurmadaan marka loo baahdo
Kooxda Maaraynta Xaalada	Waxay siiyaan shaqaalaha tababar ku aadan sida looga

degdega ah	jawaabo dhacdooyinka degdega ah
Sarkaalka Kahortaga Rabshada Dhalinta	Wuxuu taageeraa ardayda si ay u helaan khayraad su ay iskaga ilaaliyaan in la dhigo Xarumaha Lagu Xiro Carruurta Danbiyada gala
Ilaallada Jid Goynta	Waxay ka caawiyaan ardayda iyo qoysaska inay gooyaan wadada markay u socdaan/ka imaanayaan dugsiga si amaan ah
Khubarada Tababarka	Waxay taageeraan dhammaan kooxaha Waaxda Cimilada iyo Badqabka tababarada sanadlaha ah ee loo baahan yahay, iyo sidoo kale tacliinta cusub ee saraakiisha.
Taqasuslayaasha Kahortaga Rabshada Dhalinta	Waxay taageeraan ardayda iyo dugsiyada ayagoo isku xira bixinta adeegyada lagu baxsho magaallada iyo adeegyada rabshada dhalinta ee khayriga ah.
Ka hortaga Xoogsheegsiga	Dhaqanka dugsiga iyo kahortaga xoog sheegashada
Jawiga iyo Hormarka Dugsiga	Wuxuu ka feer shaqeeyaa maamuleyaasha, kooxaha hogaanka casharada, bixiyaasha caafimaadka dhimirka, iyo macalimiinta si loo aqoonsado nidaamyada saameeya bulshada waxbarashada iyo in si wada shaqeyn leh loo abuuro nidaamyo cusub oo waxtar leh, sinaan leh oo sugan si loo badelo khibradaha iyo natiijooyinka ardayda.

WAXBARASHADA IYO TABABARKA:

Waaxda Cimilada iyo Badqabka ayaa ka qaybgasha barnaamijka tababarka balaaran ee kamid ah sanad shaqeedka hadda si loogu diyaar garoobo loogana hortago xaaladaha degdega ah. Tababarka ayaa la qiimeeyaa si loogu dhaqmo xeerka korna loogu qaado barnaamijka. Mawduucyada tababarka waxaa kamid ah:

Ka jawaabida Diidmada	Tababarka iska ilaalinta eexda (casharka degmada)	Farsamooyinka Fahansan Dhacdooyinka Uur kutaallada Reebay (casharka degmada)
Fakarka Saliimka ah	Badqabka hubka (saraakiisha aan hubaysnayn)	Baaritaanka iyo gacmo ka xirista matalaada sharciga (casharka degmada)
Warbixin Qorista	Kiisaska Baakinka	NCI (Caawimaada Dhibaatada ka baxsan Rabshada)/CPI(Caawimaada kahortaga Dhibaatada)

Xiriirka raadiyaha	Habraaca dhacdada gaarka ah iyo nidaamka hubka Evolv	Maaraynya Dabeecada Qalafsan
Xeerka waaxda	Maaraynta Xaalada degdega ah	Gurmadka degdega ah/AED iyo tababarka qalabka xirista qofka
Qiimaynta khatarta iyo anshaxa ardayga (casharka degmada)	Kooxda jaqiga ee DOS	Warbixinta qasabka ah
Digninaha iyo baarista dhismaha (saraakiisha hubaysan)	Juquraafiyada iyo luuqyada dhismaha (saraakiisha hubaysan)	Baarista gaariyaasha khatarta badan (saraakiisha hubaysan)
Habraacyada baaritaanka caafimaadka dhimirka (saraakiisha hubaysan)	Koorsada hawgalka gaadiidka xaaladaha degdega ah ee 24 saac ah (saraakiisha hubaysan)	Tababarka aasaasiyaadka hubka oo 56 saacadood ah (saraakiisha hubaysan)
Tababarka gurmadka taagtikada ka jawaabida dilaaga toogashada wada oo 24 saac ah	Tababarka caawimaada Masiibada ka dhacda CIT oo 40 saacadood ah	

Xaalada Mustaqbalka: DPS waxa wadaa fulinta qiimaynta shaqaalaha si loo qiimeeyo joogitaanka CSO, shuruudaha gurmadka, iyo meesha shaqaale dheeri ah looga baahan yahay ama sida khayraadka loo wadaagaayo. Waxaan ku dareynaa khayraad dheeraad ah oo ku aadan tababarka.

Arag Khayraadka si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan tababarka iyo waxbarashada khibradaha.

SARAAKIISHA KHAYRAADKA DUGSIGA (SROs)

Xaalada Hadda: Sanadka 2020, Gudiga Waxbarashada ee DPS ayaa u codeeyay in laga saaro Saraakiisha Khayraadka Dugsiga dugsiyada dhammaadka sanad dugsiyeedka 2020-21. Kadib markii ay toogasho ka dhacday dugsiga bishii Maarso 22, 2023, Kormeeraha Dr. Alex Marrero ayaa isla markiiba soo jeediyay in lagu soo celiyo Saraakiisha Khayraadka Dugsiga dugsiyada sare ee waawayn ilaa laga gaaro Juun 30, 2023. Go'aankaan waxaa taageeraysa Gudiga Waxbarashada bishii Maarso 23, 2023. Shaxda hoose ayaa la sameeyay si loo kala cadeeyo shaqooyinka kaladuwan ee saraakiisha Jawiga iyo Badqabka iyo Booliiska DPD ay ka qabanayaan DPS.

Go'aanka gaynta saraakiisha SRO dugsiyada waxaa go'aansha Gudiga Waxbarashada. Xeerka Xadidaada Awooda Fulinta ee 10.10 ayaa sheegaaya:

"Kormeeraha guud:

10. Uma qori doono degmooyinka dugsiyada saraakiisha khayraadka dugsiga ama in ay si joogto ah dugsiyada u joogaan ciidanka amaanka ee hubaysan ama nooc kale oo ciidanka booliiska ah;"

Sida ku cad Diiwaanka Amarada ay sameeyeen Gudigu bishii Maarso 23, 2023, Qodobkaan 10.10 ee ku jira Xeerka Xadidaada Awooda Fulinta ayaa si ku meel gaar ah loo laalay waxaana la mudeeyay in dib loo hawlgeliyo Juun 30keeda, 2023 ilaa in Gudigga Waxbarashada uu qaado talaabo kale maahee.

Ayadoo lagu saleynaayo xogta aan ka helnay Ururka Hogaamiyaasha Dugsiga ee Denver (DSLA), 80% maamuleyaasha ka qaybgalay xog uruurinta ayaa taageeray in SRO yada lagusoo cesho dugsiyaasha, laakiin, 60% maamuleyaasha ka qaybgalay ayaa aaminsan in Gudiga Dugsiga/Kormeeraha guud uu gaaro go'aanka.

Marka laga eego xog laga helay Ururka Macalimiinta Fasalka ee Denver (DCTA), inta badan shaqaalaha ka qaybgalay xog uruurinta ayaa doorbidaaya in go'aanka lagu gaaro dugsi kasta ama dhisme kasta oo gaar ah. Farqiga u dhexeeya fikradaha DSLA iyo DCTA ayaa muujinaaya kala qaybsanaan ka jirta mawduucaan oo u dhexaysa bulshadeena.

Markay ahayd Juun 15keeda, 2023, Guddoonka Waxbarashada ayaa u codeeyay in la badelo Xadidaada Fulinta 10.10 si loogu ogolaado Saraakiisha Imkaaniyaadka Iskuulka inay ku soo laabtaan xarumaha dugsiyada. Xadidaada cusub ee Fulinta ayaa sheegaysa:
Sidaas awgeed, Kormeeraha guud waa inuusan ku fashilmin: EL-10.10 – Inuu abuuro xeerarka maamulka iyo Heshiiska Is-afgaradka oo lala sameeyo Waaxda Booliiska Denver si looga heshiiyo marka joogista rasmiga ah ee Saraakiisha Imkaaniyaadka Iskuulka (SRO) ee dhismaha dugsiga ay muhiim u tahay dugsiyada degmadu maamusho iyo kuwa charter-ka. Qaado talaabooyin macquul si loo xaqiijiyo:

- Saraakiisha SRO ee aan raacin xeerka gudiga, xeerka maamulka, iyo cabirka guud ee anshaxa degmada, ama farsamooyinka ugu fiican ee kasoo baxa NASRO si degdeg ah looga saaro meesha marka uu go'aansho Kormeeraha Guud;
- Ganaaxyada iyo xabsi dhigista ayaa la kormeeri doonaa. Waa inuu baxshaa warbixinta afarta jeer sanadkii ee ganaaxyada iyo xabsi dhigista asagoo adeegsanaaya ajandaha ogolaanshaha ee kulannada Guddoonka Waxbarashada ilaa dhammaadka sanad dugsiyeedka 25-26. Waa inuu siiyaa warbixinnada sanadlaha ah Guddoonka Waxbarashada sanadaha soo socda. Xogta waa in lagu daraa sababta ganaaxa iyo xabsi dhigista waana in la isku dhafaa da' ahaan iyo dadka laga tirada badan yahay sida ku qoran Qodobada 1.0 (Sinaanta) ee dugsiyada degmadu maamusho iyo kuwa charter-ka. Waa inuu si degdeg ah u qaadaa talaabo sixid ah uuna u sheegaa Gudiga haddii degmadu ay ka warqabto tiro ganaaxyo iyo xiris khaldan oo loo gaystay dadka la duudsiyo heer degmo iyo heer dugsiba

Waxaa intaas dheer iyo si waafaqsan Waaxda Booliiska Denver, DPS ayaa abuuri doonta Mabaadii'da Aasaaska u ah ee qeexaysa himilooyinka iyo higsiga xiriirka u dhexeeya DPS iyo SRO yada si loo waafajiyo shaqada iyo mabaadii'da aasaasiga ah ee DPS. DPS ayaa qaab wada shaqayn ku dhisan ugana shaqayn doonta DPD iyo dugsiyada si loo doorto saraakiisha SRO ee la shaqo gelinaayo.

KALA CADEYNTA SHAQOOYINKA IYO WAAJIBAADKA

	Sarkaalka Booliiska DPS	Sarkaalka Imkaaniyaadka Dugsiga	Sarkaalka Roondada DoCS	Sarkaalka Badqabka Xarunta
Hubaysan/Aan hubaysnayn	Hubaysan	Hubaysan	Hubaysan	Aan hubaysnayn
Shahaadada	POST (Heerarka iyo Tababarka Saraakiisha Booliiska) waxaa shahaado siiya gobalka waxaana maamula Magaallada iyo Ismaamulka.	Waxaa shahaado siiya POST waxaana maamula Magaallada iyo Ismaamulka	Shahaado kama haystaan POST ama lama maamulo. Badanaa saraakiisha hore ee milatariga, ama CSO yada, ayaa dhamaysta Tababar buuxa iyo tababarada badan ee heerka POST ah	Shahaado kama haystaan POST ama lama maamulo. Ma hubaysna, laakiin waxay haystaan tababar fiican oo ku jira habraacyada badqabka iyo amaanka, gurmadka xaalada degdega ah, caawimaada dhibaatada, iwm.
Waxay u shaqeeyaan	Magaallada iyo Ismaamulka Denver (DPD)	Magaallada iyo Ismaamulka Denver (DPD)	Dugsiyada Dowladda ee Denver	Dugsiyada Dowladda ee Denver
Waajibaadka/ Masuuliyadaha	Waxay ilaaliyaan Magaallada iyo Ismaamulka Denver waxayna ka jawaabaan wicitaannada adeegga	Waxaa loo xilsaaraa Dugsiyada DPS si ay u daboolaan duleellada u dhexeeya dugsiyada iyo ciidanka booliiska, ay	Waxay ilaaliyaan degmada waxayna ka jawaabaan codsiyada adeegga ee degmooyinka loo xilsaaray. Waajibaadkaan ayaa badanaa ku baahan in saraakiishu si	Waxay ka caawiyaan dugsiga arimaha badqabka iyo amaanka iyo waxay xiriiro la yeeshaan ardayda iyo hogaanka

		ilaaliyaan dugsiyada, ay wakiil u noqdaan DPS marka loo baahdo, ayna mararka qaar fuliyaan shaqada ciidanka booliiska	dhow ula shaqeeyaan Booliiska Denver. Saraakiisha DPS ayaa sameeya booqashooyinka guriga, khataraha rabshada, waxyeelada nafta iyo isdilka ardayda iyo shaqaalaha.	
Yaa Maamula	Waxaa maamusha DPD	Waxaa maamusha DPD oo talo ka qaadaneysa maamulka dugsiga iyo DoCS	Waxaa maamusha DoCS	Waxaa maamusha DoCS oo talo badan ka qaadaneysa maamulka dugsiga

HABRAACYADA IYO JADWALLADA XIRIIRKA

Xaalada Hadda: Xiriirka degdega ah ee saxda ah ayaa muhiim u ah xaalad degdeg ah. Waalidiinta ayaa lagu wargeliyaan dhacdooyinka waawayn sida ugu dhakhsaha badan marka Waaxda Badqabka Dadwaynaha ee DPS xaqiijiso dhacdada. Waxaan xaqiijinaynaa in ardayda wata taleefannada gacanta ay awoodi doonaan inay la xiriiraan qoysaskooda kahor xataa intaan Waaxda Isgaarsiinta DPS ogaan xaalada. Tan ayaa keenaysa in shaqaalaha DPS ay talaabada la daahaan kahor xataa intaysan bilaabin. Waxaa intaas dheer, waa suuragal in xogta biloowgii ay sheegeen dadka kamid ah dugsiga aysan ahayn mid sax ah.

Marka ay jiraan xaaladaha soo socda, waalidiinta/masuuliyiinta ayaa filan kara:
Xirista dugsiga: Waaxda Jawiga iyo Badqabka u direysa fariinta hore ee SchoolMessenger (nidaamka fariimaha otomaatiga ah ee DPS) xubnaha qoyska ee ay qusayso. Fariintaan waa mid kooban, waana inay keliya baahisaa faahfaahinta inta la ogyahay markaas. Haddii xiriir dheeri ah loo baahdo, waxaa soo direysa Waaxda Isgaarsiinta.

Sugida amaanka dhismaha: Waxaa jirta khatar ka jirta banaanka dhismaha iyo dhammaan shaqaalaha iyo ardayduna waa inaysan gudaha ka bixin laakiin shaqada dugsiga ayaa caadi u sii soconaysa.

Sugida amaanka dhismaha (15 daqiiqo gudahood xiligii kala dirista ardayda): Waaxda Jawiga iyo Badqabka ayaa fariinta hore ee aalada SchoolMessenger u direysa xubnaha qoyska ee ay

qusayso ayadoo u sheegaysa xaalada amaanka sabab la xiriirta dhacdooyinka ka dhacaaya banaanka dhismaha iyo in siideynta ardayda la daahin karo sabab la xiriirta amaanka aaga. Kadib fariin hore, Waaxda Xiriirada dibada ee Dugsiyada Dadweynaha ee Denver ayaa diri doonta fariimo xiriir ah oo aalada SchoolMessenger haddii dhacdadu sii socoto wax ka badan 15 daqiiqo.

Dhacdooyinka dhibaatada dabo dheeraata: Waaxda Isgaarsiinta ayaa abuurta Xarunta Warbaahinta Wadajirka ah (JIC) si loo xaqiijiyo in dhammaan xiriirada mustaqbalka lagu diro waqtiga saxda ah si isku mid ahna loogu gudbiyo dhammaan kanaallada xogta. Waaxda Isgaarsiinta ayaa adeegsata SchoolMessenger, webseedka DPS, baraha bulshada ee DPS, iyo baraha kale ee xiriirka ee muhiimka ah si loo xaqiijiyo in fariimaha uu helo qof kasta oo u baahan inuu xogta helo. JIC ayaa wararka soo kordha ugu gudbin qoysaska barahaan 15 daqiiqo kasta ilaa dhibaatada la xakameeyo. Fariinta xiritaanka ayaa loo diraa si loogu sheego inaysan filan wax warar ah oo danbe.

Mararka qaar, dhacdada dhibaatada ah ayaa baahan karta waraaq loo diro bulshada. Hogaamiyaasha dhismaha ayaa u gudbin doona codsiyadaas Waaxda Isgaarsiinta DPS. La tashiga Iskuduwaha Badqabka Ardayda ayaa la samayn karaa kahor intaan la dirin waraaqda bulshada. Waaxda Isgaarsiinta DPS ayaa haynaysa nuqullada waraaqaha loo diro xubnaha bulshada kadib dhacdada dhibaatada. Inta badan, waraaqaha bulshada ayaa la diraa sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah kadib dhacdada dhibaatada.

Ma tahay in kulanka waalidka la sameeyo taasoo qayb ka ah gurmadka dhibaatada iyo shaqooyinka soo kabashada, wada shaqayn lala sameeyo Waaxaha kaladuwan ee DPS ayaa la sameeyaa si loo xaqiijiyo in xogtu waafaqdo baahiyaha bulshada.

Xaalada Mustaqbalka: Biloowga sanad dugsiyeed kasta, maamulaha dhismaha ayaa fariin u diri doona waalidiinta/masuuliyiinta asagoo sharxaaya noocyada kaladuwan ee tijaabooyinka cunugoodu ka qaybgeli doono sanadka dhexdiisa.

Dedaal lagu yareynaayo waqtiga ay qaadato in shaqaalaha iyo ardayda dhibaatadu saamaysay ay helaan xog sax ah, Degmada ayaa wada qiimaynta iyo kor u qadista habraacyada isgaarsiinta si loogu daro nidaamyada maaraynta masiiboyinka, ogeysiisyada, Baraha Hawlgelinta iyo Maareynta Dhacdada ayna ku jiraan batoonnada digniinta ee shaqaalaha dugsiga.

FARSAMOOYINKA IYO XEERARKA ANSHAXA

Xaalada Hadda: Farsamooyinka anshaxa waxaa maamula Xeerka Maamulka JK iyo Xeerka JK-R. Cabirka ansaxa waa dukumiinti tilmaan ah si loo taageero dhaqan gelinta JK iyo JK-R.

Marka lagasoo tago talaabooyinka guud ee anshaxa, cabirka waxaa ku jira tilmaan ku aadan marka booliiska, adeegyada dadka, iyo/ama waaxda Badqabka DPS lala xiriiraayo si ay uga jawaabaan dhacdo, iyo sidoo kale habraacyada kale kuwaasoo u baahan kara in la raaco, tusaale hanaanka Gurmadka Khatarta.

Shaqada anshaxa waxaa inta badan taageera labo maamuleyaasha barnaamijka anshaxa ah, iyo sidoo kale Wakiilka Kormeeraha Guud ee Anshaxa. Dugsi kasta waxaa laga doonayaa inuu lahaado Hogaamiyaha Anshaxa Dhismaha (DBL) kaasoo leh tababar buuxa u leh xeerarka iyo siyaasada anshaxa, iyo sidoo kale xeerarka la xiriira ee maamula anshaxa ardayda. Ku dhawaad labo jeer bishii, DBL-yada iyo hogaamiyaasha kale ayaa lagu casuumaa inay ka qaybgalaan kulannada maamuleyaasha barnaamijka anshaxa si ay u helaan tababar joogto ah ayna ula socdaan farsamooyinka ugu haboon ee anshaxa, iyo sidoo kale isku xirka laamaha shaqada, sida farsamooyinka waxbarashada gaarka ah, farsamooyinka dhaqan gelinta, dhaqanka iyo jawiga dhismaha, iwm.

Farsamooyinka cadaalada dhaqan celinta ayaa lagu tixraacaa si joogto ah dhammaan xeerka iyo siyaasada anshaxa, iyo sidoo kale xeerarka la xiriira ee maamula anshaxa ardayda, kuwaasoo qayb ka ah muhiimada DPS saarayso sinaanta. Tusmada farsamooyinka sixitaanka ah waxaa heli kara macalimiinta, qoysaska, iyo xubnaha bulshada ee fahmaaya in xeerarka caadiga ah ee ciqaabta ku dhisan ee ganaaxa iyo farsamooyinku aysan lahayn wax natiijo ah, aysan taageereyn ardayda, ayna si cadaalad daro ah u saameeyaan ardayda aan cadaanka ahayn. Tusmadu waxay dooneysaa inay dhisto kartida macalimiinta iyo xubnaha bulshada si loo dhaqan gasho hanaan anshax oo wanaagsan kaasoo leh farsamooyin dhaqan celin ah. Farsamooyinka dhaqan celinta ah waxay dhisaan bulshada waxayna kordhiyaan xiriirada caafimaadka leh oo dhex mara macalimiinta iyo ardayda si loo baro xirfadaha maaraynta shucuurta bulshada iyo xalinta rabshadaha kuwaasoo muhiim u ah yareynta isku dhacyada.

Si lamid ah dhammaan degmooyinka dugsiga ee Colorado, DPS ayaa xogta anshaxa u gudbisa CDE sanad kasta. DPS ayaa sidoo kale soo gudbisay xog la xiriirta badqabka iyo anshaxa.

Xaalada Mustaqbalka: Istaraatiijiyada anshaxa ardayda ee Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa sii wadaaya in ay ku dhisanaadaan ayna waafaqsanaadaan sharciga heer federaal iyo heer gobal, iyo markasta oo suuragal tahayba, shaqadaan ayaa loo dhaqan gashaa si waafaqsan mabaadii'da aasaasiga ah ee degmada, ayna ku jiraan in Muhiimada Koobaad la siiyo Ardayda iyo Sinaanta. Si loogu diyaar garoobo sanad dugsiyeedka 23 - 24, wakiillada hogaanka DPS ayaa tagi doona Harvard University si ay ula shaqeeyaan degmooyinka dugsiyada waawayn ee Mareykanka ee Machadka PELP si loo dhiso xeeladaha xoojinta wada shaqeynta ardayda, sinaanta, iyo badqabka dhammaan goobaha dugsiga. Kooxda DPS ayaa diirada ku saaraysa shaqada ay ka sameeyaan Machadka PELP kor u qaadista aasaaska badqabka dugsiga ayadoo la adeegsanaayo dhaqan gelin degmada oo dhan ee xeeladaha wanaagsan ee la shaqeynta ardayda ee dhammaan goobaha dugsiyada ayadoo la adeegsanaayo farsamooyin soo kabasho leh, iyo aqoonsiga iyo taageerada awoodaha iyo naafooyinka ardayga. Qirista in walaacyada

habdhaqanka ardayga ay khataro wayn ku abuuri karaan faya qabka ardayda, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada, kooxda hogaaminta DPS ayaa si balaaran u qiimayn doona farsamooyinka hadda ee anshaxa ardayda oo yoolkiisu yahay kor u qaadista khibrada badqabka ayadoo haddana la ilaalinaayo ku dhaqanka sharciga gobalka iyo federaalka, iyo gaarista yoolka sinaanta iyo wadajirka ee dhammaan ardayda.

KOOXDA GURMADKA DHIBAATADA DEGMADA

Xaalada Hadda: Kooxda Soo kabashada Dhibaatada ee Degmada DPS (DCRT) ayaa ka shaqaysa ka taageerida dugsiyada ka jawaabida iyo dedaallada kasoo kabashada dhibaatada. Shaqaalaha gurmadka DCRT waxaa kamid ah taqasusleyaasha caafimaadka dhimirka dugsiga, shaqaalaha bulshada ee dugsiga, kalkaalisooyinka dugsiga, la taliyaasha dugsiga iyo shaqaalaha kale ee qaybta ka ah shaqaalaha gurmadka degmada marka dhibaatadu ka badan tahay awooda dhismaha si loo taageero soo kabashada.

Waaxda Cimilada iyo Badqabka ayaa hogaaminaysaa Gurmadka Masiibada ee Degmada, si xal loogu helo badqabka jireed inta lagu jiro dhacdada dhibaatada. Marka badqabka jireed la xaliyo, Waaxda Cmilada iyo Badqabka ayaa la shaqeysa Kooxda Kasoo kabashada Dhibaatada ee Waaxda Caafimaadka Dhimirka Degmada si xal loogu helo badqabka shucuurta iyo dhimirka. Diirada ugu wayn ee DCRT waa in la xaqiijiyo in ardaydu ay helaan daryeelka caafimaadka dhimirka ayna ka taageeraan dugsiga soo kabashada laguna laabto goob shucuur ahaan amaan ah oo ku haboon waxbarashada sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

Shaqaalaha Gurmadka DCRT ayaa dhaqan gasha adeegyada si waafaqsan qaabka NASP PREPaRE ayadoo kaashanaysa Waaxda Isgaarsiinta DPS iyo Waaxda Jawiga iyo Badqabka DPS. Shaqaalaha ayaa heli kara taageero uu baxsho Barnaamijka Caawimaada Shaqaalaha iyo wakaaladaha kale ee dadwaynaha.

Waalidiinta/daryeeleyaasha ayaa xog badan ka ogaatay jawaabta masiibada ee dugsiga iyo dedaallada kasoo kabashada ama xog badan uga ogaadaan khayraadka caafimaadka maskaxda kuwaasoo qoysasku ka heli karaan banaanka maalinta casharada ama inta lagu jiro fasaxa ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna, Adeegyada Dhibaatada Colorado ee taageerada dhibaatada, Second Wind Fund ee tlo bixinta ka jawaabida khatarta isdilka, ama Judi's House ee adeegyada tacsida iyo khasaarada.

Xaalada Mustaqbalka: Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa sii wadi doonta siinta khayraadkaan ardayda iyo qoysaska, lana shaqayn doona saamileeyda gudaha iyo banaanka si loo go'aansho iskaashiyo dheeraad ah oo adkaynaaya saamaynta khayraadkaan.

GURMADKA SHILKA

Xaalada Hadda: Dhacdooyinka dhibaatada ayaa noqon kara kuwo yaryar, heer dhisme, degmada, ama heerka gobalka, nooca jawaabta waxaa badanaa lagu saleeyaa noocyada dhacdada ayna ku jiraan qiyaasta, mudada, darnaanta, iyo cawaaqibka.

- Heerka ugu yar: Badanaa way u baahan tahay hal ilaa sadex shaqaalaha kamid ah oo taageeri kara baahiyaha soo kabashada.
- Heerka dhismaha: Waxay u badan tahay inuu carqalad gasho shaqo maalmeedka dugsiga waxaana taageeri kara Kooxda Xaalada degdega ah ee dugsiga (Kooxda E).
- Heer degmo: Jawaabaha heer degmo ayaa ka badan awooda kooxda dhismaha waxayna u baahan yihiin hawlgelinta shaqaalaha dheeriga ah ee degmada.
- Heer gobal: Kooxaha degmada ayaa hela wakaaladaha bulshada iyo iskaashatada kale ee caafimaadka dhimirka maadaama ay ka baxsan tahay awooda dugsiga iyo degmada ee taageerista dedaallada soo kabashada.

Marka xaaladu dhacdo, Dugsiyada Dadwaynaha ee Denver ayaa raacda Hanaankeena Gurmadka Dhacdada (ICS).
Sida la sheegay, hogaamiyaasha shilalka ee Magaallada, Dugsiga iyo Degmada ayaa isku heer ka jooga abuurista dalis midaysan; hase yeeshee, Hogaamiyaha Shilalka ee Degmada ayaa gaara go'aannada xoogaa ka balaaran kuwa kale oo ay gaaraan labadaba Hogaamiyaha Shilalka Magaallada iyo kan Dugsiga waana in loo gudbiyaa Gudoomiyaha Shilalka ee Degmada.

Sida kor lagu sheegay, ICS waa hanaan qaybo leh umana baahna in si buuxda loo dhaqansho si qaab waxtar leh looga jawaabo dhaco fudud; hase yeeshee, hanaanka ICS ayaa muhiim noqonaaya marka heerka dhacdo loo aqoonsado inuu keenaayo heer loo baahdo gurmadka heer degmo. Tusaale, gurmadka heer degmo, sida xaalada degdega ah ee cimilada, ayaa u baahan kara in qayb yar laga dhaqan gasho hanaanka si keliya madaxa dhacdooyinka ee dhismuhu shaqadaas u qabto. Gudoomiyaha shilalka ayaa haysta dookh uu keliya ku dhaqan gasho qaybaha hanaanka ICS ee uu u arko inay muhiim u yihiin jawaab sax ah oo laga baxsho dhacdada.

Waaxda Jawiga iyo Badqabka ee Dugsiyada Dadwaynaha ee Denver ayaa ku shaqeysa hanaanka "khataraha oo dhan" si loo maareeyo xaalada degdega ah. Halkii ay ka maamuli lahayd mashruucyada qorsheynta ee xaaladaha khatarta wayn, qorsheynta ku saleysan dhammaan khataraha ayaa abuuraysa awoodaha iyo talaabooyin muhiimka ah si loogu diyaar garoobo xaalada buuxda ee xaaladaha degdega ah ama masiibooyinka.

Joojinta hanaanka ICS ayaa keliya loo sheegaa Kooxda Xaalada degdega ah, waxaana u sheegaaya hogaamiyaha shilalka asagoo adeegsanaaya qaababka wada sheekaysiga marka lasoo afjaro dhacdada. Ayadoo ku xiran heerka dhacdada xaalada ayaa noqon kara dhawr daqiiqo ilaa saacado badan ama xataa maalmo.

Xaalada Mustaqbalka: Si dugsiga iyo shaqaalaha maamulku u fahmaan shaqada ICS, Waaxda Cimilada iyo Badqabka ayaa dhaqan gelin doonta shardiga ah in Kooxaha E ee dugsiga ay dhamaystaan Koorsada Waxbarashada Madaxa Banaan ee Wakaaladaha Maamulka Xaalada degdega ah ee Federaalka 100.c, Barashada Nidaamka Taliska Dhacdada. Koorsooyinkaan isdhexgalka ee webka lagu qaato ee bilaashka ah ayaa u sahlaaya bartamaha inuu sameeyo marka uu waqti u helo.

NIDAAMYADA SHEEGA HUBKA

Tignooloojiyada sheegta hubka ayaa la sameeyay si loo abuuro si qaab wax ku ool ah loogu kala saaro hubka iyo dadka gudaha dugsiyada, oo lamid ah kuwa hadda lgay isticmaalo degmo dugsiyeedyada kale sida Dugsiyada dadwaynaha ee Baltimore iyo garoonada ciyaaraha iyo maxkamadaha. Tignooloojiyada hubka sheegta ayaa adeegsan karta farsamada casriga ah si ardayda, shaqaalaa iyo martidu u maraan albaabka si dhakhso ah ayadoo adeegsanaysa nidaamka tignooloojiyada baaritaanka amaanka ee aan u baahnayn in qofku taabto. Nidaamyadaan ayaa adeegsada qalabka dareemayaasha iyo softweer AI ah si ay u qabtaan xogta la qiimayn karo si kor loogu qaado waxtarka shaqad fikir buuxana looga baxsho hawlgalada amaanka.

Xaalada Hadda:
Sheegista hubka ayaa loo adeegsadaa munaasabadaha ciyaaraha iyo munaasabadaha ay codsadaan maamuleyaasha. Adeegsiga nidaamka hubka sheega ayaa u baahan kordhinta tirada saraakiisha si loo taageero dhacdada, Waaxda Cimilada iyo Badqabka waxay leedahay afar waaxood oo wareega ayna fududahay in laga diro meel oo meel kale la geeyo.

Xaalada Mustaqbalka: Nidaamka baarista hubka waa keliya hal qayb oo kamid ah istaraatiijiyada badqabka waxaana sii wadnaa inaan raadino dookhyada ugu fiican, ee ugu waxtarka wanaagsan. Go'aaminta nidaamka sheega hubka ee la dhigaayo dugsiga ama dhismaha degmada ayaa noqon doona go'aan xarunta lagu gaaro ayadoo si wayn loogala tashanaayo bulshada.

KOR U QAADISTA ADKAYSIGA DHALINTA

KAHORTAGA RABSHADA DHALINTA EE DUGSIYADA HOOSE

Xaalada Hadda: Nasiib daro caqabadaha keena rabshada dhalinteena waawayn ayaa badanaa kasoo biloowda dhacdooyin xili hore noloshooda. Deddaallada DPS ee kahortaga rabshada qoyska iyo kor u qaadista adkaysiga ayaa ka biloowda dugsiyadeena hoose.

Ka hortaga rabshada dhalinta ee dugsiyada hoose waxaa ku jira dhammaan qaybaha waxbarashada shucuurta bulshanimada ee guud.

- Dhisida jawi iyo dhaqan wanaagsan
- Abuurista caadooyin iyo hawlo joogto ah

- Abuurista xiriiro kalsooni leh oo u dhexeeya shaqaalaha dugsiga iyo ardayda

Tusaaleyaasha barnaamijkaan guud ee ardaydeena yaryar waxaa kamid ah:

- Kulannada fasalka
- Waxbarashada balaaran ee caafimaadka.
- Taageerooyinka wanaagsan ee habdhaqanka
- Qaababka dhaqan celinta ah

Barnaamijka yoolka leh ayaa badanaa lagu sameeyaa fasalka ama heerarka qolka fasalka. Tan waxaa ku jira dhaqan gelinta sanadlaha ah ee kahortaga isdilka oo laga sameeyo fasallada heerka 5aad ayadoo la adeegsanaayo Riding the Waves, kaasoo diirada saaraaya guul laga gaaro walaaca iyo barashada qaababka caafimaadka leh ee la qabsiga. Casharadu waa kuwo waxbarasho, maaha baxnaanin, fasalka oo dhan ayaana lagu sameeyaa. Barnaamijyada ayaa la dooran karaa ayadoo lagu saleynaayo baahiyaha waxaana ku jiri kara barnaamijyo sida Second Step, xirfadaha bulshada ee fasalka ku saleysan ee ardayda ku jira dugsiga barbaarinta ilaa fasallada hore ee dugsiga sare (da'aha 4-14 sano). Waxaa loo sameeyay inuu yareeyo habdhaqannada fawdada ah, khatarta badan, ee rabshad kicinta badan uuna kordhiyo karitda bulshanimada ee carruurta iyo sababaha kale ee difaaca ah. Waxaa sidoo kale jira Aagaga Xeerka, qaab loo adeegsado in lagu taageero hormarinta maareynta nafta ee carruurta. Dhammaan qaababka kaladuwan ee carruurtu dareemaan iyo xaaladaha feejignaanta ee ay waajahaan ayaa loo qaybiyaa afar aag oo midab lagu asteeyay. Carruurta leh nidaamka wanaagsan ayaa awooda inay galaan aaga haboon waqtiga ku haboon.

Xaalada Mustaqbalka: Ururada bulshada ku salaysan ayaa la shaqeyn doona dugsiyada si loo baro dhibaataynta galmada, wacyiga caafimaadka dhimirka, kahortaga isdilka, casharada la xiriira ogolaanshaha, xiriirada caafimaadka, iyo warbixinta qarsoodiga ah ee mawduucyada la xiriira rabshada. Iskaashatada qaybta ka ah shaqadaan waxaa ku jiri kara, laakiin kuma koobna Xarunta U Qareemida Carruurta ee Denver, Safe2Tell Colorado iyo Xarunta Khayraadka Dugsiyada Amaanka ah ee Colorado. Marka laga soo tago la shaqaynta ardayda iyo shaqaalaha dugsiga, iskaashatadeena bulshada ayaa ka shaqeyn doona bixinta tababar iyo xog la siiyo waalidiinta/masuuliyiinta si loo taageero isticmaalka luuqada guud ee badqabka inta u dhexaysa guriga iyo dugsiga.

WAXBARASHADA TIXGELISO DHAQANKA (CRE)

Waxbarashada Dhaqanka ku haboon waxay ka caawisaa Dugsiyada Dowladda ee Denver inay xal u helaan badqabka dugsiga ayadoo ka caawinaysa in dugsiyadu abuuraan dhaqanka dugsiga oo wanaagsan loona dhan yahay kaasoo ardaydu ay dareemayaan in la qiimaynaayo, la qadarinaayo, ayna badqab helayaan. Waxaan aaminsan nahay in marka ardaydu ay dareemaan inay ku xiran yihiin bulshada dugsiga ayna xiriiro wanaagsan la leeyihiin macalimiinta iyo ilmaha kale, inay yar tahay inay sameeyaan falal khatar ah ama falal rabshad ah. Waxbarashada ilaalinaysa dhaqanka ayaa aqoonsata oo u dabaaldegya kala duwanaanta asallada ardayda,

taasoo gacan ka gaysata yareynta isku dhacyada iyo isfahan waaga taasoo keeni karta gardaro, dhibaatayn, ama noocyada kale ee rabshada.

Taariikhiyan, ardayda faquuqa loogu gaystay cadaalad darada nidaamka ee ku saleysan isirka, qoomiyada, luuqada, awooda ama jinsiga iyo dookha galmada, ayaan helin manhaj iyo cashar muhiimada saaraaya oo kobcinaaya shaqsiyadahooda, khibradahooda, iyo xiriiradooda dhaqanka ee qiimaha badan. Manhajka taqliidiga ah ayaa diirada saaray dhaqannada cadaanka, dadka dabaqada dhexe iyo fikradahooda kana soo qaaday ardayda aan kor ku soo sheegnay kuwo qaba baahiyo cilad ah una baahan in la baabi'iyo ama la badelo. Ardaydeenu kuma aysan arkin naftooda ama dhaqannadooda oo lagu maamuusaayo khibradahooda waxbarashada taasoo keentay inay dareemaan inaysan qayb ka ahayn dugsiga ayna dareemaan amaan daro maskaxeed.

Waxaan muhiimada saarnay si aan isbadel wayn ugu samayno manhajka iyo casharada si aan u bixino khibradaha waxbarashada oo ilaalinaaya dhaqanka ardaydeena. Waxaan doonaynaa inaan "...inaan kobcino aana barbaarino— si aan u joogtayno— hanaanka luuqada, fanka iyo dhaqanka loo dhan yahay ee ardaydeena. Inta dhalinteenu ay waxbaranayaan, aqoonsiyadooda iyo qaababkooda dhaqanka ee jiritaanka ayaa qayb muhiim ah ka noqon doona laguna joogtayn doonaa inta ay kobcinayaan/sii balaarinayaa aqoontooda iyo dabeecadooda la dhaqanka bulshada."

Sida lagu qeexay Qaraarka Baro Cadaalada Baro Nabada ee DPS, Gudiga ayaa ku amray Kormeeraha guud inuu "uu ka shaqeysiiyo qorshe lagu xaqiijinaayo in dhammaan dugsiyada katirsan manhajka iyo shaqada xirfadeed bah-wadaagta Dugsiyada Dowladda ee Denver si loogu daro waxqabadka taariikhda iyo kuwa casriga ah ee balaaran ee dadka Madoowga ah, Asaliyiinta, iyo bulshooyinka Laatiinka ah." Waxaan dib u naqshadeynaynaa aana u nidaaminaynaa hanaankeena qiimaynta hanmajka iyo naqshada iyo waxbarashada xirfadeed si aan u xaqiijiyo in khayraadkeena iyo khibradaha waxbarashadu ay yihiin "...kuwo isbadel abuuraaya, insaaniyad leh, kahortagaaya isir nacaybka kuna saleysan hanti!"

Diirad saarida naqshadaynta manhaj ilaalinaaya dhaqanka ayaa taageeraaya dhisida maskaxda macalimiinteena iyo awooda si kor loogu qaado kartida ardayda loona kobciyo joogtaynta dhaqankooda. Waxaan taageernaa hogaamiyaasha iyo macalimiinta adkaynta kartidooda dhaqanka iyo garaadka saliimka ah si aysan keliya u dhaqan gelin manhajka la saxay/cusub si sharaf iyo feejignaan leh laakiin si ay sidoo kale u adeegsadaan goobo waxbarasho oo maskax ahaan amaan ah hormarna leh.

Qaababkaan, hanaanka Dugsiyada Dowladda ee Denver ee waxbarashada waafaqsan dhaqanka ayaa gacan naga siinaaya inaan dhisno xirfadaha kartida dhaqanka, iyo bulshanimada iyo shucuurta ee ardayda, kuwaasoo muhiim u ah kahortaga habdhaqanka rabshada wata. Anagoo ku dhafayna ilaha, fikradaha, iyo khayraadka ilaalinaaya dhaqanka, macalimiinta ayaa abuuri kara goob waxbarasho oo leh la falgelid lana xiriirta nolosha ardayda. Tan ayaa kordhin karta

dhiiri gelinta ardayda si ay wax u bartaan una yareyso suuragalnimada inay ka caajisaan dugsiga. Waxaa intaas dheer, waxbarashada ku haboon dhaqanka ayaa ka caawinaysa ardayda inay bartaan u damqashada iyo fahanka dadka kale, taasoo yareynaysa iskudhacyada korna u qaadeysa xalinta khilaafaadka si amaan ah. Ugu danbayntii, ayadoo kor u qaadeysa jawiga dugsiga ee wanaagsan oo loo dhan yahay dhiseysana xirfadaha bulshanimada iyo shucuurta ee ardayda, waxbarashada waafaqsan dhaqanka ayaa door ka qaadan karta goob waxbarasho oo badqab iyo nabadgalyo leh.

Xaalada Hadda: Inta lagu jiro sanad Dugsiyeedka 2022-2023, kooxaha tacliinta ayaa sameeyay waxbarasho tiirka loogu taagaayo mabaadii'da dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan ku haboon joogtaynta manhajka iyo casharka inta la abuuraayo higsiga waxa aan dooneyno in lagu dhiso ilaheena manhajka. Xiliga Gu'da 2023, waxaan dejinay farsamooyinka qiimaynta joogtaynta manhaj dhaqan iyo iyo luuqad ahaanba sugan maado kasta oo tacliineed waxaana biloownay inaan samayno isla xisaabtan gudaha ah ee manhajkeena. Kooxaha ay ku jirana hogaamiyaasha, khubarada Waxbarashada Ku Haboon Dhaqanka iyo Tababareyaasha, iyo macalimiinta, waxaan qiimayn ku samaynay 10 kamid ah manhajyada ay maal geliso DPS ee dhammaan fasallada kaladuwan. Duleellada lagu ogaaday isla xisaabtan ayaa bud-dhig looga dhigay isbadellada iyo hormarinta iyo dhaqan gelinta khayraadka cusub ee waafaqsan higsigeena manhajkeena manhajka dhaqan ahaan iyo luuqad ahaanba sugan.

Waxaan sidoo kale dhisaynaa nidaamyo aan kula shaqeynayno hogaamiyaasha, macalimiinta, iyo ardayda nidaamyada fikir uruurinta si aan u helno xog biloowga iyo dhammaadka qaybta daraasada si aan u go'aamino meesha fasalku hormar ka sameeyay, labadaba dhinacyada kartida (waxbarashada ardayda) iyo ku haboonaanta dhaqanka (kartida dhaqanka iyo caqliga saliimka ah). Nidaamyada fikir uruurinta, marka lagu daro isla xisaabtanka ayaa dhiiri gelinaaya muraajacooyinka qaybta, hormarinta khayraadka cusub, iyo naqshada koorsada. Barnaamijka biloowga ah waa wada shaqayn u dhexaysa dugsiyada, tacliinta, qiimaynada iyo kooxaha xogta si loo uruursho fikirka ardayda ee la xiriira maadooyinka muhiimka ah.

Xaalada Mustaqbalka: Sanad Dugsiyeedka 2023-24, waxaan sii wadi doonaa isla xisaabtanka gudaha ee yaboohyada manhajkeena. Waxaan balaarinaynaa nidaamyada fikir uruurinta si aan ula hadalno macalimiinta, hogaamiyaasha, iyo qoysaska. Isla xisaabtannada iyo fikradaha ayaa faahfaahin kasii bixin doona dib u eegisyada iyo hormarinta/dhaqan gelinta khayraadka.

Waxbarashada xirfadeed ee ee ay baxshaan kooxaha tacliinta ayaa aasaas u noqon doona adkayn fikirkeena ku haboon dhaqanka ee ku saleysan hantida. Macalimiinta ayaa xoojin doonta awoodooda si loo fududeeyo casharada qaybta 1 ee dhaqanka ku haboon halkaasoo ardaydu ku bartaan manhaj hormar iyo aadanimo siinaaya.

Dhammaan macalimiinta cusub ayaa adeegsan doona koorsada aasaaska Sugida Dhaqanka macalimiinta iyo hogaamiyaasha soo laabtana waxay heli doonaan fursad ay koorsada muraajacada ah ee Sugista Dhaqanka.

FURSADAHA HORMARINTA XIRFADA

Xaalada Hadda: Dhalinyarada aaminsan inay leeyihiin mustaqbal ifaaya ayay yar tahay inay sameeyaan falal khatar gelinaaya. Anagoo tan xasuusan, DPS ayaa leh barnaamijyo loo sameeyay inay ardayda ka caawiyaan barashada noocyada kaladuwan ee dookhyada xirfada si ay u helaan xirfad ay ku dedaalaan ayna ku faraxsan yihiin.

Lagasoo bilaabo 2014, DPS ayaa bixisay fursadaha waxbarashada ee shaqada ku salayesan ee tayada sare leh ardayda ardayda K-12. Kooxda Hormarinta Xirfada ayaa hormariya adeegga buuxa ee todobo barnaamijyada degmada ah oo ku jira manhajkooda guud kuwaasoo ay ku jiraan wax kasta laga bilaabo ka qaybgalka munaasabadaha xirfada ilaa tababarka, shaqo barista iyo tababarada shaqada oo diirada saaraaya barista ardayda xirfado kobac sare, iyo mushaar badan leh iyo taageerooyinka khormarinta tayada bulsho ayadoo la adeegsanaayo shabakad xirfadeed ka bilaabata dugsiga hoose.

Kooxda Waxbarashada ee ku saleysan shaqada ayaa sii wada inay wax curiyaan ayagoo naqshadeynaaya ilaha kooxda kalsoonida iyo khibradaha diirada lagu saaraayo bulshadeena ugu nugul. Dhawaan, waxay iskaashiyo la galeen barnaamijka dugsiga xagaaga ee Degmada, iyo sidoo kale ururada bulshada si loo gaarsiiyo barnaamijka dhalin badan loogana caawiyo qaabaynta aqoonsigooda xirfadeed. Shaqaalaha xafiiska dhexe iyo kuwa dugsiga ayaa taageera wada Kaqaybgalka ardayda ayadoo aan wax qarash ah laga qaadayn dugsiga/qoysaska. Su'aalaha waxaa loo diri karaa careerandcollegesuccess@dpsk12.org.

Sanad dugsiyeedka 2021-22, Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa siisay adeegyadaan in ka badan 10,700 arday oo dhigta fasallada K-12. Intii lagu jiray sanad Dugsiyeedka 2022-23 DPS ayaa balaarisay fursadaha ayadoo diirada saartay ardayda yaryar sidoo kalena kordhinaysa fursadaha kooxda caawimaada. Waxaan u adeegi doonaa in ka badan 5,000 oo ardayda dugsiga hoose iyo dhexe ah sanadkaan, anagoo balaarinay barnaamijkeena biloowga ah si aan ugu darno arday dheeri ah iyo dugsiyo dheeri ah.

Waxaa intaas dheer, barnaamijka Shaqada Dhalinyarada Denver ayaa baxsha 300 oo khibradaha dhalinta oo mushaar lagu baxsho ah inta lagu jiro xagaaga iyo 100 arday inta lagu jiro sanad dugsiyeedka ayaa heli doonta taageerada balaaran ee ay bixinayaan maareeyaha kiiska ee Dugsiga Sare ee North, Dugsiyada Sare ee Montbello, Dugsiga Sare ee Manual, Respect Academy, Dugsiga Sare ee Lincoln, iyo Machadka Contemporary Learning Academy. Su'aalaha waxaa loo diri karaa dyep@dpsk12.org

Xaalada Mustaqbalka: Waxaan aaminsan nahay kordhinta helitaanka waxbarashada shaqada ay xaqiijin doonto in ardayda DPS qalin jebiyaan ayagoo u diyaarsan kuleej, xirfad iyo nolosha. Sanad dugsiyeedka 2023-24 Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa sii wadaysa inay balaariso fikradaha ardayda ku jira hormarinta aqoonsiga hore ee xirfada ayadoo kordhinaysa helitaanka ardayda dugsiga sare ee tababarka, shaqo barashada, iyo fahanka shaqada.

FURSADAHA WAXBARASHADA EE DHEERAADKA AH

Xaalada Hadda: Ardayda qaata koorsooyinka sare ee dugsiga sare si joogto ah ayay u helayaan heerarka sareeya ee qalin jebinta, heerarka u baashada kabista oo hooseeya iyo heerarka sareeya ee aqbalaada kuleejka. DPS ayaa shaqooyinka soo socda ku siisa si bilaash ah ardayda DPS:

Barnaamijka	# Ardayda Diiwaan gashan
Diiwaangelinta Isku wakhtiga Ah (CE)	6,000
Meeleynta Hormarsan (AP)	4,000
Shahaadada Caalamiga ah (BI)	2,300
Shaqada iyo Waxbarashada Farsamada (CTE)	In kabadan 9,000

Dhammaan ardeydana waxaa lagu boorinayaa inay qaataan koorsooyinkaan dugsiyada sare ayaana hela labadaba taageerada dhaqan gelinta iyo dhaqaale dheeraad ah si looga taageero abuurista koorsooyinkaan gudaha xarumahooda. Ardayda ayaa sidoo kale qaadan kara Diiwaan Gelinta Isfeer Socota ee Kuleehka oo lagu baxsho xarunta Kuleejka Bulshada ee Denver (CCD), Jaamacada Bartaha Gobalka (MSU) iyo Kuleejka Bulshada ee Aurora (CCA) si bilaash ah.

DPS waxay ku bixisaa nidaamyada tubta kuleejka iyo shaqada ee Waxbarashada Farsamada iyo Shaqada (CTE) ku dhawaad dugsi kasta oo sare oo isku dhafan oo caadi ah iyo qaar kamid ah dugsiyada dhexe ee dhinacyada kalkaalinta, ganacsiga, IT ga, amaanka kumbuyuutarka, injineeriyada iyo maadooyinka kale oo badan. Marka ay dhameeyaan, ardayda ayaa qaata s. Ardayda ayaa fursad u helaaya inay qaataan koorsooyinka tubta CTE, ay dhamaystaan tababarka shaqada haddii ay u baahdaan ayna helaan shahaado lagu adeegsan karo si toos ah goobaha shaqada ama lagu dabiqi karo barnaamika Shahaadada hoose ama Bajalaarka marka ay dugsiga sare ka qalin jebiyaan. Barnaamijyadaan ayaa abuura xiradaha kobaca sare, ee mushaarka badan oo ay helaan ardayda waxayna siiyaan aqoon la xiriirta xaqiiqada aduunyada, oo lagu siiyo dugsiga sare.

Xaalada Mustaqbalka: Inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2023-24 Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa la shaqayn doonta dugsiyada si loo baxsho helitaanka saraysa ee ardayda dhammaan fursadaha Heerka Sare ee Tactiinta. Waxaa intaas dheer Dugsiyada Dowladda ee

Denver ayaa sii wadi doonta kordhinta adkaynta casharada maalin kasta ayadoo la adeegsanaayo hormarinta xirfada joogtada ah iyo talo bixinnada ay bixinayaan gudiyada talo bixinta shaqaalaha. Waxaa intaas dheer, Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa ka bixinaysa koorsooyinka dugsiga dhammaan nidaamka si loo siiyo ardayda shahaadooyinka dheeriga ah ee kuleejka iyo xirfada oo dhalinaaya xirfado kobac sare, iyo mushaar badan leh. Si talaabadaan loo sameeyo Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa la shaqayn doona Kuleejyada iyo Jaamacadaha Maxaliga ah, iyo sidoo kale iskaashatada ganacsiga qaabab hal abuur leh si loo balaarsho CTE iyo shahaado ku bixinta shaqada koorsada dhammaan dugsiyada sare.

XARUMAHA BULSHADA

Xaalada Hadda: Mararka qaar ardaydeena ayaan awoodin inay si fiican u wax u bartaan sababo ka baxsan khibradahooda dugsiga, sidaas awgeedna, maamulka Kormeere Guud Dr. Marrero, DPs ayAA FURTAy lix xarumaha bulshada ah sanad dugsiyeedka 2022-2023 oo laga furay Denver kuwaasoo siiya taageerada guud qoyska ardayda iyo bulshadooda, ayagoo bixinaaya adeegyo bilaash ah si loo kordhiyo isku filnaanshaha dhaqaalaha iyo kama danbaysta guusha tacliinta waxbarashada. Dhammaan adeegyada iyo casharada ayay bilaash ku helayaan xubnaha bulshada ee jira 16 sano iyo ka wayn - maaha keliya ardayda DPS. Xarumaha Bulshada ayaa adeegyada ku baxsha dhammaan xaafadaha degmo dugsiyeedkeena. Adeegyada waxaa ku jira:

- Casharada GED oo ku baxaaya Ingiriis
- Adeegyada shaqada
- Xirfadaha kumbuyuutarka
- Casharada Muwaadinnimada
- Casharo lagu barto Ingiriis iyo Isbaanish
- Tababarka Dhaqaalaha
- Caawimaada Isku xirka Tamarta
- Caawinta baahiyada aasaaska
- Adeegyada taageerada shucuurka bulshanimada
- Aqoon kororsiyada caafimaadka iyo Nafaqada
- Aqoon kororsiyada waalidnimada
- Casharada aqoonta carruurnimada hore

Si lamid ah xarumaheena bulshada, laakiin diirada lagu saaraayo siinta adeegyada dhalinteena baahida wayn u qaba ee u ira dugsiyada sare ee Diyaarinta Gobalka Dhexe, Xaafada OLA waa goob u wada furan ardayda hadda iyo kuwii hore, kuwii qalin jebiyay iyo qoysaskooda si ay uga helaan baahiyahooda xalna ugu helaan caqabadaha ay u aqoonsadeen ku foognaanta dugsiga iyo shaqada, iyo ka guul gaarista higsiyada nolosha. Xaafadu ay xalisaa baahiyaha aan la daboolin ee la xiriira:

- Fakhriga
- Guryaha
- Shaqada
- Shucuurta/Caafimaadka Dhimirka
- Isticmaalka maandooriyaha
- Kormeerka
- Isku xirka
- Kahortaga burcada
- Yareynta rabshada

- Talo Bixinta Dugsiga sare Kadib
- Dharka
- Cuntada
- Fahanka Xirfada
- Tababarka u diyaar garoowga shaqada
- Aqoonta dhaqaalaha
- Barnaamijyada GED

Xaalada Mustaqbalka:

- Sanad dugsiyeedka 2023-2024, Xarumaha Bulshada ayaa bixin doona casharada ESL, casharada GED, Adeegyada Shaqaalaha, iyo Barnaamijyada Waxbarashada Ilmaha ee dhammaan goballada.
- Mashiinada buugta laga iibsado ayaa laga heli doonaa afar kamid ah Xarumaha Bulshada
- Munaasabadaha aqoonta qoyska ayaa la abaabuli doonaa
- Abuurista maktabadaha guriga waxaa taageeri doona dhammaan ka qaybgaleyaasha
- Xarumaha Bulshada oo dheeri ah ayaa la abuuri doonaa haddii dhaqaale loo hello
- Yoolka ka gudbida heerarka qalin jebinta GED 10% lagasoo bilaabo sanad dugsiyeedka 2022-2023
- Sii wadista balaarinta iskaashiyada hormarinta shaqaalaha

WAQTIGA LAGA MAQAN YAHAY DUGSIGA

Dhalinta ka qaybgala talaaboyinka wax dhisaaya, ee macnaha leh banaanka dugsiga ayay sidoo kale yar tahay inay sameeyaan falalka khatarta iyo rabshada leh. Sidaas awgeed, waxaan bixinaa fursado kaladuwan oo loo sameeyay in lagu taageero ardayda marka aysan dugsiga joogin.

Xaalada Hadda: DPS waxay siisaa fursadaha soo socda marka ay ardaydu ka aqan yihiin dugsiga:

Fursadaha Barashada Kuleelaha

DPS ayaa bixisa fursadaha kaladuwan ee Waxbarashada Xagaaga ay degmadu maamusho. Labo kamid ah fursadaha ugu balaaran ayaa ah Summer Connections iyo Discovery Link. Degmadu waxay bixisaa Rugta Kobcinta oo la yiraahdo Enrichment Exploration oo laga helo mid kamid ah dugsiyada hoose ee DPS kaasoo dhex bartanka ku yaala. Waxaa sidoo kale bixinaa Barnamijka xagaaga ee Labada Luuqadood iyo Barnaamijka Labada Luuqadood ee Xagaaga ee Guurguura.

Iskuulka Kuleylaha: Barnaamijka waxbarashada oo bilaash ah, socdana 5 asbuuc oo furan ilmaha galaaya fasalka 1aad ilaa fasalka 5aad laguna baxsho 10 dugsiga hoose ee DPS kamid ah oo ay dhigtaan arday dhan 3,000 oo arday. Summer Connections (Machadka Kuleelaha oo dib loo naqshadeeyay) ayaa. Maalintii oo dhan ayaa wax la baranayaa oo waxaa xoogga la saarayaa sida ay ardeydu dugsigooda hoose mustaqbalka ugu guuleysan karaan. Ardeydu

waxaa loo sii dhigayaa waxbarashada ay dhigan doonaan sannad-dugsiyeedka soo socda, oo waxaa ka mid ah waxbarashada wax-akhriska, wax-qorista, xisaabta iyo seyniska. Iskaashatada kobcinta tacliinta ayaa ardeyda bari doona 60 daqiiqo maalin kasta waxyaabo gaar ah oo isugu jira barista casharrada aqoonta ah ee maalin kasta. Barnaamijka waxaa lagu saleeyaa diiwaan gelinta.

Kaamka Kulaylaha Xagaaga ee Discovery Link: Adeegga maalinta buuxda laga bilaabo 7am - 5:30pm muddo 8 asbuuc ah waxaa ruqsad siiyay gobalka Colorado waxaana lagu baxshaa 16 dugsiyada hoose ee DPS kamid ah. Dugsi kasta wuxuu u adeegaa ilaa 165 arday maalin kasta kuwaasoo u dhigma in ka badan 2,600 oo arday dhammaan adeegyada kaamka. Inta badan kaamamka ayaa u adeegga ardayda jira 3 ilaa 12 sano, laakiin qaarkood ayaa aqbala ardayda ilaa 15 sano jirka ah. Ardayda ayaa ka qaybgala nashaadaad baashaal iyo wada shaqayn leh oo taageeraaya xirfadaha dhisaaya xiriirka, dhaqdhaqaaqa, iyo hal abuurka. Barnaamijku waa mid maadooyin badan baxsha oo ay ku jiri karaan:

- SEAL (Waxbarashada Shucuurta Bulshanimada iyo Tacliinta)
- Waxbarashada Jirka
- STEAM (Sayniska, Tignooloojiyada, Injineeriyada, Farshaxanka, iyo Xisabata)
- Fanka
- Dheesha
- Muusiga
- Jeeska
- Safarada Gaaban

Diiwaan geli

Kaam Duureedka Kobcinta Garaadka ee Xagaaga: Dookha kaamka à la carte ee qoysaska; waxay dooran karaan ilaa 1.5 saac casharo ah maalin kasta ayagoo helaaya liiska kala xulashada maadooyinka, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna Koodh samaynta, Farshaxanka, Sayniska, muusiga, Waxbarashada Jidhka, Wax Karinta, iwm, Arday ayaa xaadiri kara kaamkaan gelina kara waqti feejignan leh oo uu diirada saaro dhisida hal xirfad dhammaan maalinta. Kaamkaan ayaa si dhab ah ugu ogolaanaaya ardayda inay bartaan xiiseyaashooda hadda iyo kuwa cusub kuna bartaan goob foognaan leh oo nidaamsan. Xagaaga 2023 kaamkaan ayaa lagu bixin doonaa Dugsiga Hoose ee Cory. Diiwaan geli

Barnaamijka Xagaaga ee Labada Luuqadood ee Escuela Valdez: Barnaamijka xagaaga oo gaar ah ayna baxshaan shaqaale shahaado aad u sareysa haysta si loo siiyo ardayda fursad ay ku sii wataan hormarinta aqoontooda labada luuqadood ee xisaabta, fanka, iyo cilmiga kumbuyuutarka (koodh samaynta Legos). Barnaamijka ayaa bilaaban doona Juun 6deeda-Juun 30keeda asagoo u adeega ilmaha soo koraaya ee fasallada K-5. Si aad isku diiwaan geliso fadlan la toos ula xiriir dugsiga .

Dugsiga xagaagaha ee Wada Shaqaynta Dugsiga Dhexe ee Gobalka (Montbello): Barnaamij loo sameeyay ardayda dugsiga dhexe si loo dhiiri gasho looguna jiheeyo tacliinta iyo xirfadaha nolosha. Barnaamijka ayaa u dhexayn doona doona Juun 5deeda-Juun 30keeda asagoo u adeega ilmaha soo koraaya ee fasallada 7aad iyo 8aad. Barnaamijka ayaa diirada saari doona xisaabta, fanka, TSEAL, cilmiga kumbuyuutarka (koodh samaynta legos) iyo dalxiisyada

banaanka. Si aad u hesho xog dheeraad ah, ama aad isku diiwaan geliso fadlan la toos ula xiriir dugsiga .

Fursado Kahor iyo Kadib Dugsiga

Iskaashatada DPS oo leh iskaashatada dugsiga kadib iyo kahor oo dhawr ah, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna:

- Haadiga Wiilasha iyo Gabdhaha ee Metro Denver
- Breakthrough Kent
- City Year Denver
- Colorado Gear UP
- Colorado I Have a Dream
- Colorado Uplift
- Denver Urban Scholars
- Colorado Youth for a Change
- Right at School
- Denver Scholarship Foundation
- Generation Teach
- Girls Inc
- Goodwill Denver
- Mile High United Way
- Project PAVE
- Reading Partners
- Scholars Unlimited
- YESS Institute
- Launch Network
- Mi Casa Resource Center

Iskaashatadaan waxay bixiyaan barnaamijyo kaladuwan qaar badan oo kamid ahna waxaa lagu bashaa sida loosoo kala hormaro. Degmada iyo dugsiga ayaa hadda ka wada shaqeeya si ay ugu sheegaan furiinnada si toos ah qoysaska ayagoo adeegsanaaya liiska qaybinta dugsiga.

Waxaan wali doonaynaa inaan iskaashi la samayno bulshooyinkeena si aan u helono fursadaha kobcinta leh, ee ku haboon dhaqanka. Waxaan aqoonsan nahay in arintaani ay badanaa ugu fududahay in la sameeyo haddii ururada bushadu ay kula kulmi karaan ardaydeena meesha ay joogaan. Anagoo tan xasuusan, waxaan suuragelinaynaa in urur kasta oo bulsho oo maxali ah uu codsado inuu adeegsato xarumaheena ayadoo loo maraayo hanaankeena adeegsiga bulshada. Waxaan sidoo kale diyaarinay hanaanadeena iskaashiyada balaaran ee ururada bulshada si hanaanka qiimaynta ee badqabka iyo tayada loo sameeyo halmar heer degmo, kadibna ururka ayaa la shaqayn kara mid kuu doono oo kamid ah dugsiyadeena. Wixii xog dheeri ah.

Discovery Link: Degmada ayaa maamusho barnaamijyada dugsiga kahor iyo kadib inta lagu jiro sanad dugsiyeedka kaasoo la yiraahdo Discovery Link. Asagoo ruqsad ka haysta gobalka Colorado, Discovery Link ayaa hadda lagu baxshaa 50 dugsiyada DPS kamid ah inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Ardayda ayaa ka qaybgala nashaadaad baashaal iyo foognaan leh oo taageeraaya xirfadaha xiriir dhisida, dhaqdhaqaaqa, iyo hal abuurka. Barnaamijku waa adeeg maadooyin badan baxsha ayna ku jiri karaan:

- SEAL (Waxbarashada Shucuurta Bulshanimada iyo Tacliinta)
- Waxbarashada Jirka
- STEAM (Sayniska, Tignooloojiyada, Injineeriyada, Farshaxanka, iyo Xisabata)
- Fanka
- Dheesha
- Muusiga
- Jeeska

Waxbarashada Dheeriga ah iyo Dugsiyada Bulshada: Barnaamijyada kale ee kobcinta iyo ELCSports (oo hadda ku jira sanadkii koobaad oo biloow ah).

Dugsiga Sabtida: Barnaamij hal abuur leh oo taageera ardayda si ay u sii wataan kobcinta aqoontooda xisaabta, fahanka iyo TSEAL Sabti kasta dhammaan sanad dugsiyeedka. Waxaan hadda haysanaa sideed Dugsiyada Hoose ah iyo labo Dugsiyada Dhexe ah oo ka qaybgala barnaamijka una adeegga in ka badan 530 arday, waana la balaarin doonaa sanad dugsiyeedka 23-24 si loo gaarsiiyo dugsiyo kale oo ku yaala degmada sanad dugsiyeedka 23-24.

Kobcinta ELCS: Barnaamijyada kobcinta ee Enrichment waa adeegyo aan ruqsad lahayn oo hal maado ah oo ay baxshaan shirkado ka baxsan dugsiga kuwaasoo ah Iskaashatada Bulshada ee DPS. ELCS waxay taageertaa barnaamijka Kobcinta oo lagu baxsho in ka badan 30 dugsi oo ku yaala degmada oo dhan, ayadoo siisa ardayda DPS dookhyo badan. Barnaamijka Kobcinta ayaa si taxane ah ula jaanqaada Discovery Link waxaana caadiyan la baxshaa saacada koobaad kadib dugsiga. Ardayda ayaa ka qaybgeli kara Kobcinta iyo Discovery Link isla maalinta marba haddii ay ka diiwaan gashan yihiin labadaba barnaamij ba. Iskaashatada kobcinta ee ee aan la shaqayno ayaa ka shaqeeya barista maadooyinka kaladuwan ayna ku jiraan laakiin kuma koobna: Ciyaar yahannada, STEM, Farshaxanka, Jimicsiga, Sayniska, Cunto karinta, Injineeriyada, Xisaabta, Akhriska, iyo Xisaabta kumbuyuutarka.

ELCSports: Shaqada ELCSports waa in la siiyo dhammaan ardayda dugsiyada iyo hoose iyo ardayda DPS fursad ay ku helaan barnaamijka ELCSports. Barnaamijkaan ayaa inta badan la siin doonaa fasallada 4aad iyo 5aad inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Barnaamijyada xagaaga ayaa loo adeegsan doonaa si qaab wanaagsan loogu diyaariyo ardayda soo kobcaaya ee fasallada 4aad iyo 5aad sanad dugsiyeedka soo socda. ELCSports ayaa la waafajin doonaa Ciyaaraha Dugsiga Dhexe iyo Sare ee DPS ee la xiriira ciyaaraha la baxsho qaabka ciyaarta mushaarka lagu qaato. ELCSports ayaa diyaarin doonta ardayda dugsiga hoose ee DPS si ay ugu biiraan Ciyaar yahannada Dugsiga Dhexe ee DPS. Ardayda ka qaybgaleysa ELCSports ayaa kobcin doona awoodahooda ciyaaraha, baran doona xirfadaha hogaaminta, ayna fahmaan muhiimada ciyaaraha. Marka barnaamijkaani uu kobco, xog dheeri ah ayay heli doonaan ardayda iyo qoysaska DPS.

Xaalada Mustaqbalka: DPS ayaa bixin doona noocyada kaladuwan ee fursadaha ka baxsan dugsiga, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna kuwa soo socda:

Fursadaha Barashada Kuleelaha oo La balaaxshay

- Magaallada Denver waxay qorsheynaysaa inay furto barnaamijka dugsiga kadib, My Spark Denver, ee ardayda DPS ee da'aha 11-14 kuwaasoo u qalma qadada bilaashka ah ama qiimaha jaban Dayrtaan, kaasoo sugaaya Ansixinta Golaha Magaallada, l My Spark Dener wuxuu siinayaa lacagta kaarka baanka oo dhan $1,000 oo ardayda iyo qoysasku u adeegsan karaa inay iska qoraan nashaadaadka iyo barnaamijyada manhajka ka baxsan. Barnaamijka biloowga ah, oo la filaayo inuu kaalmeeyo 4,000 oo arday, ayaa lagu bixin

doonaa Xarumaha Bulshada ee Mile High United Way and Gary ayadoo uu kormeeraayo Xafiiska Arimaha Carruurta ee Denver. Booqo mysparkdenver.org si aad u hesho xogihii ugu danbeeyay aadna wax badan uga ogaato.

- Balaarinta Summer Connections ayadoo lagu saleynaayo ardayda iska diiwaan gelisay.
- Balaarinta kaamKa Xagaaga ee Discovery Link ayadoo lagu saleynaayo xiisaha qoyska.
- Balaarinta Kaamamka Xagaaga ee Labada Luuqadood oo la gaarsiinaayo goobo badan oo ay joogaan ardayda labada Luuqadood.
- Balaarinta Barnaamijka Wada shaqaynta Xagaaga ee Dugsiga Dhexe si aan ugu adeegno Dugsiyo badan oo Dhexe
- Arimaha la xiriira ESPORTS, DPS ayaa qaban doonta tartanka degmada oo u dhexeeya ardayda dugsiga sare una dabaal degaan guulahooda ayagoo la kaashanaayo CHSAA iyo degmooyinka kale ee gobalka.
- Fursado Kahor iyo Kadib Dugsiga

Wakhtiga uu Iskuulku Xiran Yahay ee la Kordhiyay:

- Barnaamijka Dugsiga Sabtida ayaa la gaarsiin doonaa ugu yaraan 30 dugsi ayadoo diirada la saaraayo Xisaabta, fanka iyo Cilmiga Kumbuyuutarka. Barnaamijka ayaa socon doona Sibteembar - Maajo 25 laga bilaabo 9am-12pm ayadoo cunto fudud la bixinaayo.
- ELCS ayaa laga dhaqan gelin doonaa 60 dugsi sanad dugsiyeedka 2023-24 waxayna qorsheyn doonaan bixinta ugu yaraan 20 adeegyada kaamka xagaaga ah ee degmada oo dhan Xagaaga 2024.
- Sanad dugsiyeedka 2023-24, ELCS ayaa ku daraysa 10 dugsi halkaas oo Discovery Link loo kala duwi doono qoysaska.
- Sanad Dugsiyeedka 2023-24 barnaamijka Kobcinta ee ELCS ayaa lagu bixin doonaa 50 kamid ah 60 dugsi ee ELCS. Ayadoo 10 dugsi ee soo hara ay bixinayan qaabkooda gaarka ah ee naqshada.
- Yoolka ELCSports waxaa loogu talagalay barnaamijka si loogu baxsho Dugsi Hoose kasta oo kamid ah DPS marka la gaaro sanad Dugsiyeedka 2025-26. Si qaab sax ah loogu cabiro, ELCS ayaa samayn doonta barnaamijyo kaladuwan oo tijaabo ah si loo xaqiijiyo tayada iyo guusha.
- Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa qaban doonta tartanka degmada ee ESPORTS oo u dhexeeya ardayda dugsiga sare una dabaal degaan guulahooda ayagoo la kaashanaayo CHSAA iyo degmooyinka kale ee gobalka.

Deyrta 2023	**Qaboobaha 2023-2024**	**Gu'ga 2024**	**Xagaaga 2024**	**2024-2025**	**2025-2026**
22 Dugsi	44 Dugsi	60+ Dugsi	Kaamka hormarinta xirfadaha oo	60+ Dugsi	Dhammaan dugsiyada hoose ee DPS

			hal meel ku yaala		

XAALADAHA NIDAAMKA EE AYSAN MAAMULAYN DPS

DPS waxay doonaysaa inay iskaashi qoto dheer kala samayso Magaallada Denver dedaallada kahortaga rabshada qoyska ee lagu cadeeyay Qorshaha Kahortaga Rabshada Dhalinta ee 2023. Inkastoo qaar badan oo kamid ah qorsheheena badqabka ay muujinayaan hadafkaan, hoos waxaa ku qoran dhinacyada qorshaha magaallada ee taageerada magaalladu ay ugu muhiimsan yihiin guusheena guud.

BADQABKA AASAASIGA AH

Xaalada Hadda: Dugsiyada amaanka ah ayaa ka faa'iideysta goobaha amaanka ah ee ku xeeran dugsiyadeena, dhammaan DPS na waxay kaashan doontaa Magaallada Denver si ay muhiimada u saarto badqabka aasaasiga ah oo qayb ka ah Qorshaha Kahortaga Rabshada Dhalinta ee 2023. Magaallada ayaa maal gelin doonta xalalka amaanka dadwaynaha oo ay taageerayaan ayna hagayaan bulshadu, ayadoo abuuraysa kooxaha gurmadka dhibaatada oo bulshada lagasoo xushay abuuraysana hanaanada caawimaada balaaran ee bulshooyinka rabshada waajahaaya. Meelaha gaarka ah ee diirada lagu saaraayo shaqadaan waxaa kamid ah:

- Burburinta Shabakadaha Danbiyada: Inaan la shaqayno saamileeyda bulshada ee bulshooyinka heer federaal, heer gobal, deegaan, iyo kuwa maxaliga ah si diirada loo saaro yaraynta falalka iyo rabshada burcada. Siiw adista istaraatiijiyada balaaran ee Denver ee yareynta rabshada burcada.
- Caawimaada Bkahortaga Burcada Dhalinta: In la taageero balaarinta barnaamijka mudada dheer GRID, oo hadda ah Xafiiska Xalalka Rabshadaha Bulshada, kaasoo ay u shaqeeyaan Shaqaalaha Wacyi Gelinta Burcada kuwaasoo aqoon qoto dheer u leh dhaqanka burcada iyo bulshooyinka Denver labadaba si ay u baxshaan tababarka shaqsiga ah iyo kan qoyska iyo u doodista xubnaha burcada khatarta badan iyo qoysaska si kor loogu qaado baabi'inta burcada.
- Maal gelinta Barnaamijyada Dib U soo Iibsiga Hubka shacabku haysto: In loo ogolaado dadka deegaanka inay si qarsoodi ah u soo ceshaan hubkooda si loogu burburiyo munaasabadaha ikhtiyaariga ah halkaas oo mutadawiciin loo tababaray ay ka caawinayaan burburinta hubka.
- Waxbarashada Badqabka Hubka: Magaallada ayaa kor u qaadi doonta farsamooyinka kaydka amaanka ah ayadoo kaashanaysa dhalinta, bulshada, iskaashatatada dadwaynaha iyo kuwa gaarka ah.
- Caawimaada Kahortaga Tahriibinta Aadanaha: Inta badan fursadaha waxbarashada ee adeeg bixiyaasha, xubnaha bulshada, dugsiyada iyo bulshada guud ahaan si loo baxsho

tababar adag oo ku aadan astaamaha la eegaayo iyo qaababka looga hortago tahriibinta dadka.

Xaalada Mustaqbalka: Waan ognahay in shaqada badqabku ka balaaran tahay dhismeyaasha dugsigeena, taasoo ka dhigan inay qasab tahay inaan door firfircoon ku yeelano magaallada, ismaamulka, iyo gobalka si aan ugu doodno meelaha aan ognahay inay saamayn ku leeyihiin badqabka ardaydeena, shaqaalaha, iyo bulshada. Waxaan sii wadi doonaa inaan diirada saarno xaaladaha nidaamka ee aysan maamulin DPS sida shaqada, xasiloonida dhaqaalaha, iyo guryaha xasiloon.

DARYEELKA CAAFIMAADKA IYO DHIMIRKA: HELITAANKA IYO QIIMAHA JABAN

Muddo 35 sano ah, DPS ayaa iskaashi la samaysay Dhakhaatiirta Carruurta Denver Health si ay u furto una maamusho Xarumaha Caafimaadka ee ku Saleysan Dugsiga (SBHC). Xarumaha Caafimaadka ee ku Saleysan Dugsiga waa xarumaha daryeelka aasaasiga ah oo ku yaala dugsiyada kuwaasoo siiya adeegyada caafimaadka, daryeelka dhimirka, daryeelka ilkaha iyo caafimaadka dabeecada ee la siinaayo ardayda DPS iyo walaalahood gaaray da'da dugsiga. Waxaa intaas dheer, SBHC ayaa sidoo kale baxsha waxbarashada caafimaadka iyo adeegyada diiwaan gelin/talo bixinta caymiska. Hadda, Denver Health Pediatrics ayaa maamusha 19 xarumaha SBHC ah kuwaasoo ku baahsan magaallada. Wax lacag ah lagama qaadaayo bukaanka ama qoyskiisa marka uu helo adeegyada ay bixiso xarunta SBHC.

ISBADELKA XEERKA

Xaalada Hadda: Hormuudka isbadelka xeerka ayaa ka dhigan inaan xeerarka cusub waafajino farsamada ugu haboon ee nidaamyada sharci dejinta, nidaamyada, iyo heer urur ba. Isbadelka Xeerka ayaa ku biloowda kala shaqaynta xeer dejiyaasha inay door firfircoon ku yeeshaan baabi'in xeerarka duugoobay ee aan andacayn xal u helida rabshada dhalinta.

Xaalada Mustaqbalka: DPS waxay la shaqayn doontaa magaallada Denver si:

- Loo sameeyo qiimaynta balaaran ee Xeerka: Dib u eegista dhammaan xeerarka saamaynaaya shaqada kahortaga rabshada dhalinta ee labada ururba si joogto ah si loo go'aansho haddii ay u shaqeynayaan sidii la rabay, haddii ay jiraan fursado hormarin ama haddii ay dhinacyada kale ay leeyihiin isla xeerarka kuwaasoo waxtar leh.
- Baabi'inta Xeerarka Waqtigoodu dhacay: Go'aaminta xeerarka labada urur ee aan hadda kadib waxtar u lahayn baahiyaha bulshada, ama dhibaatada ku ah dedaallada kahortaga rabshada dhalinta iyo qaadista talaabooyin lagu baabi'inaayo xeerarka aan shaqaynayn.
- Abuurista Barnaamijka Taageerada Kahortaga Rabshada Dhalinta: In la abuuro liiska balaaran ee barnaamijyada magaallada ee ka wada shaqaynaaya hormarinta kahortaga rabshada dhalinta si xubnaha baarlamaanku ay xeer cad uga soo saaraan meesha diirada la saaraayo.

- Xaqiijinta Maaliyada Barnaamijka: Muhiimad saarida barnaamijka kahortaga rabshada dhalinta inta lagu jiro hawsha miisaaniyada magaallada, taageerista kordhinta istaraatiijiyadaha mashruucyada la sheegay iyo difaaca maal gelinta barnaamijka inta miisaan dhimista la samaynaayo.

DIB U EEGISTA GURMADKA DHIBAATADA

Xaalada Hadda: DPS waxay ka qaybgalaa Kooxda Gurmadka Dhibaatada ee Bulshada Magaallada iyo Ismaamulka Dhammaan Magaallada Denver - oo ah iskaashi u dhexeeya Wakaaladaha CCD, Dugsiyada Dowladda ee Denver, iyo wakiillada bulshada si la iskugu dubarido isgaarsiinta iyo adeegsiga khayraadka inta lagu jiro dhacdo abuuraysa waxyeelo ka dhex dhacsa bulshada.

Kooxdaan waxay ku qeexdaa waxyeelada bulshada dhacdo badelaysa/saamaynaysay sida bulshadu caadiyan u dhaqanto ama u shaqayso. Dhacdooyinkaan ayaa loo qaybiyaa sadex qaybood oo kaladuwan:

- Saamaynta Helitaanka Bulshada: Xiliyada ay bulshooyinku heli waayaan ama waajahaan dhibaato ka haysata helitaanka adeegyada ama xarumaha magaallada ee xaafadooda.
- Rabshad ka jirta Bulshada: Xaaladaha ay xubnaha bulshadu yihiin dhibaneyaasha ama goobjoogeyaasha rabshad ka dhacday xaafadooda.
- Carqaladeeyaasha Bulshada: Arimaha bulshada ee sababi kara xaaladaha waxyeelada (tusaale, Daroogada, Burcada, ama Tahriibinta Dadka).

Marka dhibaatada bulshadu ay dhacdo, koox wakiilo muhiim ah oo ka socda Wakaaladaha CCD, DPS, iyo Bulshooyinka Denver ayaa isku imaan si loo qiimeeyo xaalada, u dejiyaan istaraatiijiyada qorshaha, ayna la shaqeeyaan wakaaladaha kale marka loo baahdo. Kadibna marka la qabto kulannada bilaha ah, kooxda ayaa dib u milicsada gurmadka dhibaatada, aqoonsada meelaha u baahan in hormar laga sameeyo, kana doona taageerada mudada fog ee bulshooyinka waajahaaya dhibaatada ayadoo si kahortag ah loo yareynaayo khatarta

Xaalada Mustaqbalka: Hawshaan ayaa lagasoo waariday Maarso 2023, sidaas awgeed, waxaan sii wadi doonaa inaan ku shaqeyno qaabkeeda iyo waxtareeda sanadaha soo socda.

LIFAAQA

FALCELINTA BULSHADA IYO XOGTA

Guudmarka Xogta

- Fikir celinta buuxda iyo Odorasyada

    - Gudiga La talinta Kormeeraha Guud
    - Natiijooyinka Isdhaafsiga lagu heshiiyay
    - Kulanka Bulshada
- Xogta Kooban ee Qiimaynta Tayada

Fikradaha Aan Dhageysanay iyo Meesha Lagu Dabaqay Qorshaha
Waxaan helnay tiro fikrado iyo mawduucyo ah oo aan ku biirinay qorshaha.

Mawduuca/Fikirka	**Goobta**
Akhri cabirka anshaxa	Farsamooyinka iyo Xeerarka Anshaxa -> Xaalada Mustaqbalka
Adeegsiga nidaamka Sheega Hubka gudaha dugsiyada	Nidaamyada Sheega Hubka
Wadaagista qorshe shaqo oo qeexaaya waxa dhacaaya xili gaar ah, waxa ay noqonayso talaabada guusha iyo sida/goorta la cabiraaya	Xogta Kooban ee Fulinta: Waxay aqoonsanaysaa jadwalka xiliga la abuuri doono
SROs - taageersan kana soo horjeeda.	Saraakiisha Imkaaniyaadka Iskuulka
Koror taageerooyinka caafimaadka maskaxda	Taageerada Caafimaadka Maskaxda -> Xaalada Mustaqbalka
Qeexida waxa hadda socda iyo waxa la dhaqan gelin doono mustaqbalka.	Qayb kasta waxay leedahay "Xaalada Taagan" iyo "Xaalada Mustaqbalka" oo la cadeeyay
Waxay xog gaar ah ka bixinaysaa waxa la dhaqan gelin doono sanad Dugsiyeedka 23-24	Kudar lifaaqa
Ka dhig mid fudud oo qodobaysan, una isticmaal luu luuqad fudud, oo erayo kooban	La tafatiray meel kasta
Bixi shax ay ku qoran yihiin dhammaan tababarada ayna ku jira waxa/cida tababaradu qusayso iyo haddii ay qasab yihiin	Kudar lifaaqa

FFikradaha Aan Dhageysanay iyo Meesha aan lagu Darin Qorshaha
Waan tixgelinay fikirkaaga waana tan sida aan ugu darnay/aanaan ugu darin qorshaha

Mawduuca	**Jawaabta**

Fikir qeexan	Waxaan helanay fikir iskasoo horjeeda oo la xiriira xeelad noocaas ah - xubnaha bulshada qaar ayaa taageersan kuwo badana waa diideen; sidoo kale waxaa jira cilmi baaris wayn oo muujinaysa inaysan tani ahayn istaraatiijiyad waxtar leh si looga hortago in hub lala soo galo dhismaha loona ilaaliyo waqtiga yar ee ay dadka waawayn u hayaan kormeerka iyo la shaqaynta ardayda.
Ardayda leh qorshaha badqabka waa inay ka qaybgalaan dugsi kale aana loo ogolaan dugsi caadi ah.	Waxbarashada bilaashka ah ee haboon oo dadwayne (FAPE) waa xuquuqda aasaasiga ah oo xaqiijinaysa in si siman loo helo waxbarasho ayadoo aan cidna la takoorin, ayadoo aan laga eegayn shaqsiyada qofka, awoodaha, ama xaaladaha.
Yareynta tirada fasallasa iyo xajmiga shaqada fasalka	Yareynta tirada ardayda fasalka oo keliya ayaan xal u noqonayn dhammaan arimaha badqabka dugsiga la xiriira. Arimaha kale, sida xeerarka balaaran ee badqabka, shaqaalaha sida fiican u tababaran, khayraada ku filan, isgaarsiinta waxtarka leh, iyo goobaha dugsiga ee taageerada, ayaa sidoo kale doorar waawayn ka qaata kor u qaadista iyo joogtaynta goobta dugsi amaan ah. Waxaan ku kalsoon nahay in hogaamiyaasha dugsiga oo kaashanaaya shaqaalahooda, macalimiinta, gudiyada Wada shaqeynta Dugsiga ay ka wada shaqayn karaan dejinta qabyo qoraalka miisaabiyad ka dhigaysa tirada fasallada kuwo la maamuli karo iyo cabir amaan ah.
U ogoloow hogaamiyaasha dugsiga, badelka hogaamiyaasha degmada, awooda go'aan gaarista ee la xiriirta u wareejinta ardayda (degmada ama ka baxsan degmada) dugsiyadooda.	Sida looga dooday qaybta hore ee qorshaha, Dugsiyada Dowladda ee Denver waa degmo dookh qofku leeyahay, waalidiintuna waxay xaq u leeyihiin inay doortaan dugsiga ugu haboon. Ayadoo tiir dhexaad u noqonaysa hawsha kala wareega maamulka degmadu keliya kuma shaqeyn karto si kalsooni leh, laakiin sidoo kale waxay maamulaysaa

	arimaha ku dhaqanka, shuruudaha sharciga, waxayna yareynaysaa dhacdooyinka eexda loo qasday ama kama'a ah, iyo arimo kale oo hogaamiyaasha dugsiga laga yaabo inaysan ka warqabin ama awood u lahayn adeegsigooda.
Macalimiinta iyo shaqaalaha waa inay helaan kulanno aan xadidnayn oo bilaash ah oo la yeeshaan baxnaaniyaha (BetterHelp?). Kumana saleysna "dhacdooyinka". Shan kulan calaa dhacdo kuma filna.	Waxaan qireynaa in bixinta shan kulan aysan mar kasta ku filnayn in si ku filan loo xaliyo baahiyaha caafimaadka dhimirka ee shaqaalaheena. Arintaas awgeed, waxaan si wayn u fahmaynaa muhiimada siinta khayraad dheeraad ah si loo taageero faya qabkooda guud. Si waafaqsan fahankaan, waxaan si buuxda u taageeraynaa inaan si firfircoon u eegno arimaha kaladuwan si aan qaab waxtar ugu buuxino baahidaan. Waxaa intaas dheer, waa muhiim in la ogaado in kiiska dhacdooyinka goobta shaqada, kulannada magdhawga shaqaalaha la baxsho bilaa xadidaad.
Amrida ciidanka hubaysan ee DPD inay baaraan goobta	Caadiyan, baarista booliiska waa in lagu saleeyaa "sabab macquul ah." Sabab macquul ah waxaa lagu qeexaa aasaas maquul ah oo lagu aamini karo in jebinta sharcigu dhacday ama cadeynta jebinta ay jirto si loo baaro. Hase yeeshee, qodobkaan ma quseeyo baarista ay sameeyaan saraakiisha dugsiga. Taas badelkeed, si loo baaro dhismaha, gaariga, ama munaasabada dugsiga si sax ah, baaristu waa inay keliya qusaysaa arin gaar ah oo macquul ah. Sidaas awgeed, saraakiisha booliiska ayaa keliya samayn kara qayb yar oo baaris ah oo saraakiisha dugsigu ay fulin karaan. Qasab ka dhigida in booliisku baaraan ayaa saamayn xun ku reebaysa badqabka dugsiga.
Waa meeqa qiimaha qorshahaan?	Saamaynta Dhaqaalaha

ILLAHA

Muhiimadaha 23-24
Khulaasada dhammaan talaabooyinka iyo hindisooyinka la dhaqan gelin doono sanad Dugsiyeedka 23-24

Xadiga iyo Xadidaadaha Caafimaadka Dhimirka ee DPS
Guudmarka Taqasusleyaasha Caafimaadka Dhimirka ee Dugsiga (Shaqaalaha Bulshada Dugsiga, Dhakhtarka dhimirka) Awooda iyo Xadidaadaha bixinta adeegyada

Tababarada iyo Waxbarashada Xirfadeed
Guudmarka dhammaan tababarka la baxshay sanad Dugsiyeedka 23-24 ee loogu talagalay kor u qaadista Badqabka Jirka iyo Dhimirka ee Ardayda iyo Dadka waawayn ba

Khayraadka Habraacyada Badqabka

Dukumiinti loo sameeyay inay DPS u adeegsato shaqaalaha leh qeexitaano, doorar iyo waajibaad dhammaan hawlaha badqabka si loo taageero kahortaga iyo gurmadka walaacyada badqabka.

KHAYRAADKA ABUURISTA QORSHAHA

Codka Bulshada

- Diiwaanka Amarada Gudiga
- Sharciga: Federaalka iyo Gobalka
- Xogta Wada Shaqaynta SRO
- Qorshaha Kahortaga Rabshada Dhalinta ee Magaallada ee 2023
- Waaxda Waxbarashada Maraykanka:Diyaar Garoowga iyo Maaraynta Xaalada degdega ah ee Dugsiyada Xarunta Caawimaada Farsamada
- Bayaanka Badqabka Dugsiga ee DAC
- Xalalka iyo Xogta Badqabka ee BFAC iyo Badqabka Dugsiga ee BFAC
- Mawduucyada Dugsiga Sare ee Bariga iyo Ururka U doodista Badqabka Waalidiinta (P-SAG) (War saxaafadeedkii 4/17)
- Bayaanka Badqabka Dugsiga ee DCTA
- Bayaanka Badqabka Dugsiga ee DSLA
- Xogta Xog Uruurinta DSLA
- Warbixinta kooxda caafimaadka Dhimirka

- **Ururada Gudiga Talo Bixinta Bulshada:** RootED, Spark the Change Colorado, Montbello Organizing Committee, Movimiento Poder, Families Forward, Life-Line Colorado / Urban Impact, African Chamber of Commerce, African Leadership Group, Black Family Advisory Council, Lifespan Local, Mental Health Center of Denver, Servicios De La Raza, The Spring Institute, Clayton Early Learning, Southwest Denver Coalition, Faithbridge

ILAHA DIBADA

- Diyaar Garoowga iyo Maaraynta Xaalada degdega ah ee Dugsiyada
  - Tusmada: Doorka degmada ee abuurista Qorsheyaasha Hawlgalka Xaalada Degdega ah ee Dugsiga ee tayada sare leh
  - Galka xogta ee fasallada K-12 iyo degmooyinka si ay u abuuraan Qorsheyaasha Hawlgalka Xaalada Degdega ah ee Dugsiga
  - Liiska Hubinta ee Qorsheyaasha Hawlgalka Xaalada Degdega ah ee Dugsiga
  - Buuga Shaqada ee Qorsheyaasha Hawlgalka Xaalada Degdega ah ee Dugsiga
  - Mawduuc gaar u ah Khayraadka Qorsheyaasha Hawlgalka Xaalada Degdega ah ee Dugsiga

- **KHAYRAADKA MAGAALLADA DENVER**
  - Denver 311 waxay siisaa dadka deeggaan qaab fudud, oo la heli karo oo ay ku adeegsadaan magaallada.
  - Goob Sheegta Adeegyada Dhalinta waxaa maamula Xafiiska Arimaha Xaruunta Denver (OCA) wuxuuna baxshaa xog ku saabsan noocyada kaladuwan ee barnaamijyada siinaaya dhalinta badqabka, foognaan iyo firfircooni. Adeegyada ayaa sidoo kale la gaarsiiyaa qoyska oo dhan.
  - DenverStrong waa barnaamij ka tirsan Xafiiska Xeeladaha Caafimaadka Habdhaqanka oo loo sameeyay inuu wax baro uuna ka taageero bulshada Denver ciladaha caafimaadka dhimirka. Adeegyada waxaa ka mid ah tababarka, talo bixin, iyo wada shaqaynta bulshada. Tusmada Khayraadka Bulshada ayaa lagu heli karaa Ingiriis (PDF, 4MB) iyo Isbaanish (PDF, 4MB). Waa tusmo kaa caawinaysa helitaanka goobaha adeegga.
  - Xarunta Xalalka Caafimaadka dhaqanka ayaa bixisa goob diirada saaraysa daawaynta, ikhtiyaari ah oo amaan ah oo ay helayaan dadka waawayn ee waajahaaya dhibaatada caafimaadka dhaqanka. Xaruntu waxay bixisaa adeegyada xasilinta dhibaatada, guriyaynta ku meel gaarka ah iyo caawimaada joogtada ah ee caafimaadka dhimirka iyo isticmaalka maandooriyaha, iyo sidoo kale caawimaad ku aadan u wareegista la noolaanshaha bulshada. Waxaa maamusha WellPower, oo qandaraas kula jirta Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha iyobii'ada, Xarunta Xalalka Caafimaadka Habdhaqanka – oo ah xarun ku fadhida bad dhan 28,741- oo ku taala Galbeedka Denver – waxay bixisaa daryeelka adag ee mudada kooban iyo daawaynta shaqsiyaadka

waajahaaya dhibaatada caafimaadka dhimirka, ayadoo ka leexinaysa inay joogaan meelaha aan saxda ahayn ee aan muhiimka ah, sida qolka xaalada degdega ah ama xabsiga.

- Second Wind Fund wuxuu diirada saaraa kor u qaadista helitaanka iyo bixinta daryeelka kahortaga isdilka. Barnaamijku wuxuu siiyaa qoysaska goob ay ka helayaan adeegyada daawaynta ee carruurta iyo dhalinta khatarta ugu jira inay isdilaan. Marka ilmo yar ama kuray, ilaa 19 sano jir ah, uu khatar ugu jiro inuu isdilo uuna waajahaayo dhibaato dhaqaale ama carqalad bulsho oo ka haysata helitaanka daawaynta caafimaadka dhimirka, Second Wind Fund ayaa daboolaysa qarashka baxnaaninka.
- Adeegyada Masiibada ee Colorado ayaa bixisa adeegyada laynka 24/7 shaqeeya, oo bilaashka ah ee Xirfada Xiliga dhibaatadu jirto oo la siiyo dadka dagan Gobalka Colorado, ayadoo kaashanaysa Xarumaha Bilaa Balanta la Tago iyo Adeegga Dhibaatada ee Wareega ee Colorado. Adeegyada Dhibaatada ayaa lagu baxshaa taleefanka, fariin qoraal, ayadoo la kaashanaayo Laynka Taageerada la heli karo ee Iskaashatada Dhibaatada ee Rocky Mountain. Adeegyada ayaa la heli karaa ayadoo la wacaayo 1.844.493.TALK ama fariin qoraal erayga 'TALK' loogu diraayo 38255.